DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



# ISTIRAATIIJIYADDA QARANKA EE XALKA WAARA (2020 – 2024)

DHISIDDA MUSTAQBAL WANAAGSAN

National Durable Solutions Strategy (2020-2024)

Macluumaadaka dabaacaddaan dib ayaa loo soo saari kara, waxa lagu keydin karaa nidaam si fudud looga heli karo ama looga sii gudbin karo, qaabkii la doono sida dhijitaalka, farsamo, dabaacaada, duubista iyo siyaabo kale iyada oo loo baahaneyn fasax ama ogolaansho hore laakin ay qasab tahay in la xuso in isha macaluumaadka ama xigashada tahay daabacaadan.

**Soo Jeedin Xigashada:**

Xafiiska Xalalka Waara ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara 2020.

**Barta Internetka:**

www.mop.gov.so

**Baraha Bulshada:**

Facebook:
https://www.facebook.com/mopied/

Twitter: @MoPIED_Somalia
@DSS_Somalia

Istiraatiijiyadda waxaa soo saartay Dowladda Federaalka Soomaaliya oo tageero ka heleysa Hay'adda Qaxootiga Norway ee Soomaaliya iyo deeq bixiyeyaal kale oo muhiim ah.

DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# ISTIRAATIIJIYADDA QARANKA EE XALKA WAARA

# (2020 – 2024)

# ERAYGA WASIIRKA

## “Waxaan dadaal xooggan ugu jirnaa sidii aan mustaqbal la joogteyn karo ugu dhisi laheyn bulshada barakacday ee Soomaaliya”

Waxaan ku faraxsanahay in aan idiin soo bandhigo Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara 2020-2024 taas oo tilmaameysa aragtida istiraatiijiga ah iyo ujeeddooyinka loo arkay in ay muhiim u yihiin sidii aan u xaqiijin laheyn in ay xubnaha nugul ee bulshadeenna ka midka ah helaan adeeg wanaagsan. Ujeeddooyinka istiraatiijiga ah ee istiraatiijiyaddan waxa ay bar-tilmameedsanayan sidii loogu heli lahaa xalka waara bulshada uu saameeyay barakaca iyada oo loo marayo hannaanka falanqeynta ku dhisan xaqiiqada, xalku in uu ka yimaado bulshada, hanaanka dhismaha go’aanada loo dhanyahay iyo adeegsita hanaan howled isku xiran.  Gaar ahaan, Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara ayaa noqon doonto hagaha howlaha iyada oo dejisay aragtida mideysan ee hageysa dhaqan gelinta howlaha xalka waara ee Soomaaliya, shanta sano ee soo socoto

Si haddaba loo fuliyo ujeeddooyinkan istiraatiijiga ah, waxaan u baahannahy horumarinta jawi saamaxayo kaas oo oo tabarteenna dadeed, dhaqaale iyo kaabey-yaasha muuqdo si munaasib ah loogu qeybiyo, laguna gaarsiiyo bulshada uu saameeyay barakaca. Laga billaabo iminka, istiraatiijiyaddan ayaa saldhig u noqon doonta dhamman dadaallada Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliya si qaab la joogteyn karo wax looga qabto barakaca Soomaaliya. Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) waxa ay ku wajaheysaa wejigan xiga ee fulinta istiraatiijiyaddan iyada oo qabto rajo weyn, taas oo ku saleysan guusha ansixinta istiraatiijiyaddan qaran. Iyada oo la eegayo guulahan, duruufaha gudaha iyo kuwa dibadduba waxa ay dalbanaya in WQM&HDH ay ka fekerto fursadaha mustaqbalka ee xalka waara taas oo laga gaari karo guul la taaban-karo kaliya marka lagu xiro istiraatiijiyaddan fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad (QHQ-9).

Dhiirigelinta istiraatiijiyadda xalka waara, dhaqan gelinteedaba waxa ay si weyn uga qeyb qaadan doonta fulinta Qorshaha Horumarinta oo ay ahmiyad gooni ah u tahay. Intaa waxaa dheer, iyada oo la raacayo ahmiyadaha istiraatiijiga ah ee lagu qeexay istiraatiijiyaddan, WQM&HDH waxa ay diiradda saari donta geedi socod ay hoggaamineyso dowladda Soomaaliya iyada oo isla markaasna cayimeysa fulineysana howlaha iyo siyaasadaha xalka waara ee Soomaaliya. Waxaan hubaa, iyada oo ay dowladdu qaadaneyso kaalinteeda hoggaamineed iyo wada shaqeyn ballaaran oo dhex marta dhammaan bahwadaagta, ujeeddooyinka istiraatiijiyaddan ayaa noqon

doono kuwo fulo isla markaana isku badala wax qabad muuqdo oo aan dhammanteen ku wada faani karno. Marka aan maalgelineyno xalka waara ee barakaca, waxaan maalgelineyna dhismaha mustaqbal wanaagsan oo ay helaan ummadda Soomaaliyeed, iyo bulshada gobolka oo dhan. Sidaa daradeed, waxaan jeclaan lahaa in aan idiinkugu baaqo dhammantiin in aad nagala qeyb qaadataan fulinta howshan muhiimka ah. Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara waxa ay gunaanad u tahay dadaallo dheeraad ah oo ay sameysay Dowladda Federaalka Soomaaliya, bahwadaagteeda iyo saamileyda xalka waara kuwaas oo afkaartoodii muhiimka aheyd lagu biiriyay istiraatiijiyaddan. Waxan jeclaan lahaa in aan uga mahadceliyo dhammantiin taageerada aad ka geysateen intii lagu gudo jirray geedi-socodkii wadatashiyada iyo qoraalka ee istiraatiijiyaddan.

Gebo-gebadii, qorista iyo horumarinta istiraatiijiyaddan ma'aaney suurto gasheen la'aanta shaqadii adkeyd iyo doorkii hoggaamineed ee ay ka qaadatay Marwo Zahra Abdi Mohamed, Agaasimaha Waaxda Xalka Waara ee WQM&HDH oo ay ka go'antahay wax u qabashada bulshada uu saameeyay barakaca taas oo sababtay horumarinta iyo guul-ka gaarista Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara oo looga gol-leeyahay wax ka qabashada barakaca ragaadiyay Soomaaliya.

**Danjire. Jamaal Maxamed Xasan**
Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta,
Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

"Ujeedka aas-aasiga ah ee Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara ee Soomaaliya waa sidii loogu heli lahaa dadka barakacay xal waara iyada oo loo marayo hanaanka loo yaqaan how-gelinta 'dowladda oo dhan' iyo 'bulshada oo dhan'. Istiraatiijiyaddu waxa ay tiigsaneynsa sidii loo xallin lahaa barakaca iyada oo is beddel muuqdo lagu gaarsiinayo dadka uu barakacu saameeyay helista adeegga bulshada iyo ku noolaanshaha meel amni ah, kaas oo ka ilaalinayo guri-raris (SO1); ka qeyb gelista howlaha dadweynaha iyaga oo dareemaya jinsiyad buuxda (SO2); in ay heli karaan hab-nololeed iyo shaqo (SO3); iyo sidoo kale helista caddaalad (SO4) markaa unbey ku guuleysan karaan helista xalka waara maxaa yeelay waxa ay noqonayan kuwo isku filan, dibna ugu soo laabto bulsho weynta. Haddi la rabo in lagu guuleeyso xalka waara ee Soomaaliya, waxaa loo baahan yahay in wada shaqeeyan Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyo dhammaan bahda iyo saxiibbada Soomaaliya. Guusha xalka waara waxa uu sidoo kale ku xiran yahay dhismaha isbaheysiyo ku dhisan kooxaha isku ujeedka iyo danta ah, iyo xiriir joogto ah oo lagama maarmaan uwada ah sidii loo joogteyn lahaa ujeedka iyo usku duwista waxqabadka iyo howlaha xalka waara".

**Zahra Abdi Mohamed**
Agaasimaha Xafiiska Xalka Waara ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

# MAHADNAQ

Istiraatiijiyadda Xalka Waara (NDSS) waxaa la diyaariyay iyada uu hoggaaminayo Xafiiska Xalka Waara ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) oo kaalin lixaadle ka heshay Xog-heynta Qaranka ee Xalka Waara. Xog-heyntu waxa ay isku keenta 14 hay'adood oo dowladda Soomaliya ka tirsan kuwaas oo bixyo taageero farsamo, hagid istiraatiiji ah oo heer sare ah iyo kor-joogteyn si loo xaqiijiyo in howlaha xalka waara laga dhigo ahmiyad lagana fuliyo dhammaan heerarka kala duwan ee Soomaaliya. Xubhana xog-heynta waxaa kamid ah: Xafiiska Ra'isul Wasaaraha (OPM); Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta (MoIFAR); Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka (NCRI); Wasaaradda Gargaarka iyo Maaraynta Musiibooyinka (MoHADM); Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED); Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA); Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib u dhiska iyo Guriyenta (MoPWHR); Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka (MoWHR); Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka (MoAI); Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (MoEWR); Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda (MoFMR); Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga (MoFA); Agaasinka deegaanka iyo Isbedelka cimilada (DECC) ee Xafiiska Ra'isul Wasaara; Hay'adda Socdaalka Iyo Jinsiyadaha Soomaaliya. Diyaarinta NDSS waxaa si lixaadle iskaga kaashaday iyada oo ay hoggaamineyso Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo taageero farsamo ka heleysa Hay'adda NRC. Guddiga Khubarada Farsamo (TAC) ee taageeray geedi-socodka diyaarinta istratiijiyadda waxaa ka mid ah: hay'adda Concern Worldwide, Barnaamijka Xalka Waara, Bahda Xalka Waara ee Danwadaag, hay'adda IOM, Xafiiska isku dhafan ee iskuduwidda Soomaaliya ee Qaramada Midoobay (RCO), UNDP, UNHCR, xog-heynta xalka waara ee gobolka (ReDSS), iyo Xog-heynta Qaran ee Xalka Waara oo ay wakiilka ka tahay Wasaaradda Qorsheynta iyo hay'adda NCRI.

Tallabooyin gaar ah ayaa la qaaday si loo xaqiijinayo in la helo aragtiyo kala duwan oo lagu biiriyo istiraatiijiyadda, 120 qof oo xog-ogaal ah ayaa lagu wareystay kuwas oo ka tirsan hay'adaha dowladda ee heer federaal iyo heer gobolba, deeqbixiye yaasha, hay'adaha Qaramada Midoobay (QM), hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah, ururada dowladaha, ururada bulshada rayidka ah, ganacsatada, dadka uu barakaca saameeyey, aqoonyahnno, hoggaamiyeyaasha bulshada ee heer qaran, iyo heer dowlad goboleed. Liiska inta ku biirisay fakar ee istratiijiyaddan NDSS waxaa laga dheehan karaa lifaaqa 3aad. Waxan sidoo kale u mahadcelineyna dadka gudaha dalka ku barakacay, qaxootiga soo labanaayo, xubnaha bulshada marti gelisay iyo qaxootiga kuwaas oo nala wadaagay maclumaad iyo khibrado kaalin ka qaatay diyaarinta istratiijiyaddan. Kooxda iskuduwidda

farsamo ee diyaarinta istiraatijiyadda NDSS ayaa ka koobnaa Zahra Abdi (Agaasimaha Xalka Waara ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha) Shezane Kirubi (Sarkaal xalka waara ee Hay'adda Qaxootiga Norway ee NRC) Evelyn Aero (Lataliyaha gobolka ee u qaabilsan la talinta iyo kaalmada sharciyada ee NRC) Teresa Del Ministro (iskuduwaha xalka waara ee xafiiska isku dhafan ee QM).

Waxaa sameeyay xog aruurinta iyo shaqada goobta Fauzia Nakueira iyo Xarunta Horimarinta Daraasadaha Dadweynaha ee Geeska Afrika oo ah lataliyaal madax bannaan oo loo igmaday baaxadda shaqadan. Hanaanka kormeerka iyo qiimeynta ee weheliiya NDSS waxa la dejiyay iyada oo laga faa'iideysanyo taageerada farsamo ee adeegga tirakoobka dadka gudaha dalka ku barakacay oo loo soo gaabiyo (JIPS). Waxaa mahad gaar ah leh Professor Walter Kaelin (La-taliyaha gaarka ah ee RC/HC ee Somalia iyo Ukraine una qaabilsan ilaalinta xuquuqda dadka gudaha dalka ku barakacay) iyo Peter de Clercq (Kuxigenkii hore ee Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya islmarkaasna ahaa u Qaabilsanaha Iskuduwidda Howlaha Gargaarka Bini'aadminimada ee Soomaaliya) kaas oo si guud ugu taageeray afkaar dhaxal gal ah intii ay socotay diyaarinta istiraatiijiyaddan NDSS. Waxaa jiro dad kale oo ka qeyb qaatay horumarinta istiraatiijiyadda NDSS oo aan halkan lagu wada xusin Karin. Wax tarkoodii si weyn ayaan u qireyna dhammantood. Ugu dambeyn, istiraatiijiyadda waxaa dadaal badan geliyay dadka la wareysay waxa aanan abaal weyn u haynaa dhammaan intii ka qeyb qaadatay iyo sidoo kale shaqaalaha xafiisyada dowladaha hoose kuwaas oo bixiyay taageero ku aaddan xog iyo falanqeyn.

# XURUUFAHA EREYO LAGA SOO GAABIYEY

| | |
|---|---|
| **AIMS** | Aid Information Management System/ Nidaamka Xog Aruurinta Deeqaha |
| **ASR** | Assisted Spontaneous Return/Barnaamijka Tageerada Dadka Iskood u Laabanayo |
| **BRA** | Banadir Regional Administration/ Maamulka Gobolka Banaadir |
| **CAPs** | Community Action Plans/ Qorshe Howleedyda Bulshada |
| **CRRF** | Comprehensive Refugee Response Framework/ Hannaanka Guud ee Wax u Qabasha-da Qaxootiga |
| **DACs** | Displacement Affected Communities/ Dadka Barakacu Saameeyay |
| **DECC** | Directorate of Environment and Climate Change/ Agaasinka Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada |
| **DINA** | Droughts Impact and Needs Assessment/ Qiimeeynta Saameynta Fatahaadaha |
| **DNS** | Directorate of National Statistics/ Agaasinka Istatistikada Qaranka |
| **DSRSG/RC/HC** | Integrated Office of the Deputy Special Representative of the Secretary-General, Resident and Humanitarian Coordinator for Somalia/ Xafiiska Iskudhafka ah ee Ku Xi-geenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud, ahna Isuduwaha Gargaarka Bini'aad-animada ee Soomaaliya |
| **DSI** | Durable Solutions Initiative/ Dadaalada Xalka Waara |
| **DSS** | Durable Solutions Secretariat/ Xog-heynta Xalka Waara |
| **FGS** | Federal Government of Somalia/ Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) |
| **FMS** | Federal Member States/Dowlad Goboleed |
| **GRC** | Global Refugee Compact/ Heshiiska loo Dhanyahay ee Qaxootiga Adduunka |
| **GRF** | Global Refugee Forum/ Kulanka Qaxootiga Adduunka |
| **IASC** | Inter-Agency Standing Committee/ Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Kadhexeeya |
| **IDPs** | Internally Displaced Persons/ Dadka Gudaha Dalka Ku Barakacay |
| **IGAD** | Inter-Governmental Authority on Development/ Urur-Goboleedka IGAD |
| **JIPS** | Joint Internally Displaced Persons Profiling Service/ Adeegga Tirakoobka Dadka Guda-ha Dalka Ku Barakacay |
| **IOM** | International Organisation for Migration/ Hay'adda Caalamiga ee Socdaalka |
| **KII** | Key Informant Interview/ Wareysi Qof oo Xog-ogaal Ah |
| **MSME** | Micro Small and Medium Enterprise/ Ganacsiyada Yar-yar iyo Kuwa Dhexe |
| **MoAI** | Ministry of Agriculture and Irrigation/ Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka |
| **MoEWR** | Minister of Energy and Water Resources/ Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha |
| **MoFA** | Ministry of Foreign Affairs/Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga |
| **MoFMR** | Ministry of Fishery and Marine Resources/ Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda |
| **MoHADM** | Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management/ Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka |
| **MoIFAR** | Ministry of Interior, Federalism and Reconciliation/ Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta |
| **MoLSA** | Ministry of Labor and Social Affairs/ Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada |
| **MoPIED** | Ministry of Planning, Investment and Economic Development/ Wasaaradda Qorsheyn-ta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha |

| | |
|---|---|
| **MoPWRH** | Ministry of Public Works, Reconstruction and Housing/ Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta |
| **MoWHR** | Ministry of Women and Human Rights/ Wasaaradda Haweenka iyo Xaquuqul Insaanka |
| **NCRI** | National Commission for Refugees and Internally Displaced Persons/ Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka |
| **NDP** | National Development Plan/ Qorshaha Horumarinta Qaranka |
| **NDRA** | National Displacement and Refugee Agency/ Hay'adda Barakaca iyo Qaxootiga Somaliland |
| **NDSS** | National Durable Solutions Strategy/ Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara |
| **NRC** | Norwegian Refugee Council/ Hay'adda Qaxootiga ee Norway |
| **OCHA** | United Nations Office of Coordination for Humanitarian Affairs/ Xafiiska Qaramada Midoobay Isku Xirka Arrimaha Bini'aadanimada |
| **OPM** | Office of the Prime Minister/ Xafiiska Raisul Wasaaraha |
| **ReDSS** | Regional Durable Solutions Secretariat/ Xog-heynta Xalka Waara ee Gobolka |
| **RRF** | Recovery and Resilience Framework/ Nidaamka Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka |
| **RSD** | Refugee Status Determination Committee/ Guddiga Go'aan ka Gaarista Xaaladaha Qaxootiga |
| **SHFS** | Somalia High Frequency Surveys/ Sahanka Xogtiisu Sarreyso ee Soomaaliya |
| **SPVA** | Somalia Poverty and Vulnerability Assessment/ Qiimeynta Heerka Saboolnimada iyo Nuglaanshaha |
| **TVET** | Technical and Vocational Education and Training/ Taba-barrada Barashada Farsamada iyo Xirfadaha Gacanta |
| **UNDP** | United Nations Development Programme/ Hay'adda Qaramada Midoobay ee Barnaamijyada Horumarinta |
| **UNHCR** | United Nations High Commissioner for Refugees/ Hay'adda Qaramada Midoobay ee Arrimaha Qaxootiga |
| **UNOPS** | United Nations Office for Project Services/ Xafiiska Qaramada Midoobay ee Adeegyada Mashruucyada |
| **WFP** | World Food Programme/ Barnaamijka Cunnada Aduunka |

# TUSMO

ERAYGA WASIIRKA 4
MAHADNAQ 7
XURUUFAHA EREYO LAGA SOO GAABIYEY 9



01

**HORDHAC** 14
DULMARKA GUUD 15
KU SAABSAN ISTIRAATIIJIYADDAN 17



02

**DULUCDA IYO SABABTA** 20
MACLUMAADKA DADWEYNAHA 21
Duruufaha Barakaca 21



03

**FALANQEYNTA SABOOLNIMAD** 24



04

**MUUQAALKA GUUD EE XALKA WAARA EE SOOMAALIYA** 28
HANAANKA SHARCIGA IYO SIYAASADDA 29
GEEDI SOCODKA XALKA WAARA EE KU XUSAN HANAANKA SIYAASADAHA 33
BARNAAMIJYADA SOO SOCDA IYO WADCIGA SIYAASADAHA XALKA WAARA 34



05

ARAGTIDA FOG 40

Xalka Waara Waa Ahmiyad Muhiim ah oo Ku Xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP-9 2020-2024) 42

Isku Xirka Howlaha Bini'aadminimada Horumarinta iyo Kuwa Nabad-Dhiska 43

Xog-heynta Xalka Waara iyo Waajibaadkeeda 44

Mabaadii'da Xalka Waara 45



06

UJEEDDOOYINKA ISTIRAATIIJIGA AH IYO MEELAHA MUHIIMKA AH EE HOWLAHA XALKA WAARA 48

UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 1AAD 49

SO1 AHMIYADAHA 51

UJEEDKA ISITRAATIIJIGA AH EE 2AAD: 54

SO2 AHMIYADAHA 57

UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 3AAD 59

SO3 AHMIYADAHA 61

UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 4AAD 64

SO4 AHMIYADAHA 65

UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 5AAD 68

SO5 AHMIYADAHA 69

Ahmiyadaha Dowladda ay Soo Jeedisay oo Kooban: 70

U Diyaar Garowga Musiibooyinka iyo Wacyigelinta 70

Falcelinta 70

Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka 70

Xalka 70

Xallinta Barakaca Ka Dhasha Abaaraha 71



07

ARRIMAHA ISKU DHAFAN 72

Magaleynta iyo Kaabeyaasha 73

Dhowrista 74

Ka Soocista Bulshada iyo Takoorka Ragaaday 74

Isla Xisaabtanka Dadka uu Saameeyay Barakaca 75

Jinsiga 75

Isbedelka Cimilada 76



# 08

ISKAASHI, HOGGAAN IYO ISKU DUWID 78



# 09

HANAANKA KORMEERKA, QIIMEYNTA IYO WARBIXINNADA 82

Tilmaamaha Horumarka ee Qorsha Howleedka Xalka Waara ee NDSS 83

QORSHE HOWLEEDKA: ISTIRAATIIJIYADDA QARANKA EE XALKA WAARA EE SOOMAALIYA (2020-2024) 85

HABKA LOO DIYAARIYAY 96

LIISKA HAY'ADAHA LAGALA TASHTAY 97

ERAY BIXIN 98

ENDNOTES 100

# 1 HORDHAC





## DULMARKA GUUD

Soomaaliya waxa ay sii wajaheysa caqabado badan oo ku gadaaman sidii ay ugu heli laheyd xalka waara dhibaatooyinka ka dhasha barakicinta khasabka ah. Barakacan sii daba-dheeraanaya, ee wiiqaya nabadgelyada iyo dib-u-dhiska dalka, ayaa sare usii qaadaya nuglaanshaha Soomaaliya iyo kan Gobolka Geeska Africa. Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), oo kaashaneysa bah-wadaagta horumarinta, ayaa garowsatay in ay muhiim tahay in ay iska kaashadaan ururada ka shaqeeya gargaarka bini'aadminimada, horumarka, nabadeynta, dowlad-dhiska iyada oo ay hoggaamineyso dowladda kana tis-qaadeyso Dadka Barakaca khasabka ah Saameeyay loona abaari lahaa sababaha keeno barakaca iyo caqabadaha ka dhasha.

Dhismaha Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah ayaa sare u sii qaaday dadaalada isku dubba-ridka iyo lahaanshaha hindisaha wax looga qabanayo arrimaha barakaca. Tan iyo 2016, ka go'naansho siyaasadeed xooggan oo looga gol leeyahay sidii loogu heli lahaa xal waara Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) ayaa sare u sii qaadday heerka hoggaamineed ee dowladda dhexe iyo kuwa hoose oo dhan walba leh.

Tusaale ahaan, in lagu daray ajandaha xalka waara Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo kuwa dowlad goboleedyada iyo maalgashiga ayaa horseeday sii xoogeysashada hay'adaha ku howlan xalka

> In lagu daray ajandaha xalka waara Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo kuwa dowlad goboleedyada iyo maalgashiga ayaa horseeday sii xoogeysashada hay'adaha ku howlan xalka waara ee barakaca.

waara ee barakaca. In lagu daray shaqooyinka xalka waara ahmiyadaha horumarinta arrimaha bulshada ee Soomaaliya ayaa Iyana abuurtay jawi horseedaya taageero lala garab istaago fekradaha wax tarka iyo hal-abuurka u leh howlaha xalka waara.

Sidoo kale, Soomaaliya ayaa meel marisay siyaasado dhowr ah oo looga gol leeyahay ilaalinta xuquuqda Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) taas oo hoos u dhigtay takri-falka iyo caqabadaha ka dhasha gabood-falka, sinaan la'aanta, la xisaabtan la'aanta iyo faquuqa. Si taa la mid ah, waxaa go'aan adag ka ah Dowladda Soomaaliya sidii ahmiyad loo siin lahaa xalinta barakaca si loo dhimo saboolnimada loona gebo-gebeeyo hanaanka deyn cafiska. Si aan lamid aheyn dadka kale ee saboolka ah, Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) waxa ay ku nool yihiin magaalooyinka taas oo sahleyso dadaalada hoos loogu dhigayo saboolnimada. Guud ahaan, heerkan taageero ee ay Dowladdu fidineyso ayaa si weyn usii xoojinaya dadaallada wax tarka leh ee xalka waara loogu helayo barakaca.

Hannaanka Guud ee wax u qabashada qaxootiga (CRRF)/Heshiiska loo Dhanyahay ee Qaxootiga Adduunka (GRC), Baaqii Neyroobi iyo baaqyada kale ee la xiriira waxbarashada, shaqooyinka, quudka iyo adkeysiga ayaa dhamaan ah kuwo muujinayo baahida loo qabo hannaan xooggan oo isku keenayo dadaalada gobolka, kuwa dunida iyo xalka waara.

Iyada oo la garowsan yahay in si loogu helo barakaca khasabka ah xal waara ay u baahan tahay ka wada shaqqeynta hay'ado badan oo iskaashanaya ayey Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) aas-aastay Xog-heynta Xalka Waara (Durable Solutions Secretriate) sanadkii 2019kii. Xog-heyntan, oo ay hoggaamineyso Dowladda Soomaaliya iskuna keentay 14 hay'adood oo ka tirsan DFS, ayaa u jeedkeedu yahay sidii ay u siin laheyd Dowladda Soomaaliya taageero farsamo iy mid guud isla markaasna ay u kor-joogteyso dhammaan tallabooyinka hor-tabinta leh ee lagu baadi goobayo xalka waara ee barakaca iyo sidii looga fulin lahaa dadaaladaas dhamaan dalka oo dhan, iyada oo la raacayo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad, Nidaamka Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka (RRF) iyo siyaasadaha iyo xeerarka kale ee Dowladda Soomaaliya.

In kasta oo ay soo if-baxayaan dhaqan togan iyo horumar xooggan oo ku aadan hanaanka qaab-dhismeedka iyo wada shaqeynta dowladda, si loo horumariyo xalka waara oo la joogteyn karo, haddana waxaa jiro caqabado iyo mushkilado u baahan in wax laga qabto. Waxaa ka mid ah caqabadaha, heerka farsamo, hay'adeed iyo dhaqaalaha dowladda oo liita, koobnaanta taageerada maaliyadeed ee mustaqbalka fog, tabar-dhig ka muuqda deeq-bixiye yaasha, xasradaha bini'aadminimo oo sii daba-dheeraanaya isla markaana soo noq-noqonaya, kalsooni darro iyo daah-furnaan la'aan ka jirto hannaanka gargaarka caalamiga ah, nidaamka maamulka magaalooyinka oo liita, koror lixaadle oo ku socda tirada dadka deggan magalooyinka, sooca, amni darrida iyo in aan la wada gaari karin qeybo badan oo ka mid ah Koonfurta iyo Bartamaha dalka Soomaaliya. Si hadaba looga hor-tago caqabadahaas, waxaa loo baahan yahay

Iyada oo la garowsan yahay in si loogu helo barakaca khasabka ah xal waara ay u baahan tahay ka wada shaqeynta hay'ado badan oo iskaashanaya ayey Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) aas-aastay Xog-heynta Xalka Waara (Durable Solutions Secretriate) sanadkii 2019kii.

in la helo nidaam waqti dheer soconaya isla markaasna kaabaya gurmadka bini'aadminimo. Sidaa daradeed, Dowladda Soomaaliya waxa ay qeyb kaga dhigeysaa xalka waara hanaanka horumarinta dalka si loo xaliyo caqabadahan tirada badan ee la xiriira saboolnimada, sinaan la'aanta iyo nuglaanshaha dalka. Haddii la raaco hanaankan, waxa ay Soomaaliya ka caawineysa in ay u gudubto degenaansho, horumar dhaqaale, adkeysi iyo horumarinta shacabka.

Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waxa ay ka caawineysa Dowladda Soomaaliya in ay u hesho taageero dhaqaale iyo mid siyaasadeed intaba si loo taabo-geliyo ajandaha xalka waara, loona horumariyo aragti ku aadan xalka waara oo misna la gaari karo, hagto dhaqan gelinta iskuna xirto xalka waara iyo siyaasadaha kale ee dalka si loo gaaro natiijo ballaaran oo rasmi ah.

## KU SAABSAN ISTIRAATIIJIYADDAN

Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waa hannaan fulineed oo qeexaya aragti mideeysan, ujeedooyinka muhiim ka ah, mabaadi'da guud ee hageyso dhaqan gelinta howlaha xalka waara iyo siyaasadaha Soomaaliya ee ku aadan xalka waara 5ta sano ee soo socota.

Istiraatiijiyaddan waxa la filaya in ay xaqiijiso diyaarinta jawi u saamaxayo in Dadka Barakacu Saameeyay (DACs), barakacayaasha gudaha dalka (IDPs), qaxootiga, magan-galyo doonka, qaxootiga soo guri-laabanayo iyo bulshada inteeda nugul u helaan adeegyada xalka waara si siman oo aan kala sooc laheyn.

Ujeeddada fog ee Istiraatiijiyaddan waa in hoos loo dhigo amaba loo yareeyo saameynta ballaaran ee barakaca ka dhasha musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa la xiriira xasradaha iyo maamul xumida.

### ARAGTIDA

In dadka barakacu ku saameeyay Soomaaliya loo helo xala waara iyada oo la raacayo nidaamka falanqeynta ku saleysan caddeymaha iyo in si wada jir ah la iskula qaato hanaanka, leyskuna dhafo howlaha xalka waara.

### ARAGTIDA ISBEDELKA

Haddii Dadka Barakacu Saameeyay heli karaan adeegyada aas-aasiga ah kuna noolaan karaan nabadgelyo ka ilaalineysa baro-bixinta khasabka ah, waxa ay awoodaan in ay: ka qeyb qaataan howlaha guud si ay ku dheehantahay muwaadinimo dhameystiran kuna nool goob xasilan oo nabdoon; helaan nolol waarta iyo fursado shaqo; helaan nidaam cadaalad; markaas ayeey heli karaan xal waara sababtoo ah waxa ay karaan in ay si isku filnaansho ku dheehan tahay uga mid noqdaan markale bulshada inteeda kale.

Ahmiyadaha Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waxa ay waafaqsan yihiin kuwa lagu qeexay Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad [1]; siyaasadda qaran ee ku aadan qaxootiga soo guri-laabanayo iyo barakaca yaasha gudaha dalka[2]; Nidaamka Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka (RRF)[3]; siyaasadaha IGAD ee barakaca; qorshe-howleedka qaran ee ku aadan xalka waara ee qaxootiga soo guri-laabanayo iyo barakaca yaasha gudaha dalka iyo siyaasadaha muhiimka ah ee dowlad goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah.

Sidoo kale, Istiraatiijiyaddan waxa ay dhaqan gelineysaa ballanqaadyadii DFS kusoo gashay kulanka qaxootiga adduunka (GRF)[4] oo runtii muhiim ahaa. Istiraatiijiyadda NDSS waxa ay garowsantahay muhiimadda ay leedahay in la xaliyo barakaca si loo dar-dar geliyo dadaalada

lagu dhimayo heerka saboolnimada dalka. Istiraatiijiyadda waxa ay, sidoo kale, isku dayeysaa in ay xaliso arrimaha dheelisan iyada oo loo marayo hanaan guud oo isku keenayo hay'adaha kala duwan ee dowladda iyo bulshada inteeda kale. Ahmiyadaha lagu xusay Istiraatiijiyaddan waxaa ka mid ah:

- In sare loo qaado heerka adkeysiga ee Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo loo xaqiijinayo in ay u helaan si siman adeegga guud, deegaan amni ah, hanaanka badqabka bulshada iyada oo la eegayo xuquuqda iyo baahida jirta.

- In la kordhiyo la xisaabtanka hay'adaha dowladda ee u shaqeeya Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo la xaqiijinayo ka wada qeyb qaadashada amniga, geedi-socodka dhismaha qaranka loona dammaanad qaadayo badqab, amni iyo helitaan cadaalad.

- In sare loogu qaado Dadka Barakacu Saameeyay helista nolol joogto ah, fursado shaqo iyada oo loo abuurayo jawi u horseedayo gaarista isku filnaasho.

- In loo sahlo helista nidaam cadaalad iyo kala dambeyn leh Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo la xoojinayo hanaanka rasmiga ah iyo kan aan rasmiga aheyn ee cadaaladda.

- In maalgashi lagu sameeyo hanaanka lagu dhimayo ama loogaga hortagayo barakaca ka dhasho abaaraha iyo fatahaadaha.

Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waxa ay soconeeysaa muddo 5 sano ah inta u dhaxeysa 2020 and 2024 (wejiga 1aad), waana Istiraatiijiyadda tix-gelin doonta hadba ahmiyadaha, isbedellada iyo duruufaha soo kordha inta lagu gudo jiro muddadaas.

Haddaba, ujeeddooyinka guud iyo bar-tilmameedyada ku xusan Istiraatiijiyaddan ma'ahan kuwo koobayo kana tarjumayo baahida Soomaaliya oo dhan. Sidaa daradeed, Istiraatiijiyaddu waxa ay qeyb ka tahay aragtida-fog ee Soomaaliya waxa ayna ku talineysaa in la horumariyo wejiga 2aad ee Istiraatiijiyadda (2024 – 2040). Isku xijinta dadaalada muddada fog soconayo ayaa ah kuwo u saamaxayo dowladdu in ay xaliso arrimaha guud sida: kororka dadka ku dhaqan magalooyinka iyo kheyraadka ay u baahan yihiin, horumarinta dhaqaalaha miyiga iyada oo la tix gelinayo isbedellada cimilada, horumarinta dhaqaalaha iyo adkeysiga.

Hanaankan oo kale waxa uu xaqiijinaya in xalka waara loo gaaro iyada oo la raacayo nidaamka iskaashiga iyo in la bar-tilmameedsado meelaha wax tarka muhiim ka ah leh, iyo sidoo kale in si ku saleysan waaqaca loo xaliyo hadba caqabadaha ugu daran mar walba.

**Istiraatiijiyaddan waxa la filaya in ay xaqiijiso diyaarinta jawi u saamaxayo in Dadka Barakacu Saameeyay (DACs), barakacayaasha gudaha dalka (IDPs), qaxootiga, magan-galyo doonka, qaxootiga soo guri-laabanayo iyo bulshada inteeda nugul u helaan adeegyada xalka waara si siman oo aan kala sooc laheyn.**



# 2 DULUCDA IYO SABABTA






# MACLUMAADKA DADWEYNAHA

Tirada guud ee dadweynaha Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa illaa 14.3 milyan[5]. Si la mid ah inta badan waddamada ka hooseeya Saxaraha Afrika, dadweynaha Soomaaliyeed 75 boqolkiiba waxa lagu qiyaasa in ay ka yar yihiin 30 jir, in ku dhow 50 boqolkiibana 15 jir yihiin[6]. Sidoo kale, dadweynaha ku dhaqan magalooyinka Soomaaliya ayaa si xowli ah u sii badanayo, iyada oo lagu qiyaasayo in 40 boqolkiiba dadka Soomaalidu ku nool yihiin magaalooyinka, oo ay ku jirto Muqdisho oo 10 boqolkiiba haysa, halka reer guuraaga iyo beeraleyda kala yihiin 26 iyo 23 boqolkiiba[7]. Waxaa la saadalinaya in sanadka 2026 labadii qofba mid in uu ku noolaan doono magaalo Soomaaliya ah[8].

Intaa waxaa sii dheer in dadka barakacay iyo bulshada marti geliso ay si taas la mid ah u korayaan tiro ahaan. Dadka gudaha ku barakacay iyo bulshada marti geliso, tusaale ahaan, ayaa ah kuwo dhalinyaro u badan una yara badan lab[9].

## Duruufaha Barakaca

Sababah keena barakicinta khasabka ah waa kuwo ay adagtahay in si sahlan loo fahmo, waana kuwo fara badan isla markaasna is dhex meeraya, balse inta badan waxa ay salka ku hayaan colaadaha hubeysan iyo dhacdooyinka ka dhasha bey'ada sida abaaraha iyo fatahaadaha. Sida ay tibaaxeyso warbixinta qiimeeynta saameynta fatahaadaha (DINA)[10], abaaraha Soomaaliya ayaa sii kordhinaya xasradaha ka dhasha kheyraadka dabiiciga ah iyo dhul-beereedka, colaadaha hubeysan, amni darrida, taa oo xagal-daacisay nolosha qiimaha badan ee beeraleyda iyo reer-guuraaga oo iyana sare usii qaadayso barakaca11.

Intaa waxa sii dheer, seddaxda xilli roobaad ee (Deyr 2019, Gu' 2020 iyo Xagaaga- 2020- oo horay roob la'aan u noqday) ayaa horseeday barakac xaddi leh oo cusub kaas oo kala gooyay hab-nololeedkii[12]. Sida ay muujineyso xogaha laga

helay shabakadda kormeerka dib-u-noqoshada barakacayaasha ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan (PRMN)[13], gebi ahaanba sanadkii 2019 Soomaaliya waxa laga diiwaan geliyay 1,092,000 oo barakacayaal cusub ah[14], kuwaa oo la xiriira fatahaad, abaar, colaado iyo amni darro.

Barakicinta khasabka ah iyo dhul-la-wareegista ayaa sidoo kale ka qeyb qaata barakaca, khaasatan magaalooyinka halkaa oo qiimaha dhulku sare u kacay, iyo Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) oo inta badan aan laheyn milkiyad dhul waara iyo in aaney karin in ay degaan guryo ay karaan kharashkiisa. Dadka ku barakacay gudaha wadanka iyo qaxootiga soo guri-laabanayo ee ku nool magaalooyinka ayaa tusaale ahaan isku badala durbadiiba dadka saboolka ah ee ku nool magaalooyinka, taa uu ku khasbeyso in ay la nooladaan dadka marti gelinaya oo iyaguba wajahayo saboolnimo ba'an ama ku khasbeyso in ay ku noolaadan goobo fursado hab-nololeed xaddidan leh. In badan oo ka mid ah ayaa wajahayo khataro badan sida rabshadaha salka ku haya jinsiga iyo shaqo loogaga faa'iideysanayo duruufaha ay ku noolyihiin. Intaa waxaa sii dheer, barakaca la xiriira duruufaha dhaqaalo xumida ayaa ka dhigeyso dadkan kuwo la daala-dhacaya nolosha taas oo iyana sare usii qaadeyso barakaca[15].

**761,000**

**Soomaali barakacayaal aha yaa ku nool dalka dibaddiisa**

**91,828**

**Qof ayaa soo guri-laabtay inta u dhaxeysay sanadihii 2014 ilaa 2020**

**85%**

**Qaxootiga soo guri-laabtay ayaa ku qanacsan go'ankoodii ahaa soo noqoshada**

Soomaaliya waxaa lagu qiyaasa in ay leedahay in kabadan 2.6 milyan oo dadka gudaha dalka ku barakacay ah, 130,510 oo qaxooti soo guri-laabanayo ah, 14,688 qaxooti iyo 15,260 magan-galyo doon ah[16], taas oo ka dhigeeyso Soomaaliya mid ka mid dalalka ugu badan xaddiga barakaca ee dunida. Inta badan dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa ku nool deegaanno ciriiri ah oo ka tirsan magaalooyinka waaweyn iyo tuulooyinka dalka Soomaaliya (Inta badan Muqdisho, Baydhowa, Gaalkacyo, Kismaayo iyo Burco). Intaas waxaa sii dheer in 600,000 kale oo ah dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa ku sugan magalooyinka iyo deegaannada aan rasmiga aheyn ee Soomaaliland[17]. Sidoo kale, 761,000 Soomaali barakacayaal aha yaa ku nool dalka dibaddiisa[18], inta badan Itoobiya, Kiinya iyo Yeman. Intii u dhaxeysay sanadihii 2014 ilaa 2020, 91,828 qof[19] ayaa soo guri-laabtay. 64 boqolkiiba oo dadkaas kamid ah waxa ay degeen Jubbada Hoose[20].

Sida ay muujineyso xogta laga helay shabakadda kormeerka dib-u-noqoshada barakacayaasha ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan (PRMN)[21], 85 boqolkiiba qaxootiga soo guri-laabtay ayaa ku qanacsan go'ankoodii ahaa soo noqoshada[22]. Tani micnaheeda ma'ahan in qaxootiga soo guri-laabtay aaney wajaheyn caqabado lixaad leh, oo ay ka mid tahay hab-nololeed xaddidan, amni darro iyo taageero la'aan.

Tiro badan oo ka mid ah qoysaska qaxootiga ee soo guri-laabanayo ayaa ku dhamaado in ay ku noladaan goobo ay ku noolyihiin dadka gudaha dalka ku barakacay, iyada oo intooda bandanna aysan laheyn guryaha ay deganyihiin[23]. Tan ayaa kalliftay in intooda badan ay ku noolaadaan

duruufo aan rasmi aheyn – sida la noolaanshaha qaraabada ama oobasiibadleyda – taas oo horseedeysa dhibaatooyin hor leh sida amni darrida deegaanka, amaba in ay qarka u saaran yihiin in laga kiciyo deegannadaas.

Isla markaas, Soomaaliya ayaa wajahday sanadkii 2020 xaalad seddex-geesoon deg-deg ah: weerarka Ayaxa; cudurka caabuqa Coronavirus (COVID 19); iyo fatahaado lixaad leh. U nuglaanshaha musiibooyinka waxaa sii sare mariyay hoos u dhaca ku yimid lacagihii xawaaladaha iyo hoos u dhaca ku yimid lacagihii xawaaladaha iyo hoos u dhaca awoodda shacabka ee wax gadashada[24]. Dhamaan waxa ay sii cakireen nolosha iyo duruufaha inta horayba u sii nugleyd kuna nooleyd xaalado cakiran.



# 3 FALANQEYNTA SABOOLNIMAD





Caqabadaha ka haysta dowladda Soomaaliya diyaarinta siyaasado iyo qorshe yaal ku saleysan xaqaa'iqa ayaa ah yaraanta xogta ku saabsan qoysaska iyo qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha. Si kastaba ha ahaate, Agaasinka Istatistikada Qaranka (DNS) ee dhwaan noqotay Hay'adda Istatistikada Qaranka (NBS) ee madaxa bannaan ayaa qabatay howlo badan oo muhiim u ah sidii loo soo yareyn lahaa xog yarida jirta.

Dhowr sahan oo ku aadan qoysaska Soomaaliyeed ayey isla sameeyen Dowladda Soomaliya iyo Bangiga Adduunka (WB) sanadihii 2015/16 iyo 2017/18[25]. Maclumaadka laga helyo sahanka xogtiisu sarreyso ee Soomaaliya (SHFS)[26] ayaa saldhig u ah falanqeynta heerka saboolnimada dalka. Sahanka SHFS ayaa sidoo kale bixinaya faaqidaad qoto dheer ee ku saabsan dadyowga ku barakacay gudaha dalka si loo ogaado baahiyaha ay qabaan barakacayaasha si taas loogu isticmaalo horumarinta xalka waara[27].

Sahanka waxa uu tibaaxaya in 69 boqolkiiba Soomaalida ay ku noolyihiin wax ka yar $1.90 maalintii, taa oo ah xaddiga lagu qeexo saboolnimada caalamka. Saboolnimadu waxa ay si sare ugu baahsan tahay xeryaha barakacayaasha gudaha dalka ku barakacay 88 boqolkiiba, iyada oo ay ku xigto tan reer miyiga oo heerka saboolnimada gaarto ku dhowaad 75 boqolkiiba iyo magaalooynka waweyn oo ay gaareyso 67 boqolkiiba[28].

Lacagaha xawaaladaha dibadaha lagaga soo diro ayaa ah dakhliga inta badan qoysaska Soomaaliyeed[29]. In kasta oo ay muhiim u tahay lacagaha lasoo xawilo qoysas badan, haddana qoysaska aadka u nugul badankoodu ma helaan kaalmadan. Tusaale ahaan, 7 boqolkiiba qoysaska ku barakacay gudaha dalka ayaa helo lacagaha dibadaha laga soo xawilo[30], iyada oo xaddiga lacageed ee loo soo diro isla qoysaskaas aysan dhameyn mid looga bixi karo heerka saboolnimada[31]. Tani waxa ay daliil u tahay in lacagaha lasoo xawilo sare u qaadaan heerka adkeysiga bulshada balse aysan wada helin qoysaska aadka u nugul[32].

## Helista adeegyadan waxa ay kusii adagtahay dadka ku nool miyiga, barakacayaasha gudaha dalka iyo reer-guuraa. In kasta oo magalooyinka waweyn nolol wacan yihiin, haddana bulshada ku dhaqan qaarkood ayaa weli ku jiro halganka la dirirka gaajada, saboolnimada baaxadda weyn

Sida ay muujineyso warbixinta qiimeynta heerka saboolnimada iyo nuglaanshaha (SPVA) sagaal ka mid ah 10 kii qoys ee Soomaaliyeed waxa aysan helin baahida aasaasiga ah (ugu yaraan mid ka mid ah kuwas soo socda): dakhli, koronto, waxbarasho, biyo ama nadaafad[33]. Helista adeegyadan waxa ay kusii adagtahay dadka ku nool miyiga, barakacayaasha gudaha dalka iyo reer-guuraa. In kasta oo magalooyinka waweyn nolol wacan yihiin, haddana bulshada ku dhaqan qaarkood ayaa weli ku jiro halganka la dirirka gaajada, saboolnimada baaxadda weyn leh ee magalooyinka ayaa lagu qiyaasaa (64 boqolkiiba) halka saboolnimada aan ka dhalan lacag lagu qiyaaso (41 boqolkiiba)[34]. Marka laga soo tago saboolnimada ku saleysan lacagta, waxaa jiro faro-marnaan badan o il-ma'aragto ah. Saboolnimadu waa noocyo badan tahay, sida ku cad isbiirsashada dakhli la'aanta ka dhalata hanaanka dhaqan-dhaqaale, caafimaadka, waxbarashada, iyo tilmaamaha heerka nolosha oo dhamantood ka dhigayo heerka saboolnimada isku cel-celis mid ka hooseeya heerarka gobolka iyo kuwa caalam kaba.

Xaddiga umul raacashada ee Soomalaiya ayaa ka mid ah kuwa ugu sarreeyo ee dunida, waxaana sidoo kale la mid ah xaddiga caruurta koriin darrida lasoo deristo iiyo kuwa geeriyooda ka hor inta aaney gaarin 5 jir. Heerka iskuul hoose ku biirista ayaa hooseysa, iyada oo isku cel-celis lagu qiyaaso wadanka oo dhan boqolkiiba 33, iyada oo ay ugu sii daran tahay qiyas ahaan reer miyiga, reer-guuraga iyo dumarka[35]. Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad ayaa kusii daraya labo qodob oo horseedo ceyrnimada kuwaas oo kala ah: la'aanta hanaanka bad-baadada bulsho iyo taageero la'aan.

Qodobka kowaad waxa uu xiriir la leeyahay colaadaha iyo isbedellada cimilada kuwaas oo horseeday barakac ballaaran iyo amni darro. In la helo hanaan cadaalad ah iyo booliska ayaa muujinaya sawirro kala duwan, halka reer miyigu adeegsadaan nidaamka dhaqanka iyo ceymiska qabaa'ilka ku saleysan iyo xallinta khilaafaadka. Awood siin la'aanta ayaa dhalisay hoos u dhaca ku yimaada ka qeyb galka go'aanada masiirka bulshada, astaan saboolnimo oo saameyn ballaaran oo aan dheeli-tirneyn ku leh seddex kooxood, gaar ahaan marka ay timaado dumarka, dadka gudaha ku barakacay iyo dhallinyarada. Kooxahaas, heerka saboolnimada ayaa ah mid sarreysa halka heerka dhaqan-dhaqaale uu yahay mid hooseyo. Natiijada ayaa ah mid horseedday caddaalad darro iyo fursad la'aan. Deegaanka, caado-dhaqanka iyo qabyaaladda ayaa ah arrimaha sii qotto-dheereynaya cawaaqibta sooca.

Barakaca ka dhasha isbedellada astaamaha bulshada ayaa sidoo kale badashay qaab nololeedka Soomaalida. Halka markii hore bulshada inteeda badan ahaan jireen reer miyi, reer-guuraaga iyo beeraley, Soomaaliya waxaa la saadaalinaya in boqolkiiba 50 dadkeeda ku noolaan doonaan magaalooyinka lix sano kadib- arrin la wadato khataraheeda. Cilmi barista dhowaanahan laga sameeyay saameynta dhaqaalaha uu ku leeyahay barakaca ayaa muujineysa in hoos u dhac ku yimid heerka shaqaalaha dadka gudaha dalka ku barakacay

kadib markii ay barakaceen iyo sidoo kale isku cel-celis dakhligooda billaha ah[36]. Isla daraasaddan ayaa si ka duwan u muujineysa iyada oo uu sare u kac ku yimid heerka shaqaalaha bulshada marti gelineysa barakacayasha gudaha dalka iyo sidoo kale isku cel-celis dakhligooda billaha ah. Si isdaba jog ah, dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa helo shaqo-gacmeed gaaban iyaga oo meyro dharka, nadiifiyo guryaha bulshada marti gelineysa barakacayasha gudaha dalka ama qashin aruurinta[37].

Qaar ka mid ah caruurta ayaa kaalmeeya qoysaskooda halkii ay iskuul ka aadi lahayen halka kuwo kalana ay go'aansadeen dawarsiga. Fursadaha dhaqaale ayaa lagu waramaya in ay ku badan tahay bulshada marti gelineysa barakacayasha gudaha marka la bar-bar dhigo fursadaha dhaqaale ee ay helaan dadka gudaha dalka ku barakacay. Waxaa xusid mudan in saboolnimada iyo nuglaanta ay astaamo-wadaag yihiin. Saboolnimo waxaa loola jeeda heerka dakhliga iyo bad-qabka, halka nuglaanshaha loola jeedo la deriska khataraha iyo karaanka maareynta khataraha[38]. Si kastaba ha noqote, heerka barakaca lama mid ahan nuglaansho. Waxaa jiro sababo kale oo keena nuglaanshaha.

Tusaale ahaan, maclumaadka xogta sahanka Bangiga Adduunka waxa ay muujineysa in inta badan dadka gudaha dalka ku barakacay ay yihiin kuwo wax soo saar leh balse hadana sabool ah waxa ayna intooda badan ku noolyihiin gobolka Banaadir, Jubbada Hoose, Shabeellada Dhexe, Gedo, Waqooyi Galbeed iyo gobolka Baay[39]. In yar oo kamid ah qoysaska Soomaaliyeed (in ka yar boqolkiiba hal) ayaa lagu sifeeyaa in ay ku tiirsan yihiin kalmo. In kabadan boqolkiiba 73 dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa ah kuwo wax soo saar leh balse sabol ah iyo boqolkiiba 26 ayaa lagu qiyaasa in ay yihiin kuwo isku filan.

Bulshada marti gelineysa barakacayasha ayaa haysata kaalin weyn marka laga hadlayo isku filnaanshaha marka la bar-bar dhigo dadka gudaha dalka ku barakacay. Heerka nuglaanshaha qoysaska aya u kala duwan hadba sida gobollada ay ku noolyihiin ama inti aysan barakicin kahor gobolladii ay ku noolayeen. Tani waxa ay daliil u tahay baahida loo qabo in la horimaryo dadaalada mudnaansiinta gobollada daran si loo hagaajiyo farqiga u dhaxeeyso barakacayaasha iyo bixinta xalka waara.

Horumarka iyo yareynta saboolnimada Soomaaliya ayaa ah labo isku xiran. Si horumar looga gaaro afarta arrimood ee sababa saboolnimada iyo horumar la'aanta: Xasilooni la'aanta siyaasadda (siyaasad loo dhanyahay), colaadaha (amniga iyo sarreynta sharciga), dhaqaale liita (kobac dhaqale iyo shaqao abuurid), iyo nuglaanshaha bulshada (horumarka bulshada). Dowladda Soomaaliya waa in ay wax ka qabataa qodobbadan iyada oo ay jiraan sare u kac ku yimid dhacdooyinka ay keenaan cilimada iyo barakaca bulshada.



# 4 MUUQAALKA GUUD EE XALKA WAARA EE SOOMAALIYA





# HANAANKA SHARCIGA IYO SIYAASADDA

Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waxa ay ka tis-qaadeysa siyaasadaha iyo hay'adaha ku howlan xalka waara ee qaranka iyo kuwa gobolka:

- Dastuurka kumeel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomalaiya ayaa si cad uga hadlaya dadka barakaca (qaxootiga iyo magan-galyo doonka) ee dalka, gaar ahaan Qodobka 37aad kaas oo xusaya "(1) Qof kasta ee ka soo raadsada magan-galyo Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomalaiya waxa uu xaq u leeyahay in aan dib-loogu celin dal uu qofkaas ka baqayo in lagu ciqaabo. (2) Baarlamanka Soomaaliya ayaa meel marin doona sharci, iyada oo la eegayo shuruucda caalamiga ah, kaas oo nidaaminayo qaxootiga iyo magan-galyo doonka. Soomaaliya waxa ay saxiixe ka tahay Heshiiska Qaxootiga ee 1951 iyo xeerkii qaxootiga ee 1967dii iyo heshiiska hagaya arrimaha gaarka ah ee mushkiladaha qaxootiga ee Afrika (OAU Convention). Xeer Madaxweyne Lr. 25 (1984) oo qeexayay go'aan ka gaarista xaaladaha qaxootiga isla markaasna lagu aas-aasay Guddiga go'aan ka gaarista xaaladaha qaxootiga ee loo yaqiin (RSD), in kasta oo in muddo ah guddigani shaqeyn. Sidoo kale, Hay'adda Barakaca iyo Qaxootiga Somaliland (NDRA) waxa ay fulisaa siyaasadda qaran ee magan-galyo doonka ee 2011 halka Puntland ay fuliso Sharciga Dhowrista Xuquuqda Qaxootiga ee 2017.

- Qabyo qoraalka 2019 ee sharciga qaran ee qaxootiga ayaa tix-gelisay qeexitaannada qaxootiga ee ku xusan xeerarka OAU-da. Sharcigani waxa uu si dhameystiran uga hadlayaa xaaladaha qaxootiga iyo magan-galyo doonka, mana ka hadlayo oo qura sidii loo nidaamin lahaa qaxootiga loogana qaari lahaa go'aan heerka u qalmidda in ay noqdaan qaxooti iyo in kale, balse sharcigu

waxa uu sidoo kale qeexayaa xuquuqda iyo waajibaadka qaxootiga iyo magan-galyo doonka helayaan kuwa la aqoonsaday amaba ku waajibaya[40]. Qabyo qoraalka sharcigu waxa uu xusayaa aqoonsiga, dhowrista xuuuqda iyo maamulka qaxootiga iyo magan-galyo doonka, iyo dhamaan howlaha la xiriira. Nuqulkii ugu dambeeya qabyo qoraalka sharciga ayaa horyaalla Garyaqaanka Guud si uu uga guto waajibaadkiisa. Markaa ayaa la hor-geynayaa Golaha Wasiirada si ay uga doodaan una meel-mariyaan, ka hor inta aan la hor-geyn Baarlamanka Soomaaliya looguna gudbnin madaxweynaha si uu sharci u noqdo[41]. Hay'adda Qaxootiga iyo Dadka Gudaha Dalka ku Barakacay (NCRI) ayaa fulin doonta sharcigan marka la meel-mariyo, iyada oo hubin doonta in ahmiyadaha istiraatiijiga ah ee ku xusan NDSS iyo qodobbada sharcigan in ay is waafajiyaan.

- Hirgelinta CRRF/GRC waxa ay salka ku haysaa geedi socodka ururka gobolka ee IGAD iyo Heshiiskii Nairobi ee ku aadana xalka waara ee la isla qaatay 2017kii[42]. Heshiiska Nairobi iyo Qorsho Howleedkii la socdayba waxa ay soo jeedinayaan in dadaalada gobolka ee ku aadan xalka waara la mideeyo si xalka waara loo gaarsiiyo Soomaaliya looguna abuuro jawi ku soo dhaweynaya dalka marka ay qaxootigu dib-ugu-laabanayan dalkooda. Hadaba si loo xaqiijiyo heshiiska Nairobi "waxaa la daah-furay Qorsho Howleedka Qaran ee lagu gaarsiinayo qaxootiga iyo dadka gudaha dalka ku barakacay xalka waara 2018 – 2020 (NAP)" waxaana la filayaa qorsho howleedka NDSS iyo kan NAP in ay is waafaqsan yihiin. DFS waxa ay 2017kii saxiixday Heshiiskii Jabuuti ee xaqiijinayay ku darista qaxootiga iyo kuwa soo guri-laabanayo nidaamka waxbarasho ee dalka. Fulinta heshiiskan ayaa lagala kulmay caqabado maadama heerka waxbarasho helista dalka liidatay. Heshiiskii Kampala ee ku aadana shaqo abuurka, heer-nololeedka iyo isku filnaanshaha qaxootiga soo guri-laabanayo iyo bulshada marti-gelineysa ee ay saxiixeen dowladaha IGAD marso 2019kii[43] waxaa ku xusan qaraaro muhiim u ah xaqiijinta gaarista ujeeddooyinka GRC ee urur Goboleedka IGAD.

- Sanadkii 2019ka dowladda Soomaaliya waxa ay horumarisay siyaasado cusub oo dhowr ah sida Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo Guryo Noqday iyo Barakacayaasha; Hab-raaca Qaran ee ka Saaridda Dadka Hoyga Ama Dhulka ay Deggan Yihiin[44], Siyaasadda Daryeelka Bulshada[45] iyo Borotokoolka ku Meel-gaarka ah ee Qaybinta Dhul Hoy u Noqda Kuwa Mutaystay ee Qaxootiga soo Laabtay iyo Barakacayaasha Gudaha[46].

- Maarso 2020, Soomaaliya ayaa gudbisay xubinnimadeeda ururka Midowga Africa ee Dhowrista iyo kaalmeynta dadka gudaha dalka ku barakacay ee Africa (Heshiiskii Kampala). Heshiiskani waa heshiiska ugu mug dheer dhanka xogta iyo ka mid noqoshada dhowrista IDPs. Heshiiskani waxa uu sii adkeynayaa xeerkii Qaramada Midoobay ee ku saabsana Mabadi'da Barakicinta Gudaha (aan khasabka aheyn in la fuliyo) ee 1998, oo ku boorinayay in wadamadu xil iska saaraan ka hortagga, dhowrista iyo kaalmeynta IDPs. Haatan Dowladda Soomaaliya waxa ay ku howlantahay sidii looga dhigi lahaa sharci qaran heshiiskii Kampala. Iyada oo ka jawaabeysa codsigii dowladda Soomaaliya, UNHCR ayaa usoo dirtay Soomaaliya Professor Chaloka Beyani, oo ah khabiir hore oo Qaramada Midoobay ee Xuquudda Aadanaha iyo IDPs iminkana ah xubin ka tirsan koox khubaro ah oo Guddiga Sare ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Barakaca Gudaha si uu u hoggaamiyo horumarinta sharciga dadka gudaha dalka ku barakacay[47] (IDPs) ka ee Soomaaliya. Waxaa hanankan kamid ah wadatashi lala sameeyo Dadka Barakacu Saameeyay (DACs), dowladda, inta ay khuseyso, Hay'adaha Qaramada Midoobay, Ururada aan Dowliga aheyn, Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah iyo dowladaha hoose. Ka dhigista heshiiska Kampala sharci maxali ah (dadka gudaha ku

barakacay), sharciga qaxootiga (oo loogu talagalay qaxootiga), iyo ka mid noqoshada labada heshiis ee dadka dal la'aanta ah, istiraatiijiyaddan qaran ee xalka waara, dhameystirka siyaasadda qaxootiga (dadka sababa kala duwan ugu kala gooshayo dalalka oo ay ku jiraan caruurta aan la wehelin) ayaa dhamaan ka dhigi doona Soomaaliya mid leh hanaan sharci iyo siyaasadeed fursad siinaya Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) ee ku sugan Gudaha Soomaaliya.

- Soomaaliya waxa ay qeyb ama saxiixe ka tahay xeerar iyo heshiisyo goboleed iyo kuwo caalami ah kuwaas oo dhiirigeliya xuquuqda iyo in loo helo nidaam caddaalad ah dadka ama kooxaha nugul. Xeerarka caalamiga ah ee ugu mudnaanta badan marka ay timaado Soomaaliya waxaa ka mid ah Xeerka Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan (ICESCR), Xeerka caalamiga ah ee Xuquuqda Shibil iyo Tan Siyaaseed (ICCPR), Xeerka Xuquuqda Caruurta (CRC) iyo Xeerka ka Dhanka ah Jir-dilka iyo Tacadiyada kale ee, ula dhaqanka Bini'aadminimada qaab hoos u dhigeeyso xurmadooda iyo ciqaabaha kale (CAT).



AU UN IST PHOTO / Tobin Jones.

**Marka la soo koobo, Istiraatiijiyadda Xalka Waara wuxuu sii balaran ku dhisanyahay sharuucda iyo siyaasadaha dalka oo ay ka mid yihiin:**

- Heshiiskii Caalamiga ahaa ee Midowga Afrika ee loogu tala galay Badbaadinta iyo Caawinta Dadka Wadamadooda Gudahooda Ku Bara Kacay ee Afrika (Heshiiskii Kampala)
- Istaraatiijiyadda Xalalka Waara ee Maamulka Gobolka Banaadir (2020-2024)
- Istiraatiijiyadda Puntland ee isdhexgalka Barakacayaasha iyo Dadka ee u Yimaadeen (2018 – 2022)
- Hordhaca Tilmaamaha Fulineed ee Xalka Waara (2016)
- Tubta Horumarinta Dhaqaalaha (2017-2020)
- Education Sector Strategic Plan (2018-2021)
- Hannaanka Guud ee Wax u Qabashada Qaxootiga (CRRF)
- Heshiiska loo Dhanyahay ee Qaxootiga Adduunka (GRC)
- Heshiiska IGAD ee Nairobi ee ku saabsanaa Qaxootiga Soomaaliyeed iyo Qorsho Howleedkii Xalka Waara (2017)
- Istiraatijiyadda Gobloeedka IGAD ee ku Saabsan Barakicinta Khasabka ah iyo Socdaalka Iskudhafan (2017-2022)
- Tubta Siyaasada Loo Dhanyahay (2017-2020)
- Mabadi'da Arrimaha Xalka Waara ee Guddiga Joogtada ee u Dhexeeya Hay'addaha
- Borotakoolka Ku meel Gaarka ah ee Qeybinta Dhulalka ee loogu tala galay Guriyeynta loogu tala galay Qaxootiga Soo-Guryo Noqday ee u Qalma iyo Barakacayaasha (2019)
- Hanaanka caalamiga ah ee IOM ee Xalinta Hormarka ee Xaaladaha Barakaca (2016)
- Qorshaha Horumarinta Qaranka 8 iyo 9 (2017-2019 ; 2020 -2024)
- Siyaasadda Qaranka ee Maareynta Musiibooyinka (2017)
- Siyaasadda Qaranka ee Shaqaaleysiinta (2019)
- Istiraatiijiyadda Qaranka ee Dhiirigalinta Maalgashiga (2019)
- Habraaca Qaran ee ka Saaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay Deggan yihiin (2019)
- Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga Soo-Guryo Noqday iyo Barakacayaasha (2019)
- Sharciga Qaranka ee Qaxootiga (2020)
- Tubta Horumarinta Bulshada (2017- 2020)
- Siyaasadda Qaranka ee Daryeelka Bulshada (2019)
- Siyaasadda Qaranka ee Deegaanka (2020)
- Siyaasadda Qaranka ee Isbeddelka Cimilada (2020)
- Nidaamka Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka (2018)
- Hanaanka Go'aan ka Gaarista Xaaladaha Qaxootiga (Qabyo-qoraal)
- Bayaankii Kampala ee ku saabsanaa Shaqooyinka, nolol-maalmeedka, iyo iskufilnaanshaha Qaxootiga, Qaxootiga soo Laabanaayo, iyo Bulshada Martigelisay (2019)
- Mabadi'da Barakicinta Gudaha ee Qaramada Midoobay (1998)
- Go'aanka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Xalka Waara iyo Tilmaamayaasha Fulineed (2016)

# GEEDI SOCODKA XALKA WAARA EE KU XUSAN HANAANKA SIYAASADAHA

Dowlada Federaalka Soomaaliya (DFS), iyada oo garowsan baaxadda barakaca iyo qaxootiga soo guri-laabanaya, ayeey horumarisay siyaasadda qaran ee qaxootiga soo guri-laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay[48] iyo bulshada martigelineysa, gaar ahaan dumarka, caruurta, waayeelka, dadka naafada ah iyo agoonta oo iyagu ah kuwo nugu. DFS waxa ay ballan qaaday in ay kaalmeyn doonto qaxootiga si mutadawacnimo ah usoo guri-noqonaya, dib-u dajintooda iyo dib-ula-qabsashada dadka ay u yimadeen.

Mabda'a 4aad ee Siyaasadda Qaran waxa ay tilmameysaa:

- Sida ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad, Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga Soo-Guryo Noqday iyo Barakacayaasha, DFS waxa ay ballan qaaday in ay kaalmeyn doonto qaxootiga si mutadawacnimo ah usoo guri-noqonaya, dib-u dajintooda iyo dib-ula-qabsashada dadka ay u yimadeen.

- Dhammaan hay'adaha Dowladda, maamul goboleedyada, gobolka Banaadir waxa saaran waajibaad aas-aasi ah si ay u abuuraan jawi una siiyaan qaxootiga soo guri-laabanaya iyo dadka gudaha dalka ku barakacay wixii agab ah ee ka cawinayo in aay qaataan go'aamo laga baaraan degay si ay dib-ugu soo laabtan dalka ama bushadii ay ka yimadeen dib-ugu milmaan ama ay dalka intiisa kale u degaan si ku saleysan rabitankooda, si nabad iyo sharafi ku dheehantahay.

- Qaxootiga Soomaaliyeed ee soo guri-laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay waxa ay xaq u leeyihiin in si rabitaankooda ku saleysan ugu soo laabtaan goobaha ay rabaan in ay ka degaan dalka, si ay sharaf, xushmad, barwaaqo iyo xorriyad ugu nooladaan.

- Dhammaan dhinacyada ay khuseyso waa in ay si gaar ah ugu dadalan sidii loo xaqiijin lahaa in Qaxootiga soo guri-laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay ay qudhoodo qeyb ka yihiin qorsheynta iyo maamulka soo guri-noqoshadooda, dhex galka dadka ay u yimaadan ama ay degaan goobaha kale eey jecleystan in ay dalka ka degaan.

Siyaasada Qaran waxa ay garowsantahay in Qaxootiga soo guri-laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay ay xaq u leeyihiin in ay si rabitankooda ku saleysan isla markaasna ay ka baarandageen ku gaaraan go'aanka khuseeya masiirkooda iyo nooca xalka waara ee ay rabaan in ay helaan. Siyaasaddu waxa ay xuseysaa in Qaxootiga soo guri-laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay khasab tahay in ay helaan maclumaad dhab ah oo ku saabsan waxa la gudboon iyo sida xaaladda dalka iyo goobaha ay ku laabanayan ay tahay[49]. Intaa waxaa sii dheer, Qaxootiga Soomaaliyeed ee ku nool dalalka kale iyana xaq ayey u leeyihiin in ay helaan maclumaad dhab ah oo ku saabsan waxa la gudboon iyo sida xaaladda dalka iyo goobaha ay ku laabanayan ay taha, ka hor inta qaxootigu go'aansan in ay soo guri-noqdaan iyo in kale.

Wadatashi lala sameeyay Dadka Barakacu Saameeyay (DACs) ayaa sheegaya xiriirka tooska ah ee ka dhaxeeya qabiilka iyo sida ay iskula jaan qaadaan qaxootiga soo guru-noqonayo iyo bulshada lagu soo noqonayo. Tusaale ahaan, qaxootiga ku soo guru-noqonayo ee Puntland iyo Banaadir ayaa sheegaya in ay wajahayaan dhibatooyin la xiriira fursadaha shaqo helista iyo xiriirka kala dhaxeeyo bulshada marti gelineysa oo ah mid aan fiicneyn, halka qaxootiga ku soo guru-noqonayo Jubbaland iyo Galmudug ay sheegayan in la leyihiin bulshada marti gelineysa

xiriir wacan.

Tan ayaa inta badan la xiriirta nidaamka qaba'ilka. In kastoo, dhammaan qaxootiga soo guru-noqonayo ay go'aanka kusoo laabashada Soomaaliya ay iskood u qaateen, hadaba ilaa 40 boqolkiiba qaxootiga Yemen waxa ay door bidayan dal kale ama in ay ku laabtaan dalkoodi haddii xaaladda dalka Yemen hagaagto, halka 60 boqolkiiba harsan ay door bidayan in ay sii joogaan Soomaaliya.

> "Diyaar Ayaan u nahay in aan dib-u-laabanno balse iyada oo aaney weli dib-u-heshisiin dhicin kuma laaban karno dalkeeni. Sidoo kale, wax gacan qabsi ah ma haysanno hadda, waana adkaneysa in aad dib u laabanno oo aan nolo cusub dib-u-bilowno."
>
> — **Haweeney ka mid ah dadka gudaha dalka ku barakacay (Hirshabelle)**

Qaxootiga la wareeystay ayaa sababo la xiriiro caabuqa COVID-19, sanadka 2020 ayaa, si kumeel gaar ah, loo hakiyay barnaamijka taageerada dadka iskood ugu laabanayo Yemen ee loo yaqaan Assisted Spontaneous Return (ASR) iyo barnaamijka qaxootiga Soomaalida iskood looga celinayo Kenya ee loo yaqaan Voluntary Repatriation (VolRep) from Kenya[50]. Barnaamijka VolRep ee qaxootiga Soomaalida ee ka imaanaya Kenya waxaa hago istiraatiijiyadda soo celinta qaxootiga Soomaaliyeed ee ku sugan Kenya iyo dhexgalka bulshada ay kusoo laabanayaan (2020-2022) iyada loo la tix-raacayo Bayankii IGAD ee Nairobi/ Qorsho howleedka iyo siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga Soo-Guryo Noqday iyo Barakacayaasha, iyada oo uu dhamaaday muddadii heshiiskii seddex-geesoodka ahaa ee 2013[51]. Sahanka kormeerka soo guri-noqoshada waxa uu muujinayaa in ay helayaan Qaxootiga soo guri-laabanayo adeegyo aan ku filneyn, oo ay ka mid tahay caafimaadka, waxbarashada, oo ay u arkaan qaxootiga soo guri-laaban lahaa caqabad ku xiran soo noqoshadooda.

## BARNAAMIJYADA SOO SOCDA IYO WADCIGA SIYAASADAHA XALKA WAARA

Horumar muhiim ah ayaa laga sameeyay sameynta barnaamijyada iyo taabo-gelinta siyaasadaha xalka waara ee Soomaaliya. Ilaa iyo 2016 waxa sare usii kacayay kaalinta hoggamineed ee Dowladda soomaaliya ee ku aadan dhisidda hay'ado, iyo howlgallo ku saabsan xalka waara heerarkiisa kala duwan. Haddii laga bilaabo, **Soomaaliya waxa ay horumar ka sameysan dajinta siyaasadaha iyo shuruucda haga xalka waara** si loo dhowro loona kaalmeeyo Dadka Barakacu Saameeyay (DACs). Dadaallada xalka waara ayaa horseeday in lagu daro isla markaasna la gaarsiiyo xalka waara darajo sare taa oo dhalisay in lagu daro cutubyada Qorshaha Horumarinta Qaranka 8 iyo 9 (NDP-8, 2017 – 2019; NDP-9, 2020 – 2024) iyo RRF-ka. Sanaddii 2019, Soomaaliya waxa ay ansixisay siyaasado ay ka midka yihiin Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo Guryo Noqday iyo Barakacayaasha, Hab-raaca Qaran ee ka Saaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay Deggan Yihiin, Siyaasadda Qaran ee Daryeelka Bulshada, iyo Borotokoolka ku Meel-gaarka ah ee Qaybinta Dhul Hoy u Noqda Kuwa Mutaystay ee Qaxootiga soo Laabtay iyo Barakacayaasha Gudaha. Intaa waxaa dheer, guusha ugu ballaaran waxa ay aheyd marka ay Soomaaliya ansixisay heshiiska Kampala, kaas oo ka qeyb qaatay sare u qaadista iyo xoojinta shuruucda dhowreysa dadka gudaha dalka ku barakacay, iyada oo noqoneysa sharci maxali ah oo ay hadda garwadeen ka tahay hay'adda NCRI oo ayna taageerto UNHCR. Tani waxa ay sii xoojineysaa dadaalada socda ee lagu xaqiijinayo meel marinta Sharciga Qaxootiga iyo in ay dowladdu dhameystirto ka mid noqoshaha Xeerka dadka dal-la'aanta ah, inta sanadkani dhamaan. Ka mid dhigista xalka waara shuruucga dalka waxa ay dhowreysaa xuquuqda

dadka marka lagu jiro xaaladaha barakaca. Waxa ay sidoo kale xaqiijineysa in dadaallada lagu taageerayo dadka barakacay aanay wiiqmin. Dib-u-soo celinta nidaamka garsoorka waxa uu dhimaya tacaddiyada iyo cabashooyinka ka dhasha takrifalka, sinnaan la'aanta, isla xisaabtan la'aanta iyo sooca.

**Dhismaha hay'adaha**, horumar la taaban karo ayaa laga sameeyay dhanka hay'ad dhiska la xiriira xalka waara iyo isku duubnaanta dowladda si loo joogteeyo dadaalada xalka waaran. Gaarista xalka waara waxaa laga aqoonsaday heerarka kala duwan ee dowladda iyada oo la dhidbay hanaan isku-dubbarid cusub oo looga gol leeyahay in la fududeeyo dadaalada faraha badan ee socda lagana dhigo kuwo lala bar-tilmameedsanayo goobo cayiman, iyada oo ay hoggaamineyso Dowladda Soomaaliya. Maadaama heerka barakaca uu aad u sarreeyo, waxaa lagama maarman ah wada shaaqeyn guud oo hay'adaha ah, ayeey dowladda Soomaaliya horumarisay hanaanka isku-dubbaridka xalka waara sida kooxaha isku-dubbaridka xalka waara ee Puntland, Koonfur Galbeed, Jubbaland, Guddiga Xalalka Waara ee wasaaradaha u dhexeeya gudaha Galmudug, Unnuga Xalka Waara ee Gobolka Banaadir iyo Xog-heynta Qaran ee Xalka Waara. Si loo taabo geliyo soo kabashada iyo horumarinta Soomaaliya, Dowladda iyo hay'adaha kale ayaa ballan qaaday in ay sii xoojiyaan wada shaqeynta ka dhaxeyso gargaarka bini'aadminimo iyo howlaha horumarka, iyada oo la dhaqan gelinayo hanaanka wada shaqeynta cusub[52].

Waxa ay si wada jir ah iskula qaateen in la horumariyo afar natiijo oo kala ah xoojinta wada shaqeynta, iskaabidda howlaha ka dhaxeeya hay'adaha gargaarka iyo kuwa horumarka ku howlan iyo in ugu dambeyn la yareeyo baahida iyo nuglaanshaha. Disembar 2015, inuu uu ku guda jiray booqashada Soomaaliya Prof. Walter Kaelin, Dadaalada Xalka Waara (DSI) ayaa la daah-rogay. Dadaalkani waxa uu ahaa mid ay hoggaaminteeda laheyd Dowladda si looga taageero dowladda in ay siiso Dadka Barakacu Saameeyay (IDPs, Qaxootiga soo guri-noqday iyo Bulshada marti-geliso). Hanaanka aya isku keenay dowladda, Qaramada Midoobay, Hay'adaha Maxaliga ah ee aan Dowliga Aheyn iyo deeq-bixiye yaasha si loo taageero Qorshaha Horumarinta Qaranka. Sidoo kale, waxa uu hoosta ka xarriiqayay in la mideeyo dadaalada xalka waara iyo howlaha la xiriira ee ka socda Soomaaliya iyada oo loo marayo ka wada xaajoodka siyaasadaha, isku-dubbaridka iyo hirgelinta howlaha. Dadaaladani waxa ay sare u qaadeen xiriirka ka dhaxeeya hay'adaha gar-gaarka, horumarinta iyo kuwa nabad dhiska ma sida loogu yeero "Qaabka cusub ee wada shaqeynta" oo ay ku wada shaqeynayaan dhamaan inta ay khuseyso arrimaha xalka waara lana kordhinayo taageerada- taageeradaas oo ah mid la saadaalin karo soconeysana sanado badan, maalgelinta horumarinta, deyn-cafiska iyo helista deymaha shuruudaha yar le ee lagu soo celiyo muddada fog[53].

**Howlgallada**, ku dhowaad $90 milyan oo lagu maalgelinayo howlaha lagu dhisayo u adkeysiga aafooyinka iyo xalka waara ama si gaar ah u bar-tilmameedsanayay xalka waara ayaa loo qoondeeyay intii u dhaxeysay 2016-2019[54]. Tan iyo markii la daah-rogay DSI, isbedel dhanka fekerka ah ayaa ku dhashay dowladda iyo hay'adaha kaas oo ku aadan sidii la'iskula qaadan lahaa hanaan muddo dheer soconaya oo loogu helayo xal waara oo la joogteyn karo kaas oo horseedaya horumar dhan walba leh.

DSI waxa ay ka duuleeysa in xalka waara ee barakaca lagu gaari karo oo qura in ay dowladdu leedahay kaalinta hoggaamineed isla markaana dadaalada hay'adaha ka shaqeeya gargaarka, horumarinta, qaran iyo nabadgelyo dhiska iyo in lagu daro Dadka Barakacu Saameeyay qudhooda[55]. DSI waxa ay sidoo kale taageersantahay mabda' ay iska wada kaashanayaan xalka waara dhamaan inta ay khuseyso waxa ayna sidoo kale hageysaa hirgelinta CRRF Soomaaliya iyo ballan qaadyada khuseeya ee Heshiiska Nairobi ee ku aadan isku dhafidda qaxootiga soo guri-laabanayo iyo bulshada martigelineyso.

Tan iyo markii la daah-rogay DSI, isbedel dhanka fekerka ah ayaa ku dhashay dowladda iyo hay'adaha kaas oo ku aadan sidii la'iskula qaadan lahaa hanaan muddo dheer soconaya oo loogu helayo xal waara oo la joogteyn karo kaas oo horseedaya horumar dhan walba leh

Inta badan mashariicda xalka waara waxaa si wadajir ah u hirgelyo NGO-yada iyo Ururada Bulshada Rayidka ah iyo QM waxaana sii kordhaya ku wareejinta maamulka mashariicda iyo isku-dubbaridka oo ay hay'adaha caalamiga ahi ku wareejinayaan hay'adaha dowladda ee maxaliga ah. Isbedelkan ayaa ka dhashay kadib arka sare loo qaaday isku-dubbariska iyo is-waafajinta mashariicda deeq-bixiyeyaasha kuwaas oo lagu toosiyay aragti mideeysan iyo hanaan wadajir ah si loo helo xalka waara.

Iyada oo la garowsan yahay in barakacu yahay caqabad siyaasadeed iyo mid horumar una baahan in lagu sameeyo maalgelin muddo dheer soconeysan si ay u dhameystirto falcelinada gargaarka, ayeey bahda horumarka ee leh awoodaha gaarka ah ama agoonta dheeraadka ah ee ay u leeyihiin dhinacyada gaarka ah isku baheysteen in ay kawada shaqeeyaan sidii si waarta looga wada howlgali lahaa goobaha muhiimka ah. Tusaale ahaan, habka nabad-dhiska ee xalka waara ayaa intooda badan loo qaabeeya hanaanka Wadajirka ah ee khuseeya dowladaha hoose iyo ka qeyb qaadashada bulshada[56]. Marka laga eego dhan istiraatiiji ah, xiriirada ka dhaxeya colaadda, amniga iyo barakaca ayaa soo if-baxay 2016/2017[57]. Isla markaasna, tallabooyin dhowr ah oo xalka waara ah ayaa loo naqshadeeya in lagu taageero si toos ah gaar ahaan deegaanada dadka gudaha dalka ku barakacay ee heer dagmo iyo heer gobol[58]. Talabooyinkan ayaa ka duulayay fekerka ah in haddii sare loo qaado heerka karaanka dowladaha hoose ay ku bixiyaan adeegyada dadka barakacay, loona diyaariyo qaab isla xisaabtan oo ka dhaxeeya maamulka iyio dadka barakacay, isla markaana sare loo qaado wada noolaanshaha bulshada ee ka dhaxeeya bulshada martigelisa qaxootiga, markaa unbey xoogeeysaneysaa dowladnimada maadama ay dadka barakacay dareemi karaan in aan la faquuqin.

Sare u qaadista heerka hoggaamineed ee xalka waara ayaa sidoo kale sababay in dowladdu hoggaamiso qorsho howleedyada bulshada (CAPs)[59] ee isku keenaya barakacayaasha iyo bulshada martigelineysa. Tani waxa ay keentay in ay noqoto hanaan loo bogay waxaana lagu daray geedi-socodka qorsheynta degmooyinka maamul-goboleedka Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, Hirshabeelle. Geedi-socodka CAP ayaa u abuuray jawi u sinnaansho dadka nugul iyo kooxaha la faquuqo si ay uga qeyb qaatan arrimaha guud iyo in ay saameyn ku yeeshaan qorsheynta horumarka deeeganadooda. In la isku xiro hanaanka ka qeyb qaadashada bulshada ee geedi-socodka qorsheynta degmada ayaa muhiim u ah sidoo kale in la dhiso Gole Deegaan rasmi ah oo ay hoggamineyso Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta (MoIFAR).

**Si loo kordhiyo daah-furaanta, isla xisaabtanka iyo isku-dubbaridka,** Wasaaradda Qorsheynta ee DFS ayaa dhistay nidaamka xog aruurinta ku saabsan deeqaha ee loo yaqaano "Somalia Aid Information Management System (AIMS)"[60]. Nidaamkani waxa uu ku dhisanyahay barta-internet ka waxaana dheehan kara dadweynaha si ay u ogaadaan xogta ku saabsan deeqaha

loona kordhiyo isla xisaabtanka, isku-dubbaridka iyo in qorsho ku saleeysan caddeymo, kormeer iyo qiimeyn iyo waxtarka deeqaha loo helo. Intaas waxaa dheer, in bahda caalamiga ah ay u horumariyeen xalka waara iyo adkeysiga nidaam soo bandhigaya meelaha laga soo galo iyo qeybaha muhiimka ah ee dhismaha dadaalada gargaarka loo naqshadeeyay howlaha muddada fog soconayo ee xalka waara iyo adkeysiga[61].

Sidoo kale, isla qaadashada mabad'iida xalka waara ayaa xaqiijisay hanaan guud oo lagu wada shaqeeyo isla markaasna muujisay wax tarka qaabkan si la'iskugu xiro siyaasadaha, qorsheynta iyo diyaarinta howlaha iyo hanaanka. Dadaalo dheeraad ah ayaa socda oo la iskugu xirayo howlaha xalka waara, xasilinta, maamulka, kaabe-yaasha dhaqaalaha, iyo sareynta sharciga[62].

**Dhinaca cilmi-baarista, xogta iyo aqoon is dhaafsiga,** dhaqan gelinta hanaanka howlgallada iyo shuruudaha howlaha ee loo yaqaan IASC framework and criteria[63] ayaa horseeday kormeer intii hore ka adag ee la xiriira badqabka dadka, sharciga iyo agabka bulshada barakacday.

Maamulada Soomaaliya oo kaashanaya bahda howlgallada ayaa billaabay in ay ku daraan



tilmaamaha muujinaya barakaca istiraatiijiyadaha qaran. Soomaaliya ayaa markii ugu horreysay daah-rogtay dhowaantan Sahanka Xogtiisu Sarreyso ee loo yaqaan (Health and Demographic Survey)[64], kaas oo bixinayo falanqeyn ku saabsan dadweynaha, astaamaha qoysaska ee caafimaadka, waxbarashda, shaqada, biyaha iyo nadaafadda. Natiijada sahanka ayaa u saamixi doonta Soomaaliya in ay kormeerto qeybaha NDP-9 oo ay ka mid tahay bartilmaameedyo sugan iyo qorsheyn loo sameeyo dadka nugul ee ka tirsan bulshada.

Kormeerka Nafaqada Soomaaliya[65] ayaa sidoo kale muujinaya maclumaad guud oo ku saabsan heerka nafaqada dumarka iyo caruurta ee dalka tobankii sano ee tagtay. DFS oo kaashaneysan IGAD iyo Bangiga Addunka ayaa rajeyneysa in ay horumariso maclumaad-keydiye qaran oo ku haboon ujeedkan si loo helo falanqeyn ku saabsan barakaca qeybna ka qaadanayo diyaarita howlaha iyo qorsheynta. Waxa intaasi dheer, Agaasinka Istatistikada Qaranka ayaa dhawaan noqotay Hay'adda Istatistikada Qaranka (NBS) ee madaxa bannaan kadib markii la saxiixay sharcigii Istaatistikada ee lagu dhisay Febaraayo 2020. Sidoo kale, bahda xalka waara ayaa soo saarta islana wadaagta aqoonta iyo maclumaadka ku saabsan si loo helo falanqeyn istiraatiiji ah oo ku saabsan magaaleynta, barakaca, maamulka dhulka si loo taageero xalka waara, falanqeyn xilii dheer soconeysa iyo ka qeyb galka Dadka Barakacu Saameeyay ee geedi-socodka siyaasadda. Maadama tirade qaxootiga soo guri-noqonayo badantahay, bahada xalka waara ku howlan ayaa si wadajir ah u falanqeeya xogta ku saabsan kormeerka kadib soo noqoshada[66].

Marka laga yimaado dadaalada iyo guulaha la gaaray, weli waxaa adag in la qiimeeyo heerka iyo guud ahaan marxaladda ay dadka barakacu saameeyay noloshoodu isbadashay. Ma jiraan qaab mideysan oo loo ogaan karo imise qoys ayaa ku sugan barakac khasab ah ama ugu dambeyn dib u soo laabtay si iskood ah isla markaasna helay xal waara oo ka tarjumaya dooqooda – tani ha noqoto isku dhafka dadka loo yimid, soo noqoshadooda ama deegaan kale oo ay doorteen in ay degaan. Waxaa jiro dhowr hab oo isku dhafan oo la tijaabinayo oo aan loola jeedin kaliya in lagu cabiro horumarka xalka waara ee la garay, balse sidoo kale in si fiican loo fahmo sababaha horseeda malaha ama dareenka in qaxootigu kamid yihiin bulshada iyo in kale. Haddii talabooyinkan lagu xiro hanaanka lagu xaqiijinayo wax-tarka deeqaha iyo tilmaamaha guud ee saboolnimada, waxa ay nasiin karaan faham ku aadan sida ay dadaalada mideysan ee lagu abuurayo jawi saamaxaya in la bixyo adeegyada xalka waara.

## 2016

### TILLAABOOYINKA UGU HORREEYA

- Maclumaadka Barakacayaasha gudaha dalka ee Muqdisho
- Daah-rogga Dadaalka Howlaha Xalka Waara
- Howlaha kowaad ee Mashaariicda Xalka Waara oo qiimahooda lagu qiyaaso oo $ 551 milyan
- Hanaanka wadajir ee loogu tala galay dowladaha hoose ee la isla qaatay iyo kooxda isku-dubbaridka xalka waara ee aan rasmiga aheyn ee Puntland.

## 2017

### XALKA WAARA, AABAARAHA IYO BARAKACA LIXADKA LEH

- Soomaaliya ayaa ka bad-baadisay macluul ku dhowaad qiyaastii 2.6 milyan oo qof oo ay barakiciyeen abaaraha.
- NDP 8 waxa loo qoondeeyay cutub si gaar ah uga hadlaya tahriibka, barakaca iyo Xalka Waara
- Heshiiskii Nairobi ee ku saabsanaa Qaxootiga Soomaalida iyo Qorshe Hawleedka lagu soo celinayo.
- Qiimeynta Baahida iyo Saamaynta Abaaraha

## 2018

### KORORKA TAAGEERADA HOWLGALLADA XALKA WAARA

- Hanaanka kasoo Kabashada iyo u Adkeeysiga Aafooyinka oo ahaa billowgii qiimeynta u nuglaanshaha Soomaaliya ee saboolnimada.
- Soo bandhigista astaamaha ee loogu tala galay HRP iyo bandhig-ga maclumaadka ku saabsan deeqaha
- Qorshaha howlaha bulshada oo lagu daray nidaamka qorsheynta degmooyinka
- Wasaaradda Qorsheynta oo magacowday Xafiiska Xalka Waara
- Taageero dheeraad ah oo la siiyay howlgallada xalka waara – lagu qiyaasay adduun dhan qiyaastii $46.5 milyan

## 2019

### ISKU-DUBBARIDKA HAY'ADAHA IYO SIYAASADAHA XALKA WAARA

- Xog-heynta Qaran ee Xalka Waara ayaa la magacaabay iyo mabad'iida hagayo howlaha xalka waara
- Shirarka isku duwidda howlaha xalka waara ayaa loo sameeyay Gobolka Banaadir, Koonful Galbeed iyo Jubbaland.
- Ansixinta siyaasadda qaran ee Qaxootiga Soo Guryo-noqday iyo Barakacayaasha
- In Dowladda Soomaaliya ka sameyso ballanqaad madasha caalamiga ah ee Qaxootiga Adduunka.
- Ballanqaad dheeraad ah oo maaliyadeed (qiyaastii $13 milyan) in loo sameeyay howlaha xalka waara

## 2020

### HOWLGALLADA XALKA WAARA OO LA BALLAARIIYO

- Xalka waara oo lagu daray tiirka Arrimaha isku dhafa (Cross-Cutting) ee Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad.
- Ansixinta Heshiiskii Kampala
- U diyaar garowga Xog-heynta Xalka Waara iyo Qorshaha ka falcelinta saameynta caabuqa COVID-19 ee dadka gudaha dalka ku barakacay.
- Istiraatiijiyada Qaran ee Xalka Waara 2020 - 2024

# 5 ARAGTIDA FOG





Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) oo ah tubta howlgallada ayaa bixineysa aragto mideysan, ujeeddooyin istiraatiiji ah iyo mabad'iida hageysa dhaqan gelinta howlaha iyo siyaasadaha Soomaaliya ee xalka waara 5ta sano ee soo socota. Waxaa la rajeynayaa in NDSS ay horseeddo gaarsiinta in la helo jawi u sahlaya dadka Barakacu saameeyay (dadka gudaha dalka ku barakacay, qaxootiga, magan-galyo doonka, qaxootiga soo guri-noqonaya, iyo bulshada martigelinaysa barkacayaasha ee nuqul) in ay u helaan adeegyada xalka waara si siman, aa naan kala sooc laheyn. Ujeeddada ugu dambeysa ee NDSS waa in la yareeyo ama la baabi'iyo saameynta ballaaran ee barakaca ka dhashay musiibooyinka dabiiciga ah ee soo noq-noqday iyo kuwa la xirira colaadaha iyo maamulka.

## ARAGTIDA

In dadka barakacu ku saameeyay Soomaaliya loo helo xala waara iyada oo la raacayo nidaamka falanqeynta ku saleysan caddeymaha iyo in si wada jir ah la iskula qaato hanaanka, leyskuna dhafo howlaha xalka waara.

## ARAGTIDA ISBEDELKA

Haddii Dadka Barakacu Saameeyay heli karaan adeegyada aas-aasiga ah kuna noolaan karaan nabadgelyo ka ilaalineysa baro-bixinta khasabka ah, waxa ay awoodaan in ay: ka qeyb qaataan howlaha guud si ay ku dheehantahay muwaadinimo dhameystiran kuna nool goob xasilan oo nabdoon; helaan nolol waarta iyo fursado shaqo; helaan nidaam cadaalad; markaas ayeey heli karaan xal waara sababtoo ah waxa ay karaan in ay si isku filnaansho ku dheehan tahay uga mid noqdaan markale bulshada inteeda kale.

Ahmiyadaha lagu xusay Istiraatiijiyaddan waxaa ka mid ah:

- In sare loo qaado heerka adkeysiga ee Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo loo xaqiijinayo in ay u helaan si siman adeegga guud, deegaan amni ah, hanaanka badqabka bulshada iyada oo la eegayo xuquuqda iyo baahida jirta.
- In la kordhiyo la xisaabtanka hay'adaha dowladda ee u shaqeeya Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo la xaqiijinayo ka wada qeyb qaadashada amniga, geedi-socodka dhismaha qaranka loona dammaanad qaadayo badqab, amni iyo helitaan cadaalad.
- In sare loogu qaado Dadka Barakacu Saameeyay helista nolol joogto ah, fursado shaqo iyada oo loo abuurayo jawi u horseedayo gaarista isku filnaasho.
- In loo sahlo helista nidaam cadaalad iyo kala dambeyn leh Dadka Barakacu Saameeyay iyada oo la xoojinayo hanaanka rasmiga ah iyo kan aan rasmiga aheyn ee cadaaladda.
- In maalgashi lagu sameeyo hanaanka lagu dhimayo ama loogaga hortagayo barakaca ka dhasho abaaraha iyo fatahaadaha.

## Xalka waara waa ahmiyad muhiim ah oo ku xusan qorshaha horumarinta qaranka (NDP-9 2020-2024)

Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad waa qorshe Soomaaliyeed oo sidoo kalana ah istiraatiijiyad qaran oo lagu dhimay saboolnimada, iyo horumar lawada gaaro. Qorshuhu waxa uu xalineyaa sababaha dhaliya saboolnimada waxa uuna beegsanaya sidii loo dhimi lahaa heerka ay u dareemaan qoysaska iyo dadka Soomaaliyeed saboolnimada. Faaqidaadda qorshaha ayaa muujineysa in saboolnimada Soomalaiya ay ka dhalato xasilooni la'aanta siyaasadda, amni darri, kala dambeyn la'aan, iyada oo ay uga sii dareyso isbedelka cimilada. Xasilooni siyaasadeed, amni iyo sarreynta sharciga waa in wax laga qabtaa si loo kobciyo jawi sahlaya in dadaalada lagu taageerayo kobac dhaqaale oo u adkeysan karo isbedelada cimilada inuu guuleeysto. Waxaa kale oo loo baahan yahay horumar bulsho oo loo taabo geliyo loona joogteeyo kobac dhaqaale iyada oo loo marayo horumarinta karaanka dadka, daryeelka badbaadada iyo maareynta khataraha musiibooyinka.

Sidaa daradeed, Istiraatiijiyadda lagu dhimayo saboolnimada ee NDP9 ayaa loo qaabeeyay 4 tiir: (1) Siyaasad loo dhanyahay oo lala xisaabtami karo; (2) Amniga oo la hagaajiyo iyo sarreynta sharciga; (3) Kobac dhaqaale oo loo dhanyahay, iyo (4) Hagaajinta horumarka bulshada. Dadka barakacu saameeyay ee Soomaaliya ayaa ah kuwa ay sida ba'ani u saameysay saboolnimadu. Taa waxaa ka dhalatay barakac ballaaran oo daba dheeraatay oo caqabad ku ah dadaalada lagu dhimayo saboolnimada iyo taageerista soo-kabashada dhaqaalaha.

In hadaba laga gaaro guulo hoos u dhigista saboolnimada waxaa loo baahan yahay in la abbaaro kooxaha ugu nuqul ee bulshada. Iyada oo la raacayo ahmiyadaha NDP-9, in loo qaabeeyo xalka waara si mustaqbalka fog ah waa siyaasad isku dhafan (oo waajib ah), oo taabaneysan dhamaan 4ta tiir ee Qorshaha Horumarinta Qaranka.




**Xigasho:** Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP-9 2020-2024)

## Isku Xirka Howlaha Bini'aadminimada, Horumarinta Iyo Kuwa Nabad-Dhiska

Agoosto 2020, Guddi isku xira howlgallada ayaa la dhisay si uu tilmaamo wax ku ool ah uga bixiyo qaabka la'iskugu xiri karo howlaha hay'adaha ka howl galo bini'aadminimada, horumarinta iyo nabad-dhiska si ay wadajir uga jawaabaan baahiyaha nuglaanshaha Soomaaliya ee muddada dhow, dhexe iyo tan fogba[67]. Iyada oo la aqoonsayahay jiritaanka tusaale yaal hay'ado si kaligood ah u howl-galay iyaga oo isku xiraya dadaaladooda iyo kuwa kale ee hay'adaha gargaarka bini'aadminimo, kuwa horumarin iyo kuwa nabadda ka shaqeeya marka ay timaado naqshadeynta iyo hirgelinta howlo lagu guuleeyso.

Fursad ayaa ka jirto in la'isku geeyo dadaalada isku duwidda howlaha si loo wajaho dhibaatooyin badan iyo baahiyaha dabiicga ah ee iska socda ee Soomaaliya iyada oo la adeegsanyo hanaanka la iskugu xirayo dadaalada hay'adaha ka shaqeeye gargaarka bini'aadminimo, kuwa horumarin iyo kuwa nabadda[68].

Iyada oo la raacayo NDP-9, halka mabda' ee ugu muhiimsan waa in aan la lumin guulihii horay loo gaaray iyo in la xaqiijiyo wada shaqeynta ka dhaxeeya dhamaan inta daneyneysa arrimaha xalka waara, taas oo horseedi karta in si loogu guuleeysto howlaha xalka waara iyada oo ay Soomaalidu mas'uul ka yihiin dhamaan howlaha Dowladda: nabad, sarreynta sharciga, amniga, badqabka bulshada, deegaanka, wakiil ahaanshaha iyo dhaqaale barwaaqo horseeda. Iyada oo lagu dhex shaqeynayo xeyn-daabka hay'adaha dowlaada iyo iyada oo la isticmaalayo wanaaga jira, NDSS waxa ay gacan ka geysan




Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara ayaa si mudnaan leh u aqoonsantahay in xallinta mushkiladda barakaca ay tahay dar-dar gelinta hoose u dhigista saboolnimada ee dalka dhan. Dowladda ayaa u heli doonta xal waara dadka uu saameeyay barakaca iyada oo la dhaqan gelinayo istiraatiijiyadaha saboolnimada looga baxayo iyo in la xalliyo arrimaha dhaliyo saboolnimada iyada oo loo marayo hanaanka guud ee dhinacyada badan laga eegayo.

Xoojinta karaanka hay'adaha ee kawada qeyb qaadashada iyo horumarka dhaqaale

**Xigasho:** Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP-9 2020-2024)

doontaa is-waafajinda hanaanka lagu xaqiijinayo xal la joogteyn karo oo ay ka faa'iideystaan dadka barakacu saameeyay.

Guddiga isku xira howlgallada aya soo saaray daraasad lagu tixay hanaanka isku-duwidda xalka waare ee ka jira Soomaaliya iminka, iyada oo soo jeedisay in wax-kabadal lagu sameeyo hanaanka jira si loo tur-xaan biyo una noqdo hanaan miro dhal ah69. Waxa ay soo jeedineysa in la dhiso Guddi daadihiya isku xirka oo ka kooban Wasaaradda Gargaarka & Maarraynta Musiibooyinka (MoHADM), Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED) xafiiska RC/HX, xafiiska isku dhafan, OCHA, madaxda qeybeedyada kooxaha afarta ah, Bangiga Adduunka, iyo wakiilo ka kala socda deeq-bixiye yaasha iyo NGO yada.

Xafiiskan isku dhafan ayaa noqon doona sida xog-heyn. Waxaa la qiyaasayaa in Guddiga isku xira uu fududeyn doono shirarka u dhaxeeya guddiyada heer wasaaradood ee ka fal-celinta howlaha deg-deg ah iyo guddiga isku xirayo SDRF, gaar ahaan marka laga hadlayo caqabadaha muddada dheer ragaadiyay Soomaaliya. Hanaanka lasoo jeediyay ayaa sugaya ansixin iyo kawada hadal ay ka galaan dowladda iyo inta ay khuseyso.

## Xog-heynta Xalka Waara iyo Waajibaadkeeda

Si loo helo hanaan wadajir dowladadeed iyo natiijo guud, Wasaaradda Qorsheynta oo si dhow ula tashaneysay wasaaradaha ay khuseyso iyo Xafiiska Ra'isul Wasaaraha (OPM) ayaa dhisay Xog-

heynta xalka waara (oo wixi hadda ka dambeeya loogu yeeri doono "Xog-heynta') Okotoobar 2019. Xog-heynta ayaa isku keentay 14 hay'adood oo ka tirsan DFS, ayaa u jeedkeedu yahay sidii ay u siin laheyd Dowladda Soomaaliya taageero farsamo iy mid guud isla markaasna ay u kor-joogteyso dhammaan tallabooyinka hor-tabinta leh ee lagu baadi goobayo xalka waara ee barakaca iyo sidii looga fulin lahaa dadaaladaas dhamaan dalka oo dhan, iyada oo la raacayo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad, Nidaamka Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka (RRF) iyo siyaasadaha iyo xeerarka kale ee Dowladda Soomaaliya.

## XUBNAHA XOG-HEYNTA XALKA WAARA:

- Xafiiska Ra'isul Wasaaraha (OPM)
- Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta (MoIFAR).
- Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka (NCRI)
- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka (MoHADM)
- Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED)
- Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA)
- Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u -dhiska iyo Guriyeynta (MoPWHR)
- Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka (MoWHR)
- Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka (MoAI)
- Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha (MoEWR)
- Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda (MoFMR)
- Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga (MoFA)
- Agaasinka Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada (DECC) – Xafiiska Ra'isul Wasaaraha
- Hay'adda Socdaalka Iyo Jinsiyadaha Soomaaliya

## Mabaadii'da Xalka Waara

- **Hoggaan Dowladeed:** NDSS waa istiraatiijiyad muhiim u ah sidii loo heli lahaa hannaan ay dowladdu hoggaamineyso halka laga gudbayo sidii hore ee ay hay'adaha kale u hoggaamin jireen howlaa iyo bixinta adeegyada degdeg ah, dadaalada fal-celinta iyo howlaha kale. Dadaalada waxqabad waa in iminka la waafajiyaa NDP-9 iyo qorsheyaasha kale ee dowladdu hoggaamineyso ee heer Federaal, heer gobol iyo heer dowlad hoose si loo xaqiijiyo joogteynta iyo milkiyadda dowladda ee howlaha xalka waara. Dowladdu waa in ay udub dhexaad u ahaata qorsheynta, isku duwidda, dhaqangelinta iyo kormeerka mashariicda xalka waara.
- **Ka Qeyb Qaadasho:** Howlaha xalka waara waa ay noqdaan kuwo ku saleysan bulshada iyo hanaanka ka qeyb-gelinta, si loogu ogolaado bulshada ay khuseyso in ay doortaan nooca xalka ay doonayaan, iyagu qeexaan ahmiyadaha iyo in si wadajir ah looga qeyb qaato dookha, qorshaha, dhaqangelinta howlaha si loo gaaro xal waara oo la karo isla markaasna la joogteyn karo.
- **Dhameystiran:** Howlaha xalka waara waa in ay wajahaan baahida iyo nuglaanshaha dhamaan dadka ay saameeysay barakaca

oo ay ka midka yihiin dadka gudaha dalka ku barakacay, qaxootiga soo guri-laabanayo, bulshada martigelisay si loogu horseedo dub-u-heshiisiin, lagana fogaado xasaradaha loona dhiirigeliyo isku duubni ka dhaxeeysa xubnaha bulshada.

- **Deegaan ku Wajahan:** Howlaha waa in ay ku wajahnaadan goobo cayiman ayna tixgeliyaan wadciga goobahaas si loo tixgeliyo baahida goob kasta oo u baahan hanaan u gaar ah iyada oo lagu saleynayo duruufaha nololeed, baahida, fursadaha iyo khataraha goob walba.

- **Xuquuqda iyo Baahida:** Howlaha xalka waara waa in ay xalliyaan nuglaanshaha iyo baahida, oo ay ka midka tahay baahida dhaqaale ee dadka uu saameeyay barakaca iyo xuquuqdooda bini'aadminimo.

- **Loo Dhanyahay Iskuna Xiran:** Howlaha xalka waara waa howlo taabanayo qeybo kala duwan iyo inta ay khuseyo oo badan, waxa ayna sii xoojineysa wada shaqeynta iyo iskaashiga ka dhaxeeya inta ay khuseyso sida Dowladda, UN-ka, NGO-yada, ganacsatada, deeq bixiye yaasha ku howlan gargaarka, horumarka, nabad iyo qaran-dhiska

- **Sanado Badan:** Howlaha xalka waara waa in ay noqdaan kuwo socda sanado badan miisaaniyad waqti fog-na loo qoodeeyo si loo helo howlgallo ka jawaabaya hadba wadciga iyo baahiyaha is badaleyso ee dadka.

- **Xaaladaha Gaarka ah ee Jinsiga, Naafada, iyo Dadka Laga Tirada Badanyahay:** Howlaha xalka waara waa in ay tixgeliyaan baayihaga gaarka ah ee jinsiga, naafada iyo qabaa'ilka laga tirada badanyahay, waayeelka iyo il-gaar ah lagu eego tabashooyinka dumarka iyo dhallinyarada, oo ay kamidka yihiin takoorka ku saleysan kamid noqoshada qabiilka (iyada oo si gaar ah loo tixgelinayo qabaa'ilka laga tirada badanyahay). Howlaha waa in ay sidoo kale noqdaan kuwo ka taxadara colaadaha kana qeyb qaataan dadaalada waara ee lagu xoojinayo nabad-dhiska iyo horumarinta iyada oo lagu dhaqmayo hanaanka "ha-uga sii darin dhibaatada".

- **La Joogteyn Karo:** howlaha xalka waara waa in ay fududeyaan dhiirigelinta xal ka yimaad dowladda, ururada bulshada rayidka ah, ganacsatada, iyo bulshada qudheeda. Waa in ay howluhu xoojiyaan kaalinta dowladda iyada oo loo marayo in sare loo qaado karaankeeda geedi-socodka hay'adaheeda iyo hanaan horseedaya xalka waara ee heer walba leh. Howluhu waa in ay ahmiyad siiyaan bixinta adeegyada iyada oo la adeegsanayo hanaanka dowliga ah iyo qaab-dhismeedka bulshada iyo in lagu daro dadka barakaacy intii qaab-dhismeedyo is bar-bar socda la arki lahaa.



AU UN IST PHOTO / Tobin Jones.

# 6 UJEEDDOOYINKA ISTIRAATIIJIGA AH IYO MEELAHA MUHIIMKA AH EE HOWLAHA XALKA WAARA



# UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 1AAD

**In sare loo qaado heerka adkeysiga dadka ay saameysay barakaca iyada oo la xaqiijinayo in loo helo adeegga dadweynaha si siman, helista guryo ay degnaan karaan muddo fog, hanaanka bad-qabka bulshada iyada oo loo marayo hanaanka ku saleysan xuquuqda iyo baahida.**

## Natiijada 1aad:

**Isla dejinta, iyo dib-u-dhexgelidda bulshada degaanka ee ilaa 5,000 oo qaxooti ah, 25,000 oo qaxooti soo guri-laabtay ah iyo (qiyaastii 4,000 oo qoys) iyo 50,000 oo dadka gudaha ku barakacay ah (80,000) 5ta sano ee soo socota dhamaan maamul goboleedyada iyada oo la gaarsiinayo adeegga aas-aasiga ah iyo guryo la degenaan karo muddo dheer. .**

## Sababta

In lagu qiyaasay 80 boqolkiiba oo ka mid ah dadka barakacay ayaa ku nool deegaano aan rasmi aheyn oo ku yaalo tuulooyinka iyo magaalooyinka waweyn ee Soomaaliya[70]. Iyada oo ay khataraha cakiran ee u dhaxeeya khataraha dabiiciga ah, isbedelka cimilada, colaadaha iyo amni darrida sii socdaan isla markaasna horseedayaan barakac lixaadle oo ka dhaca gudaha dalka, magalooyinka ciriirirga ee aan laheyn qaab maamul magaalo adag ayaa la daala-dhacayo in ay la qabsadaan qul-qulka. Maqnaanshaha qorsheyn iyo maamul magaalo lagu naaloon karo, fiditaanka iyo qorsho la'aanta magalooyinka ayaa qudhiiso ka qeyb qaadanayo dagaal-beeleedyo iyo sii badinta xasilooni darrida[71].

> "Hab-dhaqanka ku aadan qaxootiga soo guri laabtay ee bulshada martigelisa ayaa inta badan ah mid fiican, sababta oo ah waxa ay siiyaan dhul ay degaan, baahiyaha aas-aasiga ah sida cunto, biyo nadiif ah, adeeg caafimaad, adeegyada nadaafadda iyo in ay is dhexgalaan sida is-guursiga iyo nabad ku wada noolaanshahah."
>
> —QAXOOTI KU SOO GURI NOQDAY JUBALAND

Xasilooni la'aanata deegaanka iyo guryo-ka kicinta joogtada ah ayaa ka mid ah arrimaha ka hortaagan dadka ay saameysay barakaca in ay helaan xuquudooda. guryo-ka kicinta khasabka ah aya sii xoojineysa dhibatooyinka haysta dadka nugul ee Soomaaliyeed. Hanaanka guryaha ee aan rasmiga aheyn, magnaanta shaciyada

iyo xeerarka guryo kireysiga iyo awoodda dowladda oo xaddidan dhinace hogaaminta ka hortaga guryo-ka kicinta ayaa ka dhigeysa dadka ay saameysay barakaca kuwo u dayacan dhibatooyinka taabanayo bad-qabkooda, caafimaadka, sharafta iyo noloshooda. Sababo la xiriira guryo-ka kicinta cakiran isla markaasna dhinacyada badan, talabooyinka ka hortagga iyo ka fal-celinta ayaa u baahan hanaan qeybeed isku dhafan taas oo isku keeneysa dowladda, bahda gargaarka, horumarka iyo bulshada ay khuseyso, oo ay ka midka yihiin milkiileyaasha guryaha iyo bulshada dhibaatadu saameeysay.

Iyada oo taa laga duulayo, talaboyinka ay qaadeen maamulada maxaliga ah ayaa ah kuwo dhiirigelin leh. Dadaalo loo galay in aan guryo-ka kicinta lagu sameyn dadka dan-yarta ah inta uu socdo caabuqa COVID-19 ayey sameeyen maamulka degmada Baydhawo iyaga oo soo saaray wareegto rasmi ah oo joojineyso guryo-ka kicinta gudaha magaalada Baydhabo. Duqa magaalada Baydhabo ayaa sidoo kale soo saaray diginin talaabo sharci oo la gaarsiinayo milkiilayaasha guryaha ee ka horyimaada wareegtadan[72]. Intaas waxaa dheer in laga magacaabay dowladaha hoose ee Baydhabo xafiis si dhow ula socda guryo-ka kicinta ee gobolka Baay iyo sidoo kale kuwa gobollada Jubaland iyo Banaadir ayaa muujineyso muhiimadda ay leedahay in dowladdu qaadato dowr hoggaamineed si looga hortago guryo-ka kicinta.

Dhul ayaa sidoo kale la siiyay dadka gudaha dalka ku barakacay ee khatarta ugu jiray in guryo-ka kicinta khasab ah lagu sameeyo. Dadkaas ayaa ku noolaa (2) degaanka Luglaw ee Kismaayo, maamul-goboleedka Jubbaland halkaas oo goob-qorsheyn lagu sameey, qiimeynta saameynta deegaanka iyo qiimeynta amnigaba ay haatan ka socdaan; (2) deegaanka Barwaaqo ee Baydhabo, maamulka Koonfur Galbeed halkaas oo 1,000 qoys la dejiyay dhul halka 1,009 qoys la qorsheynayo (3) deegaannada Bariga Gaalkacyo, Dhusamareeb, Adaado, Abudwak iyo Balanabale ee ka tirsan maamulka Galmudug ayaa dhul siiyay dadka gudaha dalka ku barakacay iyo (4) Waxaracadde, Gobolka Banaadir oo la siiyay dhul 300 oo qoys.

Iyada oo la eegayo caqabadaha iyo maaliyadda xadidan ee hay'adaha muhiimka ah, dowladaha hoose waxa ay la daala-dhacayaan sidii ay u xaqiijin lahayeen helitaan adeeg si siman loogu sameeyo dhamaan dadka deegaanka. Si kastaba ha noqote, waxaa jira dhowr tusaale oo ay dowladaha hoose si guul leh ku unkeen hababka lagu horumarinayo bulshada ee loo yaqaano (SDMs). Tusaale ahaan dowladaha hoose ee Somaliland iyo Puntland oo ay taageerayan Wasaaradaha arrimaha gudaha iyo wasaaradaha kale ee muhiim ka ah[73] ayaa si guul ah unkeen hababka lagu horumarinayo bulshada ee loo yaqaano (SDMs). Waxaa sidoo kale jira maal-gelin isku dhafan iyo dowlado badan oo iska kaashanayo bixinta deeqo ka dhashay heshiisyo dhex maray wasaaradaha, dowladaha hoose iyo howlaha adeegga dowladaha hoose ee isku dhafan loona yaqaan (JPLG).

Iyada oo lagu saleynayo xeerarka dowladaha hoose ee Somaliland (Sharci Lr. 23 iyo kan Puntland (Sharci Lr. 7) Daadajinta adeegyada dowladaha hoose ee muhiimka ah ayaa helay taageero, tusaale ahaan: Dayactirka iyo ballaarinta goobaha caafimaadka, waxbarashda, nadaafadda, bixinta mushaarka dadka ka shaqeeya nadaafadda iyo ilaalada goobaha, bixinta qaansheegatada adeegyada aas-aasiga ah, u kordhinta mushaarka macalimiinta (Somaliland), iskaashiga dowladda iyo ganacsatada ee bixinta adeegyada biyaha, abaabulka bulshada, wacyi-gelinta, u doorista, qorsheynta, kormeerka IWM.

**Cel-celis ahaan,** ilaa iyo 84 boqolkiiba dadka uu saameeyay barakaac iyo dowladda ayaa sheegay in aan lagala tashan qorsheynta ama hirgelinta mashariicda ee loogu talagalay in wax looga badalo noloshooda. Hadaba, inta badan dadka uu saameeyay barakaac ayaa tilmaamaya in fursadaha shaqo, helista guryo iyo dhul ay muhiim u yihiin

sidii duruufahooda nololeed loo wanaajin lahaa. Helista fursadaha kaabaya nolosha ee dadka uu saameeyay barakaca ayaa weli ah kuwo liita, sababtoo ah iyaga oo aan laheyn xirfado.

Sida badan, mushaarka shaqaalaha caafimaadka laguma daro taageerada SDM, maadama aysan ka tirsaneyn adeegyada la daa-dejiyay. Si kastaba ha ahaate, labo ka mid ah afartii degmo ee ku taal Somaliland ee fulisa howlaha SDM ayaa bilaabay in ay macalimiinta siiyan mushaar dheeri ah iyaga oo ka bixinayo dakhliga uu ka aruuryo Guddiga Dowladda Hoose deegaanada hoose yimaada. Heshiis is-faham aha oo u dhaxeeyo hay'adaha taageero, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradaha kale ee muhiimka ah iyo SDM ka dowladaha hoose ayaa caddeyneysa waajibaadka iyo mas'uuliyadaha dhinacyada iyo abuurista hanaan daah-furan oo la xiriira xawilaadda, oo ay ku jirto tabaruca ay geystaan miisaaniyadda Maamul Goboleedyada iyo dowladaha hoose. Muddada lacag siinta, hirgelinta iyo soo jawaab-celinta mashariicda ayaa ah afar bilood. SDMs ayaa noqon karo hanaan deg-deg ah oo sare loogu qaadi karo adkeysiga bulshada iyo u diyaar-garowga iyo ka hortagga barakaca heer walba leh. Gaar ahaan kuwa la xiriira bay'ada, barakaca ka dhasha musiibooyinka dabiiciga ah. Lacagahaas ayaa noqon kara kuwo horseeda in laga hortaggo barakaca tooska ah iyo midka dadban, iyo sidoo kale taageerada loo fidinayo kooxaha ay saameysan musiibooyinka[74].

Sanadaha soo socda ayaa la qiyaasaya in ay noqdaan sanado wata fursado muhiim ah oo horseeda magaaleyn si wacan loo qorsheeyay iyada oo loo marayo siyaasadaha qorsheynta ee heer federal iyo kuwa heer maamul-goboleed, nabadgeliyo waarta, maareynta dhulka, iyo in la xoojiyo maamullada maxaliga ah[75]. Deegaannada aan rasmiga aheyn ayaa weli ku ah caqabad muuqata geedi-socodka dadaalada lagu wada dajinayo daaka iyo amni waara la'antiisa oo sababtay dhaqaalaha gurracan ee ku saleysan siyaasadda kaas ooh hor-istaagayo kheyraadka la siiyo hanaanka geedi-socodka wada dejinta dadka. Amni waara ayaa muhiim u ah in sare loogu qaado deegaannada aan rasmiga aheyn oo laga dhigo xaafado, fududeynta deegaanada iyo dib-u-dejinga goobaha aan la deganeyn iyo baab'inayo derbiyada u dhaxeeyo deegaannada aan rasmiga aheyn iyo xaafadaha (si loo tir-tiro hanaanka xeryaha). Si loo xaqiijiyo macquul ahaanshaha soo guri-noqoshada waqti badan, waxaa muhiim ah helista adeegyada iyo maalgashiga kaabe-yaasha dhaqaalaha ee miyiga iyo magaalooyinka kumeel-gaarka ah. Horumarinta magalooyinka kumeel-gaarka ah ayaa noqonayo meelo ay degaan dadka barakacayaasha marka ay yimaadan abaaraha, kuwaas oo u saamaxayo shaqsiyaadka in ay u dhowaadan goobahooda loona yareeyo ciriiri ku yimaado magaalooyinka waaweyn.

## S01 AHMIYADAHA

Si loogu guuleyso natiijada 1aad ee ku saabsan:

**i. In Si Siman Loo Helo Adeegyada Aas-aasiga Ah:**

- Abuurista iyo ballaarinta hababka lagu horumarinayo bulshada ee loo yaqaano (SDMs) ee degmooyinka/deegaannada ay ku noolyihiin dadka barakaca saameeyay ee badan si sare loogu qaado karaankooda awood bixinta.
- In la kordhiyo dakhliga laga aruuriyo dowladaha hoose si loo kordhiyo adeegyada la bixyo.
- In la tijaabiyo hal-abuur iyo hanaanka kororka si loo hagaajiyo adeegyada la siiyo dadka uu saameeyay barakaca iyada oo la deegsanayo hanaanka iskaashiga dowladda iyo ganacsatada ee loo yaqaano (PPPs) meelaha aysan adeegyada dowladdu ka jirin.

**ii. Guryaha iyo Amniga Sugan:**

- In la hir-geliyo Hab-raaca Qaran ee ka saaridda dadka hoyga iyo Borotokoolka ku Meel-gaarka ah ee Qaybinta hoyga si loo xalliyo guri haysashada muddo fog iyo xeerarka si loo dhowro xuquuqda dadka gudaha dalka ku barakacay ee ka dhanka ah guri-ka bixinta khasabka ah.

- Bilaabista sameynta Siyaasadda Qaran ee Guryaha ee Soomaaliya iyada oo ay hoggaamineyso Wasaaradda Howlaha Guud, Guriyeynta iyo Dib-u-Dhiska (MoPWHR). Tani waxa ay xoogga saareysa in la xaqiijiyo bay'ad saamaxeyso in la dhiso guryo la awoodi karo, sida dhul in la siiyo, maalgelinta guryaha, horumarinta kaabe-yaasha dhaqaalaha, qalab dhismo oo jaban, heer wanaagsan oo dhismaha ah iyo kaalimaha ay kala qaadanayaan dowladda iyo ganacsatada.

- In la horumariyo lana dhaqan geliyo xeerarka saameynta bulshada ee deegaanka ee ku xusan bixinta guryaha ee dadka ay saameysan barakaca.

- In la dhiso xog-keydiye oo heer kiisu sarreeyo si loo bixyo guryo la awoodo gudaha Soomaaliya iyo in loo diyaar xaaladaha caalamiga ah ee la xariira.

- In la tijaabiyo hal-abuurka iyo hanaanka kordhinta si iloo hagaajiyo amniga muddada ah ee ay helaan dadka ay saameeysay barakaca. Talaabada kowaad ayaa noqon doonta in lagu daro habkan istiraatiijiyadaha iyo casharada laga bartay si loogu isticmaalo hababka deegaanada, sharciga iyo hay'adaha kuwaas oo ku howlan in ay siiyaan dadka amni joogto ah. Tani waxa ay sidoo kale u baahantahay in casharada laga bartay tijaabada hanaanka deegaanada la'isku xiray loo isticmaalo maamul-goboleedyada inooda kale.

- In lagu dhirigeliyo maamul goboleedyadu in ay deegaanadooda ka fuliyaan go'aankii April 2020 ee ku saabsanaa hakinta guri-ka bixinta khasabka ah iyada oo la milicsanayo casharadii wax-tarka lahaa ee laga bartay fulinta go'aanka hakinta ee ay maamulka degmada Baydhabo ku guuleysteen taas oo lagu soo saaray awaamirta rasmiga ah wadatayna diginin tallaabo sharci ciddi ku xad gudubto.

**iii. Maamulka iyo Maareynta Dhulka:**

- In la billaabo geedi-socod lagu horumarinayo siyaasadda qaran ee dhulka oo la jaan-qaadi karta wadciga maanta. Tallaabada kowad waxa ay noqon kartaa in qiimeyn guud lagu sameeyo istiraatiijiyadaha heer maamul-goboleed, khibradaha, talabooyinka tijaabda ah ee maareynta dhulka deegaanka ku haboon. Siyaasaddani waxa ay hiigsan kartaa in la tilmaamo maamulka dhulka, hanaanka maareynta dhulka, oo ay ka midka tahay maamulka dhulka dowladda, kaalimaha hay'adaha iyo mas'uuliyadahooda ee heer walba, dhulka iyo diiwaan gelinta hantida, hanaanka qiimeynta dhulka, maalgelinta ku saleysan dhulka iyo hanti iyo sidoo kale hanaanka dakhliyada. Tani waxa ay ka qeb qaadan doontaa in la xaqiijiyo qorshaha dib-u-dejinta ee iminka loo sameynayo dadka ay saameysay barakaca laguna xirayo qorshaha horumarinta magaalooyinka iyo adeeg bixinta. In la diyaariyo liiska dhulka dowladda iyo milkiileyaasha hantida si ay u siiyaan dadka deegaan iskood u degaan, nabad ah isla markaaasna saamaxaya dib-u-dejin sharafi ku dheehantahay.

- In la tijaabiyo hanaan iyo hay'ado dhaxalgal ah oo ku aadan hindisaha qiimo wadaagga (dhul badalka ama kala wareegsashada) iyo iskaashiga dowladda iyo ganacsatada ee ku aadan guryaha.

- In la horumaryo hanaan de-dejinaya ogolaanshaha dhul siinta ee mashariicda looga gol-leeyahy in lagu taageero guri-degenaanshaha muddada fog ee dadka ay saameysay barakaca iyo in la habeeyo bixinta

waraaqaha dhul-lahaanshaha.

- In la la hadlo ganacsatada sidii ay u maalgashan lahayeen ama u hirgelin lahayeen qorshaha ballaarinta magalooyinka ee ay ku jiraan kuwa ay u badan yihiin barakacayaasha si looga faa'iideysto qiimaha dhulka lagu taageerayo xalka waara ee dadka ay saameysay barakaca lixaadka leh.

**iv. In la Abuuro Jawi Saamaxayo Gaarista Natiijada SO1:**

- In la ballaariyo isla markaasna wax laga badalo barnaamijka horumarinta bulshada ee loo yaqaanno Baxnaano iyo barnaamijyada kale ee ku saleeysan lacag-siinta bulshada laguna daro dadka guda dalka ku barakacay ee ku sugan magalooyinka iy qaxootiga soo guri-laabanayo oo ah kooxo muhiim ah oo mudnan leh.

- In la sameeyo qiimeyn qoto dheer oo ku aadan sida dowladda u hoggaamiso maalgelinta dadaalada xalka waara loona ogaado sida loo maamulo dakhli aruurinta, canshuuraha, hanaanka maamulka hantida dadweynaha, iyo helista maalgelinta muddada dheer lagu soo celiyo.

- In la dhiso hanaan isku duwid u dhaxeeya hay'adaha oo shaqeynaya looguna tala galay hirgelinta siyaasadda bad-qabka bulshada oo ee hogaaminayso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) iyo in lagu soo biiriyo dowlad-goboleedyada, dowladaha hoose, hay'adaha UN-ka, bahda horumarinta, ururada dowliga ah iyo kuwa caalamiga ee aan dowliga aheyn iyo ururada bulshada rayidka ah.

- In la billaabo horumarinta diyaarinta maclumaadka dhulka dowladda, oo ay kamid tahay goobaha, xuduudaha dhulka, astaamaha iyo isticmaalka dhulka ay dowladdu leedahay..

# UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 2AAD

**In la kordhiyo la xisaabtanka maamulada ee ku aadan dadka ay saameeysay barakaca si loo xaqiijiyo ka qeyb-galkooda geedi-socodka nabadgelyada, qaran-dhiska iyada oo la dammaanad qaadayo, badqabkooda, amaanka iyo helitaanka aqoonsi sharci ah.**

## Natiijada 2aad

**In la kordhiyo ka qeyb gelinta dadka uu saameeyay barakaca qorsheynta geedi-socodka iyo howlaha kale ee socda si loo dammaanad qaado ka qeyb galkooda arrimaha siyaasadda iyo bulshada oo ay ka midka tahay helista waraaqaha aqoonsiga**

## Sababta

Ka qeyb qeyb-galka siyaasdda iyo arrimaha guud waa xuquuq muhiim u ah dhiirigelinta nidaam dimoqoraadi ah, sarreynta sharaciga, ka qeyb-galka bulshada, horumar dhaqaale iyo taabo-gelinta xuuqul insaanka kuwaas oo muhiim u ah joogteynta xalka waara ee Soomaaliya. Xuquuda looga qeyb qaadanayo siyaasadda iyo arrimaha guud ee bulshada si toos ah iyo si dadban ba waxa ay muhiim u tahay awood siinta s shakhsiyaadka iyo kooxaha waana arrin udub-dhexaad u ah hanaanka ku dhisan xuuquuda loola jeedo in lagu cirib tiro sooca iyo takoorka.

Qodobka 9aad ee Heshiiska Kampala tusaale ahaan, waxa uu aqoonsanaya waajibaadka heer dowlad-goboleed in la xaqiijiyo in dadka gudaha ku barakacay helaan xuquuqdooda madaniga ah, kuwa siyaasadda, gaar ahaan ka qeyb-qaadashada arrimaha bulshada, xuuuqda codeynta ama loo dooran karo xafiis dowladeed. Xuquuxda ka qeyb galka ayaa si aan kala reeb laheyn loola xiriiriyaa xuuqda aadanaha sida xuquuxda isu-soo baxa ee nabdoon, ka qeyb ahaansho urur, xornimo u hadalka, iyo fekerka iyo xuquuqda warbarashada iyo in la helo macluumaadka khuseeya shacabka kuwaas oo ah muhiim si loo gaaro xal waara oo la joogteyn karo gudaha Soomaaliya. Kala go'a uu sababay dagaalka sokeeye ee Soomaaliya 20 kii sano ee tagtay waxaa ka mid ah in ay soo baxeen awoodo aan rasmi aheyn kuwaas oo lagu xaliyo amniga laguna gaarsiiyo adeegyada goobaha ay dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah ku guul darreysteen in ay gaaraan.

> "Abudwak amniga, siyaasadda, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada waa ay ka duwantahay deegaanada kale. Tusaale ahaan, amniga ayaa ah mid caadi ah in casta oo mararka

qaar dhacaan colaado qabiil. Kama qeyb galno Siyaasadda sababtoo ah majirto cid nagu tixgeliso xuquuqdeena siyaasadeed, dhaqale iyo mid bulshaba."

—GURI-NOQDE ABUDWAK- GALGADUUD

Dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa weli kusii qul-qulayo deegaano ay ka taliyaan dad gaar ah oo loo yaqaan "Irrid-Gudbane"[76]. Sahan ku saabsan dadka gudaha dalka ku barakacay iyo sida ay qeyb uga mid noqon karaan geedi-socodka nabada iyo qaran-dhiska[77] oo dhawaanahan la sameeyay ayaa sheegaya in dadka gudaha dalka ku barakay ee la wareystay aaney helin xuquuqdooda ka qeyb galka arrimaha bulshada, iyo in aaney la macaamilin maamulada iyo hogaamiye yaasha bulshada deegaanka kaas oo lagu sheegay sahanka in uu hooseeyo. Codka dadka sahanka ka qeyb qaata ee gudaha dalka ku barakacay ayaa lagu caburiyaa hanaanka maamulka (iyo xakameyn) ay sameynayaan dad aan la dooran sida "Irrid-Gudbane" iyaga oo sidoo kale ay dayaceen ama aan si mudan aysan u eegin maamulada.

Maadama ay si weyn u kala duwan yihiin hab-dhaqanka "Irrid-Gudbane" waxaa adag in la qiimeeyo in lala macaamili karo iyo sida loola macaamili karo. Daraasad tijaabo[78] gaar ah oo lagu sameeyay "Irrid-Gudbane" oo loo tigelinayo in ay yihiin horjogeyaal lala macaamili karo ayaa sheegeysa in ay Irrid-Gudbane-yaashu isku badalaan qaab loo la xisaabtami karo kadib marka in jeer ah lala macaamilo.

In kasta oo ah Irrid-Gudbane yaashu rabaan in ku bedeshaan awooddooda in aqoonsiga lagula dhaqmo, hadana la macaamilkooda rasmiga ah waa kala duwan yahay. Intaa waxa dheer, in codka dadka gudaha dalka ku barakacay uu ka maqan yahay dadaalada nabadda iyo dib-u-heshiisiinta heerarkooda kala duwan, in kasta oo ay iyagu yihin dhibbaneyaasha ugu daran ee colaadda, iyo natiijo walba oo ka dhalata oo saameyn lixaadleh ku leh noloshooda. Dadka uu saameeyo barakaca ayaa inta badan dibadda laga istaajiyaa hanaanka saami qeybsiga siyaasadda iyo awoodda[79]. Tixgelita caqabadaha haysta ka qeyb qaadashada dumarka iyo dhalinyarada iyo tallaabooyinka macquulka ah ee sare loogu qaadayo ka qeyb galkooda ayaa ah ahmiyad weyn oo ku xusan istiraatiijiyadda NDSS[80].

Marka laga hadlayo aqoonsiga, Soomaliya iminka malahan diiwaan gelin dadweyne ama karaka aqoonsiga sidoo kalana waxaa xaddidan ama liita shaqeynta diiwaan gelinta madaniga ah. Maadama aysan jirin nidaamka diiwangelinta dadweynaha. Marka loo eego maqnaashaha nidaam aas-aasi ah oo shaqeynaya, isku darka nidaamyo aqoonsi kala duwan ayaa noqda kuwa loo isticmaalo caddeynta dadka Soomaaliya[81]. Tusaale waxaa kamid ah diiwaanka dadka ay arrimaha bulshda ka taageerto QM, sida kan hay'adda cuntada adduunka (WFP), agoonsiga askarta ciidamada qaranka ee la siiyo lacagaha ee loo marin nidaamka hay'adda QM ee UNOPS, diiwaangelinada dowladaha hoose sida kuwa Gobolka Banaadir, iyo kaararka aqoonsiga Puntland, kaararka aqoonsiga ee lasoo baxo baasaboorka, iyo diiwaanka madaniga ah ee hay'adda UNICEF ee Somaliland[82].

Si kastaba ha noqote, tirada diiwaanada oo yar, inta badan diiwaanadu waxa ay wataan caqabaado sida aamin darro ay ka qabaan muwaadiniinta in ay bixiyaan xogtooda shaqsiga ah sababo la xiriira jiritaan la'aanta nidaam xaqiijinayo xuquuqda dhowrista xogta iyo maclumaadka gaarka ah, qiimaha sameynta kaararka aqoonsiga oo aad qaali u ah kana baxsan karaanka dadweynaha, maamul wanaag maaliyadeed hufan oo liita iyo wadashaqeyn la'aan iyo mugdi badan oo ka jiro milkiyadda xogta[83].

Hanaan diiwaangelin dadweyne lagu kalsoon yahay hadana dadka oo dhan ay heli karaan ayaan noqon karo aalad awood badan oo loo adeegsan karo horumarinta, amba dar dar gelinta horumarinta dhinacyo badan, sida awood siinta dumarka, sinnaanta jinsiga, helista lacagaha, iyo caafimaadka. "Aqoonsiga sharciga ah oo ay helaan dhamaan dadka oo dhan, oo ay kamidka tahay diiwaan gelinta dhalashada" ayaa ah hiigsiga 169aad ee Yoolka Horumarka Waara (SDGs) iyo hanaanka karaka aqoonsiga iyo diiwaan gelinta madaniga ah ayaa loo arkaa kuwo muhiim u ah gaarista mabad'iida SDGs ka ee "Qofna yaan laga tagin"

— Daraasadda Bangiga Adduunka ee ID4D-Findex

Sida ay xustay daraasadda ID4D-Findex, dumarka ayaa isku-cel celis ahaan ugu liita marka ay timaado caddeymaha waraaqaha aqoonsiga ee rasmiga ah. Waxaa intaa sii dheer, qaxootiga, dadka aan qaran laheyn, dadka gudaha dalka ku barakacay, qaxootiga soo guri-laabanayo, dadka naafada ah iyo dadka ku dhaqan miyiga ama goobaha cidlada ah ayaa inta badan wajaha caqabadaha helista waraaqaha aqoonsiga rasmiga ah[84].

Soomaaliya waxa ay leedahay heerka ugu hooseeya ee diiwaan gelinta dhalashada caruurta ka yar 5ta sano[85] marka loo eego waddamada ka hooseeyo Saxaraha Africa, oo ah qiyastii boqolkiiba 3. Soomaalidu waxa ay adeegsadaan nidaam hadal ku saleysan oo ay inta badan isku gartaan, taas oo hoos u dhigeyso ka doonashada waraaqaha aqoonsiga rasmiga ah dowladaha hoose ama gobollada. Maqnaanshaha nidaam hufan oo aqoonsi ah waxa uu saameyn ku leeyahay bixinta adeegyada, ka qeyb galka doorashda, ama xog aruurinta, kuwaas oo lagama maarman u ah gaarista xalka waara ee la joogteyn karo. Intaa waxaa dheer, in ay abuureyso khataraha la xiriiro dowlad la'aanta taas oo ka dhalaneyso gaabiska ka jiro shuruucda muwaadinka ee maxaliga ah, gaar ahaan kari la'aanta ay wajahayaan dumarka Soomaaliyeed sidii ay ugu xaqiijin lahayeen caruurtooda dhalashda iyo caqabadaha kale ee la xiriira helista dukumiintiyada heerarka madaniga ah[86].

Sanadkii 2016, hay'adda NCRI ayaa soo jeedisay in la isticmaalo hanaanka diiwaangelinta dadka ee casriga ah taas oo loo adeegsanayo diiwaangelinta qaxootiga soo guri-laabanayo, dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga[87]. Wejiga kowaad ee hirgelinta hanaankani waxa uu diiradda saarayay in lagu diiwaan geliyo illaa 30,000 oo qaxootiga Yaman ka yimid[88]. Hanaankani waxa uu leeyahay baaxad lagu

Codka dadka sahanka ka qeyb qaata ee gudaha dalka ku barakacay ayaa lagu caburiyaa hanaanka maamulka (iyo xakameyn) ay sameynayaan dad aan la dooran sida "Irrid-Gudbane" iyaga oo sidoo kale ay dayaceen ama aan si mudan aysan u eegin maamulada.

diiwaan gelin karo malayiin dadka gudaha dalka ku barakaco ah; hasa yeeshe, tani waxa ay u baahneyd maalgelin joogto ah iyo taageero sare loogu qaadayo karaanka hay'adda. Dhowanahan, Juun 2020, Ra'isul Wasaaraha Soomaaliya ayaa magacaabay Agaasimaha Guud ee Hay'adda Diiwaangelinta Qaranka, taas oo la filayo in ay hoggaamiso dadaallada diiwaan gelinta dadka Soomaaliyeed iyada oo u heli doonta xog-keydin cusub oo loo isticmaalo shacabka[89].

## SO2 AHMIYADAHA

In lagu guuleeysto natiijada 2aad ee:

**i. Sare u Qaadista ka Qeyb-galka iyo Isla xisaabtanka Dadka ay Saameeysay Barakaca:**

- In la de-dejiyo hirgelinta sharciga IDP ga ee soo socda (oo hadda la qorayo) si loo xaqiijiyo in dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga soo guri-laabanayo loo dammaanad qaado xuquuqda ka qeyb qaadashada siyaasadda, xornimo u hadalka, fekerka, muujinta, ka qeyb noqoshada iyo si nabad in la'iskugu soo bixi karo.

- In la dhiso hanaan madax-bannaan oo ay hoggaamineyso dowladda laguna heli karo jawaabaha cabashooyinka deeggaanada iyo xeryaha dadka gudaha dalka ku barakacay si loo soo weriyo xadgudubyada ka dhanka ah shariga. Hanaankani waxa uu xaqiijinaya (1) in dhibbaneyaashu si nabad ah u gudbin karaan xad-gudubyada; (2) in la daba galo lana keydiyo xad-gudubyada askarta; (3) in loo diro dhibbaneyaasha goobaha adeegyada ay u baahanyihiin iyo (4) in loo diro dadka geysta xad-gudubyada laamaha baarista ku habboon.

- In la naqshadeeyo olole iyo maclumaad siin dadweyne iskugu jiro oo tijaabo ah, loona naqshadeeyo in lagu wacyi geliyo kaalinta booliska, xuquuqda sharciga, sida loo issticmaalo loona helo maxkamadaha, hanaanka cabasho dhigga. Tusaale ahaan, wadiiqada ku habboon ayaa noqon karta in la isticmaalo raadiyaha, fagaareyaasha bulshada, masaajidda iyo iskuullada.

- In la tijaabiyo hanaan talabooyin ay hor-kacayaan bulshada si lo gaarsiiyo amniga deegaannada aan rasmiga aheyn ee la bar-tilmaameedsanayo sida adeegga hab-booliska ku dhisaan bulshada, ilaalinta bulshada. Tani waxa ay dhiirigelineysaa kalsooni iyo wadashaqeyn muuqata oo dhex marta dadweynaha iyo laamaha amniga.

- In la isku geeyo lacago lagu maalgelyo taba-barro la siinayo ciidamada iyo gaar ahaan booliska si ay u fahmaan arrimaha dhowrista xuuqda aadka muhiimka u ah. Waa in sidoo kale taba-barrada ku jiran nidaamka habka gudbinta iyo xirfadleyda caafimaadka. Waa in sidoo kale damarka askarta ah, oo u xil-saaran dhowrista deegaannada barakacayaasha, lagu tabo-baraa sida looga hor-tago loogana fal-celiyo xadgudub yada la xiriira jinsiga ee loo yaqaan (SGBV).

**ii. In la Siiyo Dadka uu Saameeyay Barakaca Kaarka Aqoonsiga:**

- In la xoojiyo Mashruuca aqoonsiga dhijitaal oo casriga ah ee ay taageerto Bangiga Adduunka si loo hubiyo in dadka nugul sida barakacayaasha iyo qaxootiga soo guri-laabanayo (oo labaduba muwadiniin ah) la siiyo mudnaanta kowaad.

- In la helo xog iyo macluumaad barakaca ee dowlada leedahay.

- In la adkeeyo wada shaqeynta wasaaradaha iyo isku xirka hay''adda diiwaan gelinta dadweynaya, oo la filayo in ay hoggaamiso nidaamka diiwaan gelinta dadka Soomaliyeed oo u baahan in ay dhisto xog-keydiya diiwaanka dadweynaha.

- In la sameeyo qiimeeyn baaxad leh oo ku saabsan qiimaha, noocyada maalgalinta, iyo qorshayaasha hirgelinta si loo dhiso nidaam ganacsi oo la joogteyn karo si sare loogu qaado nidaamka diiwaan gelinta faraha ee hay'adda NCRI.

- In la iskugu dubba-rido taageerada deeq-bixiye yaasha si mideysan iyada oo laga faa'iideysano kheyraadka lagana hor-tagayo in isbar-bar yaac ku yimaado nidaamka diiwaan gelinta dadweynaha..

**iii. In La Abuuro Jawi Saamaxayo Gaarista Natiijada SO2:**

- Iyada oo ay hoggaamineyso Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta (MoIFAR), waa in la horumariyo siyaasadda wada noolaanshaha bulshada isla-degga taas oo dhiirigelineysa isla-deg waara oo ay wada degaan dadka ay saameysay barakaca.

- In la dhiirigeliyo wada xaajood dhex marah maamulada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga aheyn si ay iskula wada degaan isna kaabaan.

- In la sahmiyo dadaallo iyo iskaashi dhex mara hoggaanka dhaqanka iyo kan diinta si loo horumariyo isla xisaabtan kor ka yimaad oo ku wajahan bulshadooda, gaar ahaan goobaha barakaca iyo in sidoo kale loo adeegsado saameyntooda lagu xadaadiyo Irrid-Gudbane yaasha in ay bedelaan dabeecadahooda iyo hab-dhaqankooda hadda.

- In la qabto wada-hadal labo geesoon ah oo muddeysan loona qabto dadka uu saameeyay barakaca ee dalka ku sugan si loogu sahlo in si furan ula hadlaan dowladda iyo fal-celinteeda ku aaddan arrimaha barakaca si loo hagaajiyo fekerka dadweynaha iyo kalsoonida ay ku qabaan maamulada madaniga ah. Tani waxaa loo sameyn karaa iyada oo la adeegsanayo barnaamijyada laga wada qeyb galo ee raadiyaha si loo hagaajiyo xiriirka iyo wada hadalka laba geesoodka ah, oo ay ku jirto baraarujinta ku aadan adeegyada dowlaadu bixiso iyo howlaha lagu taageerayo bulshada ay saameysay barakaca.

# UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 3AAD

**In la kordhiyo helista nolol la joogteyn karo iyo fursado shaqo oo ay helaan dadka uu saameysay barakaca iyada oo loo abuurayo jawi u saamaxayo in ay ku guuleystaan isku-filaansho**

## Natiijada

**25% oo ka mid ah 250,000 oo shaqo cusub ee la abuurayo 5ta sano ee soo socota waa in loo qoondeya dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga soo guri-laabanayo iyada oo loo abuurayo jawi u saamaaxya ganacsatada in ay kobac ka sameeyaan qeybbaha ganacsiga ee suurto galka ay tahay in ay ka faa'iidaan isla markaasna fursado shaqo u abuuraan dadka uu saameeyay barakaca muddada dhow, iyo tan dhexe**

## Sababta

In dib loogu soo celiyo magalooyinka iyo miyga Soomaaliya waxa ay muhiim u tahay dadaalada dhimista saboolnibda, nuglaanshaha iyo sooca. Beeraha ayaa boqolkiiba 60 ku tiirsan yahay dhaqaalaha Soomaaliya, boqolkiiba 80 shaqooyinka la abuura ayaa ku dhisan beeraha halka boqolkiiba 90 dhoofka Soomaaliya yahay wax soo saarka beeraha[90]. Waxaa la qiyaasa in boqolkiiba 46 shaqalaha Soomaalida ay ka shaqeeyaan beeraha[91]. Soomaaliya waxa ay si lixaadle ugu tiirsan tahay labo hab-nololeed oo kala ah xoolo dhaqatada iyo beeraleyda halka tiro yar oo ka mid ah bulshada degta webiyada ee koonfurta ay ku tiirsan yihiin beeraha[92]. Marka laga soo tago muhiimadda uu leeyahay majaalkan, hadana waxa uu wataa caqabadihiisa, gaar ahaan marka ay yimadaan abaaraha. Intaa waxa sii dheer in xoolo-dhaqatada iyo beeraleyda ku tiirsan roobabka ay wajahayaan khataro ku aadan nabaad guurka deegaanka iyo carrada iyada oo aaney jirin maamul deegaan wanaagsan.

Magalooyinka waxaa u badan shaqooyinka garab-raratada iyo howlaha shaqo ee aan arasmiga. Nolosha magaalda waxa ay ku tiirsan tahay suuqyada si ay u heelaan dadku adeegyada aas-aasiga ah waxaana sidoo kale saameeyo caqabadaha xilliyada gaarka ah. Sida ay xuseyso falanqeynta Bangiga Adduunka ee ku aadan guud ahaan dhaqaalaha Soomaaliya, dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga soo guri-labanayo ayaa u badan dadka qabta shaqooyinka hoose iyaga oo aanan aadin waxbarasho, marka la bar-bar dhigo dadka degan magalooyinka[93]. Qaxootiga ayaa hela xaddi aad u hooseeya marka la eegayo shaqo helista, iyada oo ay sabab u tahay sharciga ka xanibayo qaxootiga in ay saqeystaan. Intaas waxaa dheer, inta badan dadka barakacay ee lagu wareystay daraasad dhowaan laga sameeyay Muqdisho, Baydhabo, Dollow iyo Kismaayo ayaa sheegay in ay shaqo

la'aan ku dhacday taas oo ku khasabtay in ay beera tacbashada ka soo tagaan oo ay shaqaale hoose noqdaan[94]. Sidan ayaa laga dareemaya magalooyinka si ay dadku ula qabsadaan nolosheeda, in kasto oo ay leedahay dakhli shaqo oo aan la joogteyn Karin.

Hoos u dhac lixaadle oo ku yimid beeraleyda iyo xoolo dhaqatada oo ah ilaha dakhli iyo dhaqaalaha qoysaska ku nool yihiin ayaa ka muuqda Muqdisho, Baydhabo, Dollow, marka laga reebo Kismaayo. Barakaca ayaa sababay in labo-jibbaar kor u kaco shaqaalaha maalinlaha ah iyo shaqooyinka hoose kuwaas oo noqday ilaha dakhliga kowaad, marka laga reebo Kisamyo oo kororku caadi yahay. Sahankan ayaa sidoo kale sheegaya in barakacayasha iyo dadka marti geliyo intaba ay leeyihiin ilo dakhli oo la mid ah balse shaqo-isa-siintu ay ku baahsanthay bulshada martigelineysa qaxootiga. Deegaannada oo dhan marka laga reebo Dollow, bulshada martigelisa ayaa sheegtay in ganacsi ama shaqo-isa-siinta ay tahay isha kowaad ee dakhliga, taas oo muujin karta in ay macquul tahay in ay helaan ra'sul maal ay ganacsiyada billowga ah ay ku xoojistaan iyo fursado xoojin dhaqaale heer sare ah[95]. Intaas waxaa dheer, falanqeynta sahanka Bangiga Adduunka ayaa sheegeysa in dadka gudaha dalka ku barakacay ee asalkoodu yahay beeraley[96] kuna barakacay magalooyinka ay wajahayaan dhibaatooyin la xiriira sidii ay ula qabsan lahayeen suuqa shaqaaleysiinta iyo saboolnimo sare marka la bar-bar dhigo dadka gudaha ku barakacay ee aan kasoo jeedin beeraleydal[97]. Hanaanka nolosha miyiga ayaa u nugul khataraha waqtiyada cimilada kuwaas oo sii kordhayo tiro iyo darnaan intaba. Khatarahaas ayaa horseeda cunno yarida ay wataan waqtiyadaas wata khataraha saboolnimada. Saameynta gaajada ee 20 ki sano ee tagtay waxay ugu darneynd beeraleyda ku nool koonfurta Soomaaliya, kuwaas oo ah inta badan dadka gudaha ku barakacay[98]. Xoolo dhaqatada ayaa wajahayo nuglaansho ka duwan kuwan hore oo ay ka mid yihiin isbedelka cimilada, biyo iyo daaq yari, cuduka xoolaha, iyo dagaalada ka dhasho kheyraadka kuwaas oo ka wada qeyb qaato saboolnimada. Yaraanta dadka, isu socodka, iyo helista adeegyada iyada oo ay sababtu tahay colaadaha iyo la'aanta kaabe-yaal dhaqaale ayaa horseedo in ay koobnaadan adeegyada la siinayo adadka. Isla markaasna, majaalka waxbarashada Soomaaliya ayaa sii wajahayo caqabado farabadan iyada oo aan nidaamsaneyn. Ganacsatada ayaa sii xoogeysanaya iyaga oo aan haysan kormeer dowladeed iyo baahiyo loo qabo xirfadaha heerka sare ah. Burburka kaabey-yaasha waxbarashda intii lagu gudo jiray dagaalada sokeeye ayaa khasbay in si weyn loogu tiirsanaado waxbarasho aan rasmi aheyn iyo iskuullo khaas loo leeyahy iyada oo aaney dowladdu nidaamin ama kor-joogteyn badan ku laheyn amaba qorsheynin.

Somaliland iyo Puntland ayaa tijaabiyay manhajka Taba-barrada Barashada Farsamada iyo Xirfadaha Gacanta (TVET) iyada oo la raacayo hanaanka shahaadiga ah ee farsamda gacanta ee Somaliland ee la horumariyay 2011kii iyada oo ay taageereysay Midowga Yurub. Nidaamka shahaadiga ah ayaa dooneya in barnaamijyada

Hanaanka nolosha miyiga ayaa u nugul khataraha waqtiyada cimilada kuwaas oo sii kordhayo tiro iyo darnaan intaba. Khatarahaas ayaa horseeda cunno yarida ay wataan waqtiyadaas wata khataraha saboolnimada.

TVET ka iyo aqoonsiga dhameystirka waxbarasho ee looga baahan yahay suuqa shaqada iyo dhisidda hanaan loogaga hor-tagayo caadada ah in lasoo saaro arday uusan suuqa shaqada diyaar u aheyn isla markaasna aanan siineyn ardayda heerka karti iyo xirfad ee muhiimka u ah suuqa shaqada[99]. Maqnaanshaha nidaam isku eg oo la aas-aasay oo xalinayo baahiyaha suuqa shaqada ayaa ku khasbay barnaamijyada loogu tala galay tabo-barrada qurixnta iyo korontada kuwo muddo kooban ah lehna saameyn lixaadle[100]. Ardayda kasoo baxdo tabo-barrada muddada yar soconayo ayaa soo buux dhaafiyay suuqa shaqada halka qeybaha cuntada iyo kalluumeysiga ay wajahayaan xirfad farsamo yaraan sii socota[101].

Intaas waxaa dheer, dumar kooban ayaa loo tabo-bara in ay ka shaqeyaan qeybaha wax soo saarka leh ee dhaqaalaha Soomalaiya halka tabo-barrada intooda badan ay xoogga saaraan qurxinta iyo xisaabaadka. Dumarka iyo dhallinyarada ayaa wali sii wajahayo takoor iyo hor-joogsiyada dhaqan dhaqaale ee ku gudban in ay helaan shaqooyin iyo fursado nololeed iyaga oo boqolkiiba 76 iyo 61 u kala la' shaqo[102]. Dhaqaalah Soomaaliya ayaa guud ahaan ah mid aan nidaamsaneyn waxaana jiro caqabado sharci oo ku aadan horumarinta ganacsiga. Kaalinta ay qaadanayan ganacsatada iyo quba-joogta ee lagu baadi-goobayo xalka waara ayaa xad dhaaf a, si kastaba ha noqote. Marka laga soot ago cir-isku shareerka suuqa lacagaha telefoonada Soomaaliya, boqolkiiba 85 ka mid ah bulshada ayaa weli ka baxsan nidaamka bangiyada rasmiga ah, iyo helis la'aanta deymaha[103]. Isku filnaasho lama xiriiro oo kaliya diyaarsanaanta fursado nololeed balse waa karaanka in la joogteeyo isu socod iyo in sifo sharci ah loo shaqeysto[104].

Sanadkii 2019, *Wasaaradda Shaqada iyo* Arrimaha Bulshada (MoLSA) ayaa dhameystirtay siyaasadda qaran ee shaqleysiinta taas oo xoogga saartay seddex ahmiyadood sida: in la xoojiyo ganacsatada iyo in la dhiirigeliyo ganacsiyada yar-yar iyo kuwa dhexe (MSMEs); in la taageero qeybaha dhaqaalaha ee wax soo saarka leh si loo abuuro shaqooyin badan; iyo in la xoojiyo maamulka suuqa shaqada. Siyaasaddan ayaa si waafi ah uga hadleeyso dhamaan dhinacyada muhiimka ah sida in diiradda la saaro qeybaha nugul ee bulshada ka midka ah iyo ku darista dumarka, dallinyarada, dadka gudaha dalka ku barakacay, iyo naafada[105]. Saxiixidda heshiiska Kampala ee shaqada, qaab nololeedka iyo isku filnaanshaha iyo xeerkii IGAD ee la ansixiyay oo ka dambeeyay kuna saabsanaa Baratakoolka Dhaqdhaqaaq Xorta ah ee Febaraayo 2020 ayaa dhiirigelinayo isu-socodka shaqaalaha, fududeynta in la helo wadiiqooyin iskaabaya ee gudaha dalalka IGAD, iyo in xal loo helo barakaca dheeraaday iyada oo loo marayo taageerada dhaqaalaha bulshada.

## S03 AHMIYADAHA

In lagu guuleeysto natiijada 3aad ee:

**i. Nolosha Maagaalda:**

- In leys waafajiyo ajandaha guud horumarinta magalooyinka iyo ku darista dhaqaalaha ee dadka ku barakacsan magalooyinka iyo daafahooda, gaar ahaan kuwa la xiriira dumarka iyo dhallinyarada.

- In la hirgeliyo Barnaamij Qaran ee Shaqo Carbin, iyada oo loo qoondeynayo qeyb gaar ah dhallinyarada jaamacadaha ka baxay ee ka midka ah dadka barakacu saameeyay (oo ay ma mid tahay tabo-barrada ardada ee farsamda gacanta loo yaqaan TVET).

- In la isticmaalo sahan dalka oo dhan ah oo ku saabsan cududda shaqaalaha si loo helo inta boqolkiiba dhallinyaro ah (qaxooti ama qaxootiga soo guri-laabanayo ama dadka gudaha dalka ku barakacay) iyada oo la xaqiijinayo suuq-shaqo oo tix gelinayo shahaadada TVET ka iyo dibloomaha iyo in ay ku jiraan kuwa helay shaqooyin fiican.

- In laga ololeeyo gudaha dalka iyo qurba-joogta si ay u maalgeliyaan wadiiqooyinka

hal-abuurka maalgashiga ah oo ay ka midka tahay in la helo hanaan deyn-qaadasho oo xoogga saareysa ganacsiyada yar-yar iyo kuwa dhex ee loo yaqaanno MSMEs, iskaashatada iyo tallabooyinka la xiriira ganacsiga heerka bulshada ah.

- In la helo lacago lagu ballaariyo fursadaha mushaar shaqaale loogu abuurayo dadka uu saameeyay barakaca iyada oo la marayo barnaamijyada howlaha guud kuwaas oo xamili kara shaqaalaha cusub ee kusoo qulqulaya suuqyada shaqaalaha ee magalooyinka. Hanaanka isku darsan karo xirfadaha horumarinta garaadka iyo jirka lehna tabo-barro farsamo iyo lacag iinta ayaa ka cawini kara in ay xaliyaan mashaakilka maskaxeed sida isla hadalka iyo niyad jabka ee ka soo gaaray dadka uu saameeyay barakaca ee shaqo doonka ah.

- In la helo tallaabo sax ah oo sare loogu qaadayo saameynta ganacsatada maalgashanayo majaalkan iyo in ay la fadhiistaan dadka uu saameeyay barakaca si la iskula arko fursadaha guulaha hanaankaasna meelo kale laga fuliyo.

- In si sax ah loo cabbiro saameynta maalgashi ee ganacsatada ku howlan dadka uu saameeyay barakaa si loo ogaado in dadaladaas goobaha kale looga faa'iideysan kariy iyo in kale. Tani waxa ay sidoo kale horseedi karta in la dejiyo madal iyo barnaamijyo lagu dhiirigelinayo in ay shirkado kale ka eyb qaatan dadaallada loona xoojiyo ka qeyb qaadasho lixaadle oo ay sameyaan ganacsatada.

- Ila la fududeeyo fagaarayaal xilliyeeysan oo loo qabanayo ganacsatada si loo dhiso hanaan lagu wada xaajoon karo loona horumarin karo fahanka guud ee ku aadan xalka waar, danaha la wadaago, khataraha iyo joogteynta.

- In la taageero falanqeynta waddamo-wadaag ah ee fursadaha suuqyada oo ay ku jiraan fursadaha suuqyada shaqada iyo nidaam waddamo-wadaag ah iskuna xirayo mashariicda waxbarasho, nololeed iyo tabo-barrada TVET..

**ii. Heerka Nolosha Reer Miyiga:**

- In la dhiirigeliyo ganacsatada in ay maalgashtaan ganacsiyada la xiriira kallumeysiga, xananeynta xoolaha, caanaha, khudarta cagaaran iyo soo saarka khudaarta kale, oo ay kamidka yihiin goobaha ka horreeya magalooyinka iyo warshadeynta kuwaas oo u abuurayo dadka uu saameeyay barakca shaqooyin badan.

- In la tixgeliyo isku qabashada hanaanka taxaha qiimeynta iyo horumarinta dhaqaalaha gudaha oo ay taageereyso caddeymo dhab ah iyo falanqeyn, iyada oo taxaha la dooranayo uu noqdo kan ugu rajada fiican dhanka kobaca si istratiiji ah loogu taageero goobaha mudan kuwaas oo ay ku jiraan ganacsatada dalka, hay'adaha dowladda, bulshada rayidka ah iyo in lagu hero helista tamarta la cusboneysiin karo.

- In la khariidadeeyo oo lagu ogaanayo dhamaan howlaha jira ee loola jeedi siii lagu hagaajin lahaa maareynta kheyraadka dabiiciga ah si loo abaabulo kheyraad lagu maalgelinayo howlaha kale.

- In la dhiso nidaam isku xirayo barnaamijyada adkeysiga ee soconayo dhowrka sano ee xoogga saaraya taxaha qybta dhaqalaha ee waxsoo saarka leh, kala duwista heer nololeedka iyo ilaalinta hantida, maareynta khataraha musiibooyinka, iyo in la hagaajiyo maamulada heer bulsho

**iii. In La Abuuro Jawi Saamaxayo Gaarista Natiijada SO3:**

- In la isku duwo kheyraadka si loo abuuro nidaamka qaran ee maclumaadka suuqa shaqada si loo wanaajiyo qorshaha loona

maareyo suuqa shaqada iyo shaqo abuurka qeybaha dhaqaalaha kuna saleysan tayda shaqada, warbixinada shaqada oo turxaan baxsan, muddeysan isla markaasna lagu kalsoonaan karo iyo xog, falanqeyn iyo tebin sax ah ku dheehan tahay.

- In la diyaariyo daraasad muddo dheer soconeysa oo ku aadan suuqa shaqada oo abbaareysa dadka uu saameeyay barakca si loo ogaado xogaha rasmiga ah ee ku aadan heerka nolosha iyo isbedellada shaqaaleysiinta.

- In ahmiyad la siiyo kaabeyaasha TVET ka ee taxan, muddo dheer soconayo isla markaasna qorsheysan iyo horumarinta karaanka, gaar ahaan xarmaha ee barakacayaasha. In loo ola-oleeyo dhismaha 7da xarumaha qaran ee TVET ka loo qorsheeyay oo si istratiiji ah u bar tilmaameed sanayo xarumaha barakaca

- In la'is waafajiyo hirgelinta siyaasadda qara ee shaqaaleysiinta iyo ajandaha xalka waara si loo dhiirgeliyo shaqo abuur la joogteyn karo iyo shaqo wanaagsan, dhowrista bulshada, ka qeyb qaadashada bulshada iyo sahlista in loo gudbo dhaqaale waara ku saleysan deegaan iyo helista adeegyada loogu tala galay dadka uu saameeyay barakaca

- In lagala tashto wasaaradda heerka uu marayo horumarinta siyaasadda MSME iyo in la isla fahmo fursadaha loo baahanyahay si wada shaqeynta loo horumariyo iyo in la guubaabiyo baacsiga howlaha khuseeya dadka uu saameeyay barakaca ee lagu xusay siyaasadda.

- In la taagero ololeynta ururada dumarka uu saameeyay barakaca si loogu daro mabad'iida la'isla qaatay ee xeerka dumarka Soomaaliyeed si loogu daro dastuurka cusub, gaar ahaan kuwa khuseeya adeegyada maaliyadeed iyo tiknoolojiyad ay helaan dumarka.

# UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 4AAD

**Si loo kordhiyo sidii ay ku heli lahayeen dadka uu saameeyay barakaca garsoor iyo sarreyn sharci iyada oo la xoojinayo hanaanka rasmiga ah iyo kan aan rasmiga aheyn ee garsooska.**

## Natiijada

**In si wax ku ool ah ay u helaan dadka uu saameeyay barakaca hanaanka caddaaladda dhaqanka, tan rasmiga ah iyo midda u dhaxeysa ee kala guurka ah, gaar ahaan marka ay timaado guri-kicinta khasabka ah, soo celinta xuquuqda (guryaha, dhurlka iyo hantida), rabshadaha la xiriira galmada jinisga iyo noocyada kale ee tacadiyada.**

## Sababta

La'aanta nidaam garsoor ku dhisan sinnan iyo caddaalad ayaa ah mushkiladaha Soomaaliya cussub haysta kan ugu daran eek u gudban sidii ay ku gaari laheyd degnaansho iyo dib-u-dhis. Dib-u-dhiska garsoorka rasmiga ah ee Soomaaliya ayaa weli wajahayo caqabado kal duwan isla markaana u baahan geedi-socod muddo dheer ah. In kabadan 20 sano, wadanku waxa uu la'yahay hay'ado garsoor shi dhab ah uga shaqeeya dalka. Sida guud, dadka uu saameeyay barakaca ayaa helo caddaalad, hasa yeeshe, ma'awoodaan in ay aadan maxkamadaha sababo la xiriira kharashka maxkamadaha oo badan. Waxaa sidoo kale jiro kalsooni darro baahsan oo ku aadan helista hanaan garsoor rasmi ah kaas oo horseedda inta badan ku tiirsanaanta nidaamka dhaqanka iyo garsoorka aan rasmiga aheyn. Waxaa jiro mashariic ay wada fulinayaan hay'adaha QM iyo NGO-yo kuwaas oo xalinayo arrimaha la xiriira garsoorka iyada oo la kordhinayo sarreynta sharciga ee heerarka hoose iyo in la ballariyo hanaanka garsoorka goobaha barakacayaasha. Arrinta khuseysa kaalmada sharciga, sanadkii 2016 Wasaaradda Caddaaladda ayaa hoggaamisay nidaam lagu horumarinayo siyaasadda qaran ee kaalmada sharciga. Siyaasadda ayaa ujeedkeedu yahay sidii loo xaqiijin lahaa adeegyada garsoorka oo ay helaan dadka oo dhan, gaar ahaan dadka saboolka ah, dumarka iyo dadka nugul. Siyaasaddu wax ay nidaamineysa bixiye yaasha kaalmada sharciga iyada oo bxineyso hab-raacyo cad-cad iyo hanaanka bixinta adeegyada. Isla markaasna, waxaa weli jiro kala go'naan u dhaxeeysa dadka uu saameeyay barakaca iyo isticmaalka nidaamka hay'adaha sharciga ah ee garooska. Tusaale ahaan, hanaanka garsoorka ku saleysan dhaqanka oo ah mid ay si weyn u isticmaalan dadka barakacay ayaa sii kordhin karta nuglaanshahooda iyo saameynta gar-qaadista ee la xiriirta qabaa'ilka deggan

bannaanka xerada qaxootiga. Caqabadaha la xiriira helista hanaan garsoor rasmi ah ayaa weli ah kuwo baahsan. Inta badan xeryaha dadka gudaha dalka ku barakacay iyo deegaannada kale, hanaanka xallinta khilaafaadka ay isticmaalan ayaa kala duwan iyada oo la eegayo nooca khilaafka. Khilaafyada yar-yar waxa xalliyo nabaddonnada, iyaga oo kaashanaya maamulka xeryaha ama deegaannada, ama guddiyada nabadeynta. Khilaafyada waweyn waxa loo diraa maxkamadaha degmooyinka.

Daraasad ay sameysan Xafiiska Xallinta Khilafaadka ku Saleysan Dhaqanka (TDR) ee Wasaaradda Caddaaladda[106] ayaa qireysan ahmiyadda nidaamka xeerka uu leeyahy marka ay timaado bixinta caddalada iyo axllinta khilafaadka bulshada Soomaaliyeed. Xeerka ayaa loo aqoonsan yahay nidaamka anshaxa ee lagu xalliyo khilaafaadka, lagu ilaalyo nabadda qabaa'ilka iyo jifooyinka. Taariikhiyan iyo iminkaba, Xeerka ayaa ah nidaamka kowaad ee xalinta khilaafaadka, si kastaba ha noqote, in kasta oo si weyn loo aaminsan yahay hadana waxa la qirsanyahay in uu leeyahay gaabisyo iyo in ay jirto baahi loo qabo in lagu xoojiyo nidaamkan iyada oo la abuurayo siyaasado dhaxalgal ah. Dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa si baaxad weyn ugu tiirsan nidaamka xeerka, culimada, iyo guddiyada nabadeynta si loo xaliyo khilaafaadka marka la bar-bar dhigo bulshada martigeliso dadkan.

Hindiso Sharciyeedka Tacadiyada Jinsiga ee 2018 uma ogolaanayo kiisaska dambiyada, gaar ahaan kuwa la xiriira jinsiga (SGBV), in lagu xaliyo xeerka balse weli waa ay jiraan dhaqankan. Qaba'ilka la takooro ee ku nool xeryahay dadka gudaha dalka ku barakacay waxaa wakiil uga noqdo xallinta khilaafaadka nabaddoonada iyada oo gar-qaadista khilaafka ka dhaxeeya qabaa'il ka badan loo arko in uu yahay mid caddaalad ah. Dibadda xeryaha, si kastaba ha noqote, waxaa jira caqabado la xiriira gar-qaaddid caddaalad ah marka lala garramayo qabiil xooggan siyaasad ahaan iyo ciidan ahaan. Waxaa intaas dheer in xogta helista garsoorka ay weli tahay mid liidata. Xarumaha xalinta khilaafaadka rasmiga ah ayaa la dhisay iyada oo ay taageerayaan maamlada dowladaha hoose. Si kastaba ha ahaate, maclumaad badan oo ku saabsan saameynta xarumahaas iyo xog dheeraad ah oo ku saabsan aragtiydad dadweynaha ayaa weli loo baahan yahay.

## S04 AHMIYADAHA

In lagu guuleeysto natiijada 4aad ee:

**i. Xoojinta Helista Nidaam Garsoon oo Rasmi Ah:**

- In lagu xiro xalka waara nidaamka sharciyada si loo xoojiho xal u helista tacaddiyada la xiriira barakaca oo ay ku jiraan helista nidaam garsoor, soo celinta qaxootiga iyo siinta maclumaadka ku saabsan kiisaska tacadiyada. In la dhaqangeliyo sharciga qaxootiga dadka gudaha dalka ku barakacay ee la diyaarinayo ayaa horseedi doona ka wada hadalka sidii loo sii xoojin lahaa majaalka garsoorka, amniga iyo sarreynta sharciga ee ku aadan arrimaha barakacayaasha.

- In la horumariyo iskaashiga kulliyadaha sharciga ee jaamacaha Muqdisho iyo jaamacadaha kale si loo falanqeeyo loona fahmo tallaboohyinka sharci ee mudan in la qaado ama la qaaday si ay uga qeyb qaataan diyaarinta taageero la siiyo muqtaqbalka qaxootiga soo guri-laabanayo marka ay la degayaan dadka martigelinayo.

- In si dhow loola shaqeeyo JLOS si sare loogu qaado helista shacabka ee garsoorka iyo wacyigelinta ku aadan iyada oo la abuurayo maclumaadka horumarinayo isku-filnaanshaha shacabka ee wadamada iyo naqshadeeynta iyo hirgelinta xarumo casri ah oo bixinaya adeegga.

- In la abuuro fagaareyaal looga hadlayo amniga iyo caddaaladda oo ay ka qeyb qaadanayan dowladda, hay'adaha fulinayo mashariicda si looga wada hadlo isbedallada

guud ee amniga, caddaaladda iyo fagaaraha isku duwista xalka waara ee gudaha.

- In la xoojiyo iskaashiga JLOS ee ku aadan sidii loo dhisi lahaa xog ku dhisan xaqiiqada oo ku saabsan helista garsoorka iyada oo leysku xirayo caddeymaha iyo falanqeynta laga helay amniga, booliska iyo bahda xasilinta ee ka shaqeeya qorsheynta xalka waara..

**ii. In La Xoojiyo Helista Nidaam Garsoor ee aan Rasmiga Aheyn:**

- In la hagaajiyo sidii ay ku heli lahayeen dadka uu saameeyay barakaca nidaam caddaalad ah iyada oo loo marayo in la dhiirigleliyo qodobbada kaalmada adeegga sharciga, in sare loo qaado wacyigelinta shacabka ee ku aadan adeegga cadaaladda iyo nidaamka xallinta khilafaadka dadban oo loo yaqaano (ADR).

- In la xalliyo arrimaha ku teedsan guri-kicinta khasabka ah oo u baahan in laga wada xaajooda sarana loo qaado karaanka oday dhaqameedyada, gar-soorayaasha kuwaas oo adeegsada nidaamka garsoorka iyo xallinta khilafaadka ee ku dhisan dhaqanka kuwaa oo ka dhigayo kuwo haysta wacyi gelin ku aadan dadka nugul, xuquuqda iyo baahida dadka uu saameeyay barakaca ee ka tirsan bulshada.

- In hor-tabin loo sameeyo horumarinta nidaamka siyaasadaha sida: (1) in leysku xiro nidaamka xeerka iyo kan gobollada; (2) u hoggaansanaanta qodobbada xeerka isla markaasna ku jiro dastuurka kumeel gaarka ah ee soomalaiya iyo xeerarka xuquuqul insaanka kale ee caalamiga ah; (3) u sinnaanta xeerka; (4) dhowrista xuquuqda iyo bad-qabka caruurta; (5) sharciyadda dadka go'aanka ridaya (odayaasha) ee xeerka; (6) sinaanta qabaa'ilka marka ay timaado geedi-socodka xeerka iyo go'aanadiisaba; iyo arrimaha kale ee kala duwan.

- 

**iii. In La Xoojiyo Helista Xarumo iyo Nidaam Garsoor ku Dhisan Dhaqanka**

- In la sameeyo daraasad lagu baarayo wax-tarka nidaamka caddaaladda dhaqanka uu u leeyahay in lagu guuleysto dadaallada xalka waara iyada oo la abbaarayo qaabka ay tallaabooyinka garsoorka u taageeri karaan geedi-socodka is-dhex galka waara. Tani waxa ay ka dhigantahay in la baaro si dhameystiran iyo fulineydba xiriirka ka dhaxeeya garsoorka ku dhisan dhaqanka iyo howlaha xalka waara.

**iv. In La Abuuro Jawi Saamaxayo Gaarista Natiijada SO3:**

- In la sameeyo xog-aruurin madax bannaan si loo fahmo dabciga iyo baaxadda heerarka tacaddiyada ka dhaca bartamaha iyo koonfura Soomaaliya si falcelin wanaagsan looga geysto.

- In loo isticmaalo qorshe howleedyda bulshada (CAPs) sida kuwo aas-aasi u ah dadaalada dib-u-heshisiinta, gaar ahaan qeybaha muhiimka u ah dadka barakacay sida xuquuqda soo celinta guryaha, dhulka iyo hantida, garsoorka dhaqanka ku saleysan, ka dhowrista bulshda tacaddiyada sida SGBV iyo dowladnimo laga wada qeyb qaato.

- In la sameeyo qiimeyn qoto dheer oo ku aadan qiimaha, fursadha maalgelin, iyo hirgelinta qorshaha nidaam ganacsi waara taas oo tix-gelineysa ka dhigista helista adeegga garsoorka mid ay awoodaan dadka barakacay- gaar ahaan dumarka- kuwaas oo si baaxad weyn dhibaato uga soo faarto taxadiyada xuquuqahooda, tacadiyada ku saleysan jinsiga, iyo guri-rarista khasabka ah.

- In la turxaan bixiyo olole lagu baacsanayo dadka gudaha uu saameeyay badakacay si ay u helaan wacyigelin ku aaddan "aqoontooda sharciga" iyada oo la barayo xuquuqdooda sharci, waajibaadka, nidaamka hay'adaha garsoorka iyo in loo sheeho hanaanka ay

danahooda u isticmalai karaan oo ay ka midka tahay hanaanka dhex-dhexaadinta.

- In iskaasho dhow lagala yeesho Wasaaradda Caddaladda sidii casharada laga bartay hanaanka maamulka galalka la casriyeeyay ee Soomaaliland laga hirgeliyay oo ay macquulka tahay in lagu baahiyo dalka intiisa kale. Ujeedka hanaankani waxa ay aheyd in la tabo-galo heerka wax-qabadka waxa uuna kordhinaya isla xisaabtanka, dhisidda kalsoonida shacabka ee goleyaasha caddaaladda, iyo in sare loo qaado sarreynta shaciga. Hanaankani waxa auu u saamaxaya maxkamadaha in ay joogteyaan keydinta xogaha galalka la xiriira tacadiyada kala galo daka uu saameeyay barakaca, dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay.



# UJEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE 5AAD

**In waqti hore la maalgeliyo xalka waara si looga hortago barakaca ka dhasha fatahaadda.**

## Natiijada

**In la dhimo boqolkiiba 50 barakaca ka dhasha fatahaadda labada webi ee Shabelle iyo Jubba.**

5

## Sababta

Xilliyada qaldan ee ka dhasha isbeddelka cimilada ayaa horseeday abaarta iyo fatahaadaha Soomaaliya kuwaas oo noqday kuwo baaxad leh, isla markaasna aan la saadaalin karin. Sanadkii 2020 Fatahaadaha ka dhasha roobabka iyo kuwa webiyada ee waqti roobaadka ayaa sababay baakaca in kabadan 800,000 oo qof[107].

Fatahadihii 2018 iyo 2019 ayaa kala barakiciyay 281,000 iyo 416,000 oo qof, kuwaas oo sare u qaaday isbedelka tirada dadka barakacay sanad ka sanad walba. Xaaladaha deg-degga ah ee la xiriira cimilada ayaa dhaliyay saameyn muuqata oo gaarta bulshada. Tusaale ahaan magaalada Beledweyne ayaa ah halka ugu daran ee ay saameyntu gaartay halkaas oo ay 289,000 oo qof ku barakaceen[108] iyada oo ay magaalada ay qariyeen biyaha. Intaas waxaa dheer, in fatahaaddu ay dhaawacday kaabeyashii dhaqaalaha, hanti, beero, xoolo iyo in ay daahisay abuurkii, sarana u qaadday heerka nafaqo darrida iyo cudurka kaneecada ka dhasha biyaha markii ay sii noqonayeen biyaha. Xaaladda waxaa sii cakiraya baahida bini'aadminimo ee horay uga sii jirtay waddankan nugul[109].

Labo webi ayaa ka jirta Soomaaliya. Websiga Shabeelle ayaa dhex mara Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed halka webiga Jubaa uu dherer u maro dowlad goboleedka Jubbaland balse labadan webi aaney helin dayactir iyo daryeel sanado badan. Kadib seddexdii xilli roobaad ee ay da'een roobabka lixaadka leh (Deyr 2019, Xagaa 2020 oo inta badan ahaa mid aan roob badneyn), heerka qul-qulka biyaha ee webiyada ayaa sare u kacay iyada oo ay sababtay buuxsamidda webiga, dhinacyada webiga oo furtay ama liitay markii horaba. Maalgashi badan ayaa lagu sameeyay dhanka kaalmada bini'aadminimo taas oo aanan horseedin natiijo waarta. Sanadkii 2020, Xog-heynta Xalka Waara ayaa samaysay

daraasad lagu ogaanayay saameynta baahida ee dhinacyada kala duwan kadib fatahaadda ee degmada Beledweyne, ee gobolka Hiiraan ee ka tirsan dowlad goboleedka Hirshabeelle[110] ayaa tilmaameysa sababta dhalisa barakaca fatahaada iyo in ay tilaameyso talabooyinka ay tahay in horay loo qaado si loo gaaro xalka waara, oo ay ku jiraan maareynta biyaha webiga, talo-bixinno ku aaddan xoojinta horumar dhaqaale iyo deegaan waara.

Natiijada ka dhalatay daraasaddan ayaa ah in maamulka dowlad goboleedka Hirshabeelle iyo bulshada ay usoo baxeen sidii looga miro dhalin lahaa xalka waara ee ay daraasaddu tilmaantay iyada oo laga billaabayo dayac-tirka kaabeyaasha biyaha sida kanaalada muhiimka ah. Sidoo kale, tani waxa ay dhalisay in ay dowladdu qaadato go'aanno ku aadan sidii maalgashi loogu sameyn lahaa sidii looga hortagi lahaa fatahaadaha. Dowladda Soomaaliya ayaa imika ku howlan horumarinta Istiraatiijiyadda Qaranka ee Horumarinta Biyaha iyo Maamulka Kheyraadka Biyaha taas oo ay horkaceyso Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (MoEWR) iyada oo isla markaasna la dhisay hanaanka horay lagu ogaado digniinnada musiibooyinka ee laga hirgeliyay Wasaaradda Gargaarka iyo Maaraynta Musiibooyinka (MoHADM)

## SO5 AHMIYADAHA

In lagu guuleeysto natiijada 5aad ee:

**i. Ka Hortagga iyo Yareynta Barakaca ka Dhasha Fatahaadda:**

- In la dayactiro 150 goobood oo jaban oo webiyada Shabeelle iyo Jubba ka fatahaan muddo sanad gudaheed ah oo ay ka mid tahay in si joogto ah loo kormeero hanaanka dayactirka goobha ay ka furmaan webiyada.
- In la caro iyo qashin bixiyo webiyada Shabeelle iyo Jubba seddax sano gudahooda iyada oo la dayactirayao/la dhisayo 150 baraago biyo.
- In la dhiirigeliyo wax soo saarka calafka xoolaha ee beeraleyda yar-yar iyada oo lasiinayo 300 oo beeraley ah abuurka iyo waxyaabaha kale ee la geliyo beeraha bulshada ku dhaqan hareeraha webiyada Shabeelle iyo Jubba.
- In la dayactiro 25 kanaal oo biyaha ay lagu yareeyo, 150 waddo gasho webiyada Shabeelle iyo Jubba muddo seddex sano gudahood ah.
- In la isku dubbarido lacago lagu maalgelinayo beeraleyda waweyn ee ku aadan maareynta biyo qabashada iyo kaabeyaasha kale ee lagu yareynayo saameynta lixaadka leh ee roobabka, fatahaadaha iyo abaraka oo muhiim u noqon doona adkeysiga dadka Soomalaaliyeed ee ku tiirsan dhaqashada xoolaha iyo tabaca beeraha.

**ii. In La Abuuro Jawi Saamaxayo Gaarista Natiijada SO5:**

- Taabogelinta istiraatiijiyadda soo kabashada deg-degga ah ee horseedaya xal waara oo ku aadan barakaca fatahaadda ka dhasho. Fal celin istiraatiiji ah waxa ay u baahan tahay hoggaamin dowladeed iyo in horay loo sii qorsheeyo. Waxa ay sidoo kale u baahantahay in bahda ka howlgaleyso dadaaladan la isku duwo si ay si dhow ugu wada shaqeeyaan si loo fududeeyo xalka waara oo la joogteyn karo.
- In la horumariyo hanaan lagu ogaanayo digniinnada hordhaca/kuwa lagu ogaado cunno yaraida iiyo in la abuuro howlgallo iyo hay'ado isku xiran oo ka shaqeeyo badqabka bulshada xilliyada kororka dhibaatada, waxyaabaha dhaliya iyo heerarka maamulka.
- In la tixgeliyo lacag loo qoondeeyo maareynta musiibooyinka qaranka si loogu maalgeliyo dhibaatooyinka la sii saadalin karo ee bulshada.

- In la billaabo lana shaqo geliyo hanaanka maareynta qashinka waxgal leh iyo qashin qubka.
- In dib-loo howl gelihyo Wakaaladdii Federaalka ee Maareynta Webiyada si ay u maareyso biyaha webiyada, ka hortagga fatahaadaha, biyo keydinta, dayactirka haraha, carro bixinta webiyada, dayactirka guud iyo isticmaalka biyaha.
- In la ogaado dhamaan meelaha ay webiyada Shabeelle iyo Jubba biyaha ka bixyaan ama la liitaan lana maalgeliyo dayactirkooda ayaa muhiim u ah gaarisgta xalka waara.
- In la horumariyo sababo ganacsi oo dhiirigelinayo maalgashi baaxad leh oo lagu sameeyo kaabeyaasha ka hortagayo fatahaadaha iyo maareyntoodaba.
- In la maalgeliyo wacyigelinta bulshada iyo waxbarashda madaniga ah si loo dhimo khataraha daadadka iyo in bulshada loo qaabeeyo sidii looga hortagi lahaa arrimaha kala duwan ee muhiimka ah.

## Ahmiyadaha Dowladda ay soo Jeedisay oo Kooban:

### U diyaar garowga musiibooyinka iyo wacyigelinta

In la qiimeeyo tallabooyinka ka horreeya fatahaadaha si loo xaqiijiyo falcelin ku aadan sidi dadka loogu diyaarin lahaa xaaladaha deg-degga ah ee mustaqbalka si habboon. In sidoo kale la qiimeeyo howlaha muhiimka ah ee u diyaar garowga musiibooyinka oo ay kamidka tahay bixinta digniinta, rarista dadaka oo kumeel gaar ah, wacyigelinta iyo waxbarashda madaniga ah iyo qorshaha u diyaar garowga kaas oo la xiriira maareynta musiibooyinka..

### Falcelinta

In la qaado tallabooyin lagu dhimayo saameynta ba'an ee ay fatahaadaha ku hayaan dadka iyo qalabka iyo kaabeyaasha dhaqaale.
In horay loo sii qorsheeyo fulinta howlaha, la xaqiijiyo isla markaasna loo helo hay'ado karti iyo karaan u leh maareynta musiibooyinka ayaa u ah mihiim sidii loo ilalain lahaa kaabeyaasha, qiimeynta baahida saameynta iyo badqabka guryaha.

### Adkeysiga iyo Kasoo Kabashada Aafooyinka

In la qaado tallabooyin lagu kaalmeynayo dadka ay saameysay fatahaada sidii ay dib ugu soo kaban lahayeen. Soo kabashada bulshada ee fatahaadaha kadib ayaa ah fursad horseedeyso in la hagaajiy fursadaha adeeg bixinta iyo in xoojinta horumarista yool, iyo qorshe ku aadan sidii loogu heli lahaa xalka waara musiibooyinka fatahaadaha. Sidoo kale in loo adeegsado casharada laga bartay musiibooyinkii hore in loo adeegsado sidii loogu dhimi lahaa nuglaanshaha iyo dhibaatooyinka mustaqbalka.

### Xalka

Qiimeynta xalka waara ee ku aadan soo noq-noqoshada fatahaadaha iyo in la tilmaamo howlaha muhiimka ah ee la qaban karo si looga hortago mustaqbalka barakaca ka dhasha fatahaadaha sanadaha soo socda.Source: Durable Solutions Secretariat, Post-flood Impact and Needs Assessment in Beledweyne district.

**Xigasho:** Xog-heynta Xalka Wara, Daraasadda Saameynta Baahida Fatahaadda Kadib ee Degmada Beledweyne.

# XALLINTA BARAKACA KA DHASHO ABAARAHA

Tan iyo 2015kii, dhibatooyinka bini'aadinimo ee ay Soomaaliya soo wajaheysay sanado badan waxaa uga sii daray saameynta is-xig xigay ee ay sababeen hoos u dhac ku yimid roobabka. Waxaa intaas hareer socday colaado, gaar ahaan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, oo aanan kaliya sare u qaadin heerka barakaca balse ka hor-istaaga qoysas badan in ay helaan adeegyada aas-aasiga ah sidoo kalana hoos u dhiga helista gar-gaarka bini'aadminimo siina baahisay xog-yarida ay qabaan dadka ee ku aadan baahidooda iyo arrimaha u baahan wax ka qabashada.

Istiraatiijiyadda NDSS waxa ay garowsantahay ahmiyadda istiraatiijigga ah ee ay leedahay DINA iyo qorshe howleedkeeda. Tani iyo 2016kii, waxaa jiray in badan oo tallabooyin la xiriira xog aruurinta iyo falanqeynta, iskuduwidda, horraan ka hortagga iyo ka falcelinta, iskaashi u dhaxeeya bahda horumarinta iyo kuwa gargaarka bini'aadminimada. Si loo xaliyo barakaca ka dhasha abaaraha, NDSS waxa ay damacsantahay in ay is waafajiso howlaha socda ee ku xusan DINA iyo RRF ee muddada dhexe iyo tan fog intaba si loo dhiirigeliyo falcein ay wada sameyaan inta ay khuseyso si loo hagaajiyo isku filnaanshaha, adkeysiga, iyo insku xirka dhaqan-dhaqaalaha dadka nugul.

In si gaar ah diiradda loo saaro dib-usoo kabashada magalooyinka ayaa xallineysa gaabiska dhanka howlgallada ah ee haatan ka jira magalooyinka uu cadadiska ba'ani ku hayo kororka bulshda iyo in sidoo kale la eego qorheynta magalooyin ka iyo horumarinta magalooyinka yar-yar.

# 7 ARRIMAHA ISKU DHAFAN







## Magaleynta iyo Kaabeyaasha

NDP-9 waxa uu wataa fursad dahabi ah oo ku aadan sidii loo gaari lahaa horumar micno leh ee ku aadan magaleynta, taas oo ay suurto galka tahay in uu sare u qaadi laha horumar dhaqaale, xasilinta iyo adkeysiga. Tani waxa ay u baahantahay hanaan siyaasadeed, qorsheyn heer gobol iyo heer magaalo ah iyo in sidoo kale la xoojiyo maamulka madaniga ah. Waxaa jiro mashariic horumarinta dhulka iyo kaabayaasha dhaqaale oo ay wadaan bangiyo horumarineed[111]. Sara u kaca ku yimaado qiimaha dhulka ee ay sababtay maalgashiga kaabeyaasha dhaqaalaha waa in looga faa'iideystaa sidii loogu xalin lahaa caqabadaha magaleynta, oo ay ku jirto kuwa xalka waara ee dadka gudaha dalka ugu barakacay sida lixaadka leh. Waxaa intaas dheer, hormarinta kaabeyaasha dhaqaalaha ayaa ah arrin muhiim u ah waxsoo saarka, kobac dhaqaale oo la joogteyn karo iyo xalka waara.

Maalgelinta kaabeyaasha shaqaalaha waa in la siiyaa ahmiyad kowaad dadka uu saameeyay barakaca oo u baahan in kaabeyaasha aas-aasga ah dib loo dhiso loona ilaaliyo si ay u qaataan go'aano wax ku ool u ah xalka waara iyo dookhyada jira. Tiro badan oo dhaqanka wacanee diiwaan gleinta, qorheynta magalooyinka iyo dakhliyada dowladaha hoose ayaa ka jira qeybo badan oo ka mid ah Soomaaliya waxaana macquul ah in goobaha kale laga sameeyo si taa lamid ah iyada oo la fulinayo horumar iskaabaya oo ku aadan taageerada sidii loo gaari lahaa xal waara oo lixaadla iyo magaleyn la jogteyn karo[112]. In la kaashado bahda horumarinta sida Bangiga

Adduunka ayaa ah mid muhiimaddeeda leh. Ahmiyadda uu siinayo Bangiga iyo adkeysiga magalooyinka ayaa loola jeeda xoojinta karaanka bixinta adeegga dadweynaha ee heer qaran, gobol iyo in la taageero dib-u-dhiska kaabayasha dhaqaale ee muhiimka u ah magalooyinka qaarkood.



## Dhowrista

Mas'uuliyadda kowaad ee dhowrista waxa ay sarantahay hay'adaha qaranka, iyada oo la raacayo shuruucda qaranka iyo xeerarka caalamiga ah. Gudaha Soomaaliya, Qaramada Midoobay ayaa asteysay seddex ahmiyadood oo laf-dhabar u ah istiraatiijiyadda dhowrista. Istiraatiijiyaddu waxa ay tixgelineysaa dadaalada dhamaan inta ku howlan dhowrista sida dowladda, hay'adaha QM iyo bahda kale ee horumarka si loogu guuleysto ahdaafta dhowrista. Seddexdan ahmiyad ayaa kala ah: (1) in sare loo qaado siyaabaha lagu xallin karo sooca noocyadiisa kala duwan oo ay ka midka tahay takoorka ku saleysan bulshada, hanaanka awoodaha, nuglaanshaha, da'da, jinsiga iyo in la xoojiyo xaqiijinta isla xisaabtanka ku saleysan bulshada iyo kuwo cusub ee ku howlan gar-gaarka deg-degga ah si loo sugo dhowrista dadka barakacay; (2) in la xaliyo tabashooyinka dhowrista sii kordhinayo ee xarumaha iyo goobaha dadka gudaha dalka kubarakacay, oo ay ka midka tahay kharataha muuqda/iyo khataraha ka dhasho in lagu guul darreystgay joojinta barakaca iyada oo loo marayo waddada ku habboon; (3) in lala xaajoodo dadka uu saameeyay barakaca iyo dadka kale ee ay khuseyso (heer qaran iyo heer calami ah intaba) si loo dhimo baacsiga aan kala sooc lahyen ee dadka shibilka iyo hantidooda kuwaas oo muhiim u ah bad-baadadooda. Seddexdan ahmiyadood ayaa sido okale ku xusan DINA iyo RRF



## Ka Soocista Bulshada Iyo Takoorka Ragaaday

ka soocista bulshada ayaa lagu qeexaa hanaanka ama xaaladda ka hor-istaageyso shaqsi ama koox in ay si buuxda noloshooda uga qeyb qaataan bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda intaba. Waxa ay salka ku haysaa ka hor-istaagidda xiriirka awoodaha ka dhasha hanaanka is-garashada ee bulshada sida (Da'da, Jinsiga, Qowmiyad, Qabiil ama diin) iyo goobo (goobaha fog-fog ama ay ku badan yihiin dadka saska ka qaaday colaadaha ama ay isku biirsadeen labadaba[113]. Soomaaliya waxaa sooca lala xiriirshaa kooxaha bulshada, qowmiyadaha ama kooxaha isku nolosha ah, jinsiga, da'da, heerka barakaca, iyo naafada. Sida ku xusan DINA, bulshada Soomaaliyeed waa kuwo kala sareeya isla markaasna la jaanqaada hadba wadciga kuwaas oo ay la xiriiraan is-kooxeysi isbedela, is-baheysi ka dhaxeeya kooxaha bushada, kooxaha yar-yar, kooxaha isku qabiilka ah iyo kooxaha kale ee bulshada[114].

Is-kooxeysigan ayaa ah mid xiriir iyo kala go' isbeddel ah ku dhisan oo gaar ahaan ka tarjumaya awoodaha kooxaha bulshada, oo ay ka dhashaan cawaqib faquuq ama takoor lagu sameeyo kooxaha awodda yar. Dadka la faquuqo

ama laga tirade badan yahay, ee laga fogeeyay shabakadaha kaalmada bulshada, dhaqanka awoodaha go'aan qaadashda ayaa si isdaba jog ah u nuqul loogana faa'iideystaa taas oo keenta in ay liidmaan oo aysan helin matalaad siyaasadeed iyo helis xaddidan oo ku aaddan waxbarashada, shaqada rasmiga ah, xawaaladaha, iyo gar-gaarka bini'aadminimo. Tusaale ahaan, dadka gudaha dalka ku barakacay ayaa loo takoora sababo la xiriira heerka aqoosiga, muuqaalka, kooxaha nolol-wadaagta ay yihiin iyo qabiilka ay kasoo jeedaan ayaa wajahayo heerarka ugu xun ee nafaqo darrida, caafimaadka, waxbarashda, helista shaqada iyo adeegyada kale (iyagoo saboolna ah) marka la bar-bar dhigo bulshada kale ee la deriska ah. Xeryaha dadka gudaha dalka ku brakacay ee magalooyinka yar-yar iyo kuwa waweyn oo ay ku noolyihiin barakacayaasha aya sii darsaneyso saboolnimada, sooca ku saleysan bulshada.



## Isla xisaabtanka Dadka uu Saameeyay Barakaca

Waa in la ixtiraamo isla xisaabtanka dadka uu saameeyay barakaca marka la baadi goobayo xal waara ee Soomaaliya. Waa in la dejiyaa hanaan ay dadka uu saameeyay barakaca ay ugu gudbin karaan cabashadooda maamulka si wa looga qabto iyaga oo aan cabsi ka qabin dhamaan hay'adaha dowladda heerarkooda kala duwan si loo qaado talabooyin lagu naf-badbaadinayo adaka uu saameeyay barakaca.

Intaas waxaa dheer in maamulada qaranka iyo kuwa dowladaha hoose ay siiyaan isla markaana u fududeyaan si deg-deg ah, lagana hor-istaageyn bixinta gargaarka hay'adaha bini'aadminimo iyo kan horumarka ay siinayaan dadka uu saameeyay barakaca. Istiraatiijiyaddan waxa ay tixgelin doontaa hanaanka fulinta howlgallada IASC iyo go'aanada AAP kuwaas oo qaatay go'aamo la xiriira isticmaalka awoodaha si mas'uuliyadi ku dheehan tahay iyada oo la eegayo, loo saarayo ama ay kula xisaabtami karaan dadka la kaalmeynayo hay'adaha gar-gaarka[115]. Dowladda Soomaaliya waxa ay xaqiijin doontaa in qof walba uu helo fursadaha iyada oo aan la takooreyn. Qodobo gaar ah ayaa loo dhigi doonaa dadka uu saameyay barakaca eel eh nugeylka gaarka ah suda, dumarka raggoodu dhinteen, caruurta, dumarka quudiya qoysaskooda, naafada (jir ahaan iyo dhimir ahaanba) iyo dadka qaba xanuunada halista ah.



## Jinsiga

Maadama uu yahay arrin dhex-taal ah, Jinsiga waa in lagu daraa dhamaan ujeedoonyinka istiraatiijiga ah ee ku xusan NDSS. Tani waxa ay u baahantahay in la fahmo caqabadaha kala duwan ee haysta dadka uu barakacu saameeyay sida ragga, dumarka, wiilasha iyo gabdhaha si ay u helaan adeegyada, kheyraadka dhaqaale iyo fursadaha macquulka ah iyo sidoo kale ka faa'iideysiga waxtarka ay u leeyihiin gaarista

xalka waara. Aruurinta iyo isticmaalka xogta la xiriirta jinsiga iyo da'da iyo xoojinta jinsiga ee ka fal-celinta dowladda ee muddada gaaban iyo tan dheer intaba ayaa fududeyn doonta naqshadeynta iyo fulinta siyaasado iyo howlaha kale ee ku aadan jinsiga. Dumarka barakacay ayaa khatar weyn ugu jira sooca marka la furo, guurka dumarka badan iyo dumarka raggooda ka geeriyooday taas oo usii nugleyneysa khataro amnigooda la xiriira.



## Dhallinyarada

Dhallinyarada: caqabadaha ugu waweyn ee ay wajaheyso Soomaaliya waxaa ka mid ah in inbadan oo ka mid ah dadkeedu da'yar yihiin kuwaas oo aanan helin ama wax yar ka helo kheyraadka wax soo saarka iyo fursado shaqo; sidaa daradeed, dhalinyarada ayaa aalaba u badan kuso shaqo la'aan ah[116]. In badan oo kamid ah dhallinyarada ayaa ku dhex nool bay'ad qalalaase, cabsi, shaqo la'aan iyo saboolnimo. Intaa waxaa sii dheeh, inta badan dhallinyarada lagama. Qeyb geliyo dadaalada dowladnimiada, nabad iyo qaran dhiska. Dhallinyaradu waa in ay noqdaan muwadiniin fir-fircoon lana siiyo adeegyada muhiimka ah ee dowladda si looga dhowro nuglaanshaha. NDSS waxa ay dhiirigelineysaa in si toos ah loola macaamilo dhallinyarada uu saameeyay barakaca si ay uga qeyb qaataan howlaha gashiinta ah iyo kuwo ay tabashada ka qabaan.

Si waafaqsan siyaasadda dhallinyarada qaranka ee 2019[117], dowladdu waxa ay ku celineysaa go'ankeedii ku aadana dhallinyarada ee ahaa in loo dhigo lana xaqiijiyo gaaritaanka ahmiyadana baahiyaha horumarineed, lab iyo dheddig labadaba. Istratiijiyadaha iyo howlaha lagu bar-tilmaameedsanayo dhalinyarada oo ka imaanaya gudaha dalka aya awood siin karo dhallinyarada uu saameeyay barakaca iyo bulshada si ay u lahaadan geedi-socodka horumarka iyo natiijooyinkiisa, taas oo ka dhigeyso dadka kuwo ay suurto gal tahay in ay taageeraan barnaamijyada maadama ay iyagu qeyb ka yihiin[118]. Istratiijiyaddan waxa ay waafajineysa ahmiyadaheeda kuwo siyaasadda qaran ee dhallinyarada waxa ayna sugeysa in la garowsado llana dhageysto codka dhallinyarada uu saameeyay barakaca si looga fal-celiyo caqabadaha iyo ahmiyadaha ku teedsan ee xalka waara.



## Isbedelka Cimilada

NDSS waxa ay tixgelineysaa saameynta isbedelka cimilada ay ku leyihiin xalka waara. Waxa ay tixda ku darsaneysaa sida isbedelka cimiladu u saameynayo go'aanka iyo dookha ee xalka waara, sida ay u murjineyso joogteynta xalka waara iyo isbedelka cimilada. Tallabooyinka la qabsiga iyo u adkeysiga isbedelka cimilada waa in laga mid dhigaa howlaha xalka waara ee lagu bar-tilmaameedsanayo dadka reer miyiga saboolka ah, bulshada reer guuraaga kuwaas oo khatar ugu jiro in ay u barakacaan sababo la xiriira musiibooyinka la xiriira cimilara. Intaas waxaa sii dheer, in DFS oo kaashaneyso inta ay khuseyso ay rabto in la'isku keeno kheyraadka si loo kordhiyo maalgashiga la xiriira ka hor tagga

cudurrada, caafimaadka iyo nafaqada xoolaha, wax soo saar dalag oo la hagaajiyay iyada oo la isticmaalayo hanaanka wax soo saarka casirga ah iyo farsamooyinka u adkeysiga cimilada lana adkeeyo taxaha-beeraha si loo kordhiyo natiijada dhaqaalaha si la joogteyn karo.



# 8 ISKAASHI, HOGGAAN IYO ISKU DUWID





Soomaaliya ayaa gaartay horumar muhiim ah sidii loo abuuri lahaa hay'ado heer federal ah oo ka shaqeeya xalka waara. Guddi hosaadka golaha wasiirada ee horumarinta bulshda ee uu shir-guddoomiyo Ra'isul Wasaaraha, tiirka horumarinta bulshada iyo xog-heynta xalka waara ayaa ah hanaan adaga oo isku duwid. Kaalinta wasaaradda Qorsheynta ayaa lagu xusay dhamaan horumarinta istiraatiijiyadaha, qorshe yaasha, iyo hubinta isku duwid siman ee ay sameyaan wasaaradaha ay khuseyso iyo sidoo kale in la xaqiijiyo in xalka waara si ku filan loogu daro qorshe yaasha mudan iyo barnaamijyada, halka hay'adda NCRI ay mas'uul ka tahay horumarinta siiyaasadaha iyo xogta. Isla markaana, Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo xogheyn ka ah isku duwidda xubnaha kala duwan ee mas'uulka ka ah ee heer federaal iyo heer maamul goboleed, gaar ahaan meelaha looga baahan yahay kaalinta maamulka degmada iyo geedi-socodka horseedaya dhismahooda[119].

Qorshahii Horumarinta Qaranka 8aad waxaa ku xusnaa cutub ama tiir ka hadlayay askeysiga oo ka tirsanaa koox-hoosaadka farsamo ee tiir hosaadka qaxootiga, barakaca iyo xalka waara. Xalka waara waxaa hoggaamin jiray NCRI iyo UNHCR. Koox-hoosadkaas waa la baab'iyay. Dib-u-qaabeynta lagu sameeyay hanaanka deeqaha waxaa lagu dhisay NDP9, halka kooxo wadashaqeeyo oo cusub la dhisay kuwaas oo waafaqsan NDP9 sida kuwa: (1) siyaasadda Loo dhanyahay (2) amniga iyo sarreynta sharciga (3) horumarinta dhaqaalaha, iyo (4) horumarinta bulshada. Si qaab fudud loo hogaamiyo isku duwidda howlaha xalka waara loona xoojiyo iskaashiga istiraatiijiga ah, xog-heynta xalka waara waxa ay:

- Xoojin doontaa hanaanka xogta barakacayaasha iyada oo si fudud loo xalinayo isku xirka gar-gaarka bini'aadminimo-horumarka iyo nabadda. Tani waxa ka dhigantahay in la'isku keeno kheyraad lagu maalgeliyo darasaad iyo sahanno soconayo muddo fog.

- Dejineysa istiraatiijiyadda horumarinta karaanka ee muddada fog taas oo bixineyso aragti waadax ah iyo sawir guud iyada oo loola jeedo sidii si is daba jog ah loo xoojin lahaa hay'adaha iyo horumarinta karanka muddada fog ee maamulada dowladaha hoose ee heer federaal, gobo lama hoose.

- Hagaajineysa isku duwidda dowladaha hoose iyada oo la horumarinayo isku xirka hay'adaha badan ee ka shaqeeya xalka waara. Adkeynta isku duwidda heer qeybeedka ee maamul gobleedyada iyo dowladaha hoose ayaa dhiirigelinayo lahaanshaha dowladda iyo is dhaafsiga maclumaadka ee ka qeyb qaate yaasha si joogto ah. Tani waxa ay ka hortageysa ku celiska howlaha, horseedeysa isku duwanaansho, wada shaqeyn heer walba ah.

- Xaqiijineysa ka qeyb qaadasho lixaadle oo ay sameyaan ururada bulshada rayidka Soomaaliyeed. Iskaashi dhex mara maamulka dowladaha hoose iyo ururada bulshada rayidka ah ayaa horseedi karo in sare loo qaado helista adeegyada ee dadka uu saameeyay barakaca.

- Ka qeyb geliso wada-hadallada sare iyo iskuduwidda heerka wasiir ah ee howlaha xalka waara. Xog-heytu waxa ay sii wadeysaa u ololeynta iyo ka qeyb galka wada hadallada iyo wada xaajoodka xalka waara sida shirka heerka sare ah ee dadka gudaha dalka ku barakacay ee QM, dhowr shirar kale oo muhiim ah ooay soo qaban-qaabiso ololaha addunka ee GP20.

- Shaqadeeda la xiriirineysa tiirka cusub ee NDP9 koox hoosaadka si loo kor-yeelo loona waafajiyo ahmiyadaha xalka waaa iyo howlaha muhiimka u ah geedi-socodka horumarka.

- Isticmaaleysaa NDSS in uu noqdo dukumiintiga hagayao hoos u dhigista saboolnimada lala xiriiryo barakaca gudaha dalka. Xog-heyntu waxa ay ku dareysaa ajandaha dadka uu saameeyay barakaca warbixinga Hay'adda Lacagta Adduunka ee ka hadlo fulinta istiraatiijiyadaha hoos u dhigista saboolnimada.

- Kala shaqeyn doonta guud ahaan bulshada sidii loo heli lahaa heer guud oo lagu cabiro loguna kormeero horumarka ku aadan dib-u-dejin la joogteyn karo si loo fuliyo qorsho howleedka iyo siyaasadaha xalka waara eek u saleysan goobaha. Tani waxa ay waafaqsan tahay wada hadallada khuseeya ajandaha saboolnimada, kormeerka gaarista Yoolka Horumarka Waara (SDGs).

- U isticmaali doonta xogta iyo gorfeynta laga helayo hanaanka maclumaadka deeqaha Soomaaliya ee loo yaqaan (AIMS) si loo hagaajiyo isla xisaabtanka, isku duwidda, qorsheynta ku dhisan xaqaa'iqa, qiimeynta, kormeerka iyo saameynta deeqaha.



# 9 HANAANKA KORMEERKA, QIIMEYNTA IYO WARBIXINNADA





Hanaanka cusub ee barnaamijyada xalka waara waxa ay tabayaan baahida loo qabo in si faar ah diiradda loo saaro kormeerka saameynta maalgashiyada la sameeyay ka dhashay. Ahmiyadaha istiraatiijiga ah ee lagu xusay NDSS ayaa xusaya fursado gaar ah oo loogu kuur gelayo sidii kormeer iyo qiimeyn qaabab kala duwan leh loogu heli lahaa heerka xalka waara loogu quuleystay. Iyada oo la eegayo baaxadda NDSS, in la isticmaalo wadiiqooyin iyo hanaan kala duwan oo lagu cabirayo horumarka la sameeyay ee ku aadan xalka waara waxa uu muhiim u yahay in la fahmo bulshda, qoysaska, iyo baahida qofka, gaabiska jira, iyo fursadaha la heli karo si sare loogu qaado dadaallada qaladaadkana loogu saxo. In la isticmaalo fakarka natiijo la wada leeyahay, tilmaamaha iyo yoolalka howlaha xalka waara ayaa muhiim u ah sidii loo gaari lahaa saameyn laga wada shaqeeyay. Hoos waxaa ku xusan tusmo ku saabsan tilmaamaha geedi-socodka horumarka qorsho howleedyada la socda NDSS.

## Tilmaamaha Horumarka ee Qorsha Howleedka Xalka Waara ee NDSS

Hanaanka koreerka iyo qiimeynta ee loo dejiyay si loogu cabiro qorsha howleedka xalka waara waxaa lagu saleeyay:

- Isku keenista tilmaamaha[120] laga soo aruuriyay daraasado[121] kuwaas oo diiradda saarayay xalka waara iyo barakaca.
- Qooraansiga miijiyeyaasha Yoolka Horumarka Waara (SDGs)[122] ee khuseeya xalka waara (oo intooda badan lagu qoray NDP9).
- In la isla gartay kuwa ugu habboon ee ay isticmaalan hay'adaha xalka waara intooda badan[123], kuwaas oo Iyana u baahan in lagu kormeero heerka bulshada.

- **Qeexista tilmaamaha heer hay'adeed:** Tilmaamaha heer hay'adeed ayaa ah kuwo si toos ah ula xiriira loona qiimeyn karo howlaha gaarka ah halke tilmaamaha heer bulsho ah ay muhiim u yihiin sidii loo qiimeyn laha loona kormeeri lahaa saameynta howlaha iyo hirgelinta istiraatiijiyadda guud, sida, milicsiga howlaha ay qabteen hay'adaha/ inta ay khuseyso howlaha xalka waara. Sida daradeed, waxaa muhiim ah in marka la dejinayo tilmaamaha qiimeynta iyo kormeerka loo eego hadba howlaha. Howlaha badankooda, tilmaamaha heerka hay'adaha ayaa si sahlan loo dejiyaa, tusaale ahaan, iyada oo la cabirayo boqolkiiba ama xaqiiqada (sida Siyaasadaha la horumariyay, hanaanka la abuuray) ayaa ah natiijada howlahan.

- **In la isla qeexo heerka laga duulayo iyo yoolka tilmaan kasta oo heerka dadweynaha ah iyada oo loo marayo geedo-socod si wadajir ah loogu xaqiijinayo:** Inta badan tilmaamaha lagu daray hanaanka kormeerka iyo qiimeynta, ilaha iyo aaladaha xog aruurinta ee loo adeegsanayo in lagu aruuriyo xogta ee lagu xusay hanaankan ayaa loo isticmaali karaa in ay noqdaan heerka laga duulayo. Iyada oo ay qeyb ka yihiin geedi-socod ka iskaashiga, xog-heynta xalka waara waxa ay la xiriiri doonta ururada ku howlan xalka waara si looga codsado in ay dib-u-eegis ku sameyan isla markaana ay isku soo aruuriyaan heerka laga duulayo ee tilmaamahan kuwaas oo ku jira xog-keydintooda.

- **Tilmaamaha natiijada guud:** iyada oo ay qeyb ka tahay howlaha xaqiijinta, waxa ay muhiim u tahay in loo tixgeliyo sidii loo kormeeri lahaa iyada oo la eegayo yoolka/ natiijada gaarka ah. Tusaale ahaan, Ujeedka istiraatiijigga ah ee 1aad waxa uu leeyahay natiijada 1aad, taas oo qeexeyso in tiro go'an oo dadka uu saameeyay barakaca ah la taageeri doono. Iyada oo loo marayo kulan howleedyo wadatashi iyo kawada qeyb qaadasho ku dhisan, Xafiiska Xalka Waara ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa tallabadan horay usii amba qaadi doonto.

## Somalia Durable Solutions Indicator Mapping

This graph shows the number of indicators (0-10) per durable solutions related topic for 9 tools measuring displacement in Somalia. The tools are ordered from the most (WB HFS) to least (DTM - BSF) total indicators




**Source** IDP Profiling Service JIPS.

JIPS

LIFAAQA 1AAD

# QORSHE HOWLEEDKA: ISTIRAATIIJIYADDA QARANKA EE XALKA WAARA EE SOOMAALIYA (2020-2024)

## ARAGTIDA

In dadka barakacu ku saameeyay Soomaaliya loo helo xala waara iyada oo la raacayo nidaamka falanqeynta ku saleysan caddeymaha iyo in si wada jir ah la iskula qaato hanaanka, leyskuna dhafo howlaha xalka waara.

Gaar ahaan, Istiraatiijiyadda Qaranka ee Xalka Waara (NDSS) waa hannaan fulineed oo qeexaya aragti mideeysan, ujeedooyinka muhiim ka ah, mabaadi'da guud ee hageyso dhaqan gelinta howlaha xalka waara iyo siyaasadaha Soomaaliya ee ku aadan xalka waara 5ta sano ee soo socota.

## ARAGTIDA ISBEDELKA

Haddii dadka uu saameeyay barakaca ay heli karaan adeegyada kuna noolaan karaan amni la'isku halleyn karo kaas oo ka ilaalinayo guri-kicinta (SO1); si buuxda kaga qeyb qaadan karaan howlaha bulshada (SO2); heli karaan qaab nololeed la joogteyn karo iyo shaqo (SO3); sidoo kalana heli karaan garsoor (SO4); markaa ayeey ku guuleysan karaan xalka waara maadama ay awoodaan in ay isku filnaadan isla markaasna ay bulshada dib-ugu soo biiraan.

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| **Isku dhafidda,iyo isla dejinta ilaa 5,000 oo qaxooti ah, 25,000 oo qaxooti soo guri-laabtay ah iyo (qiyaastii 4,000 oo qoys) iyo 50,000 oo dadka gudaha ku barakacay ah (80,000) 5ta sano ee soo socota dhamaan maamul goboleedyada iyada oo la gaarsiinayo adeegga aas-aasiga ah iyo guryo la degenaan karo muddo dheer.** | Abuurista iyo ballaarinta hababka lagu horumarinayo bulshada ee loo yaqaano (SDMs) ee degmooyinka/deegaannada ay ku noolyihiin dadka barakaca saameeyay ee badan si sare loogu qaado karaankooda awood bixinta. | | ✓ | ✓ |
| | In la tijaabiyo hal-abuur iyo hanaanka kororka si loo hagaajiyo adeegyada la siiyo dadka uu saameeyay barakaca iyad oo la deegsanayo hanaanka iskaashiga dowladda iyo ganacsatada ee loo yaqaano (PPPs) meelaha aysan adeegyada dowladdu ka jirin. | | ✓ | ✓ |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| | In la dhiso xod-keydiye oo heer kiisu sarreeyo si loo bixyo guryo la awoodo gudaha Soomaaliya iyo in loo diyaar garoobo duruufaha caalamiga ah. | | ✓ | |
| | In la tijaabiyo hal-abuurka iyo hanaanka kordhinta si iloo hagaajiyo amaan joogto ah ee ay helaan dadka ay saameeysay barakaca. | | ✓ | ✓ |
| | In la diyaariyo xod-keydiyaha dhulka dowladda iyo miliileyaasha hantida si ay u siiyaan dadka deegaan iskood u degaan, nabad ah isla markaaasna saamaxaya dib-u-dejin sharafi ku dheehantahay. | ✓ | ✓ | |
| | In la sameeyo qiimeyn dhaxalgal ah oo ku aadan hindisaha qiimo wadaagga (dhul badalka ama kala wareegsashada) iyo iskaashiga dowladda iyo ganacsatada ee ku aadan guryaha. | | ✓ | |
| | In la horumaryo hanaan de-dejinaya ogolaanshaha dhul siinta ee mashariicda looga gol-leeyahy in lagu taageero guri-degenaanshaha muddada fog ee dadka ay saameysay barakaca iyo in la habeeyo bixinta waraaqaha dhul-lahaanshaha. | | ✓ | |
| | In la ballaariyo isla markaasna wax laga badalo barnaamijka horumarinta bulshada ee loo yaqaanno Baxnaano. | ✓ | | |
| | Horumarinta Siyaasadda Qaran ee guryaha Soomaaliya. | | ✓ | |
| | In la dhiso xod-keydiyaha qaranka ee dhulka. | | | ✓ |
| | In loo ole-oleeyo dhismaha golaha deegaanka si loo xoojiyo canshuuraha guryaha iyo dakhliga dowladaha hoose si loo kordhiyo maalgelinta adeegyada la siinayo dadka uu saameeyay barakaca | | | ✓ |
| | In la sameeyo qiimeyn qotto dheer oo ku aadan sida dowladda u hoggaamiso maalgelinta dadaalada xalka waara loogu raadinayo xaaladaha barakaca. | | ✓ | |
| | In dib-u-eegis lagu sameeyo sharciyadda guri-kicinta khasabka ah ee ka dhacay goobaha la bar-tilmaameedsaday. | ✓ | | |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| | In la dhiso hanaan isku duwayo hay'adaha ay khuseyso, bixinta maclumaadka, wadatashiyada iyo dhaqangelinta si looga hortago guri-rarka khasabka ah . | ✓ | ✓ | |
| | In la hir-geliyo Hab-raaca Qaran ee guryo-ka saarista iyo hanaanka kumeel-gaarka ah ee khuseeya qeybinta guryaha si loo xalliyo guri haysashada muddo fog iyo xeerarka si loo dhdowro xuquuqda dadka gudaha dalka ku barakacay ee ka dhanka ah guri-ka bixinta khasabka ah. | ✓ | | |
| | In la horumariyo lana dhiso xeerarka saameynta deegaanka bulshda ee lagu siinayo guryaha dadka uu barakaca saameeyay. | | ✓ | |
| | In lagu dhiirigeliyo maamul goboleedyadu in ay deegaanadooda ka fuliyaan go'aankii April 2020 ee ku saabsanaa hakinta guri-ka rarsta iyada oo la milicsanayo casharadii wax-tarka lahaa ee laga bartay fulinta go'aanka hakinta ee ay mamaulka degmada Baydhawo ku guuleysteen | ✓ | | |
| **In la kordhiyo la xisaabtanka maamulada ee ku aadan dadka ay saameeysay barakaca si loo xaqiijiyo ka qeyb-galkooda geedi-socodka nabadgelyada, qaran-dhiska iyada oo la dammaanad qaadayo, badqabkooda, amaanka iyo helitaanka aqoonsi sharci ah** | In la de-dejiyo hirgelinta sharciga IDP ga ee soo socda (oo hadda la qorayo) si loo xaqiijiyo in dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga soo guri-laabanayo loo dammaanad qaado xuquuqdooda. | | ✓ | |
| | In la dhiso hanaan madax-bannaan oo ay hoggaamineyso dowladda laguna heli karo jawaabaha cabashooyinka deeggaanada iyo xeryaha dadka gudaha dalka ku barakacay ee ka dhanka ah shariga. | | ✓ | |
| | In la dejiyo lana tijaabiyo ololaha maclumaadka dadweynaha iyo waxbarashada ku aaddan doorka cadaaladda iyo kala dambeynta dadweynaha. | | ✓ | |
| | In la horumariyo nidaam loo dhanyahay iyo qorshe wacyi gelin lagu dhiirigelinayo ka qeyb qaadashada arrimaha siyaasadda ee dadka gudaha dalka ku barakcay iyo qaxootiga soo guri laabanayo. | | ✓ | |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| | In la dhiirigeliyo geed-socod ay waddo bulshada kaas oo lagu dejinayo laguna dhaqangelinayo xalka bulshada ee ku aadan baahida sida, adeegyada amniga bulshada/ difaaca bulshada. | ✓ | | |
| | In la sameeyo wada xaajood heer bulsho ah oo ku aaddan sidii wax looga qaban lahaa arrimaha amni ee haysta dadka uu saameeyay barakaca. | ✓ | | |
| | In la hagaajiyo jawaiga amniga iyada oo loomaryao xiriirka wada shaqeyn ee ka dhaxeysa booliska goobaha qaxootiga soo gudi laabanayo iyo dadka gudaha dalka ku barakacay iyo dadka marti gelinayo. | | ✓ | |
| | Waa in lala shaqeynayo dhalinyarada, hoggaanka diimaha, mcalimiinkta, bulshada iyo ganacsatada si looga hortago xagjirnimda bulshada dhexdeeda. | ✓ | | |
| | In loo sameeyo tabo-bar sarakiisha safka hore ee tahriibka kaas oo la xiriira shaqciga qaxootiga, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, iyo mabad'iida ay tahay in la dhowro marka la maareynayo arrimaha tahriibka. | | ✓ | |
| | In sare loo qaado karaanka wasaaradaha dowladda iyo hay'adaha kale ee ka shaqaeeyo arrimaha xalka waara. | ✓ | ✓ | ✓ |
| | In la xoojiyo hanaanka aqoonsiga ee dhijitaalka ah ay taageerto Bangiga Adduunka si loo hubiyo in dadka nugul sida IDPs iyo qaxootiga soo guri-laabanayo (oo labaduba muwadiniin ah) la siiyo kaalinta kowaad. | | ✓ | ✓ |
| | In la helo xog iyo macluumaad barakaca ee dowlada leedahay | | | ✓ |
| | In la adkeeyo wada shaqeynta wasaaradaha iyo isku xirka hay'adda diiwaan gelinta dadweynaya, oo la filayo in ay hoggaamiso nidaamka diiwaan gelinta dadka Soomaaliyeed. | | ✓ | |
| | In la dhiso nidaam ganacsi oo la joogteyn karo si sare loogu qaado nidaamka diiwaan gelinta faraha ee hay'adda NCRI. | ✓ | | |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada Dhow 1 sano | Muddada Dhexe 2-3 sano | Muddada Fog 4 sani iyo kabadan |
|---|---|---|---|---|
| | in la sameeyo siyaasadda qaran ee wada noolanshaha bulshada. | ✓ | | |
| | In la tijaabiyo hanaan lagula macaamilayo Irrid-Gudbane yaasha goobaha ka bar-tilmaameedsanayo. | | | ✓ |
| | In la dhiirigeliyo wada xaajood dhex marah maamulada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga aheyn si ay iskula wada degaan isna kaabaan. | | ✓ | |
| | In la horseedo wada xaajood dadweyne si loo hagaajiyo fekerka dadweynaha iyo kalsoonida ay ku qabaan maamulka madaniga ah iyada oo la deegsanayo barnaamijyo laga wada qeyb qaadanayo iyo fagaaro la'iskugu wada imaan karo IWM. | ✓ | ✓ | ✓ |
| | In la taageero sare u qaadista karaanka booliska si loo dhiso karankooda ka fal-celinta ee la xisaabtanka shabakadaha amniga. | | ✓ | |
| | In la taageero kororka ka qeyb galka dadka uu saameeyay barakaca ee arrimaha madaniga, siyaasadda, bulshada iyo howlaha horumarka. | ✓ | ✓ | |
| **25% oo ka mid ah 250,000 oo shaqo cusub ee la abuurayo 5ta sano ee soo socota waa in loo qoondeya dadka gudaha dalka ku barakacay iyo qaxootiga soo guri-laabanayo iyada oo loo abuurayo jawi u saamaaxya ganacsatada in ay kobac ka sameeyaan qeybbaha ganacsiga ee suurto galka ay tahay in ay ka faa'iidaan iala markaasna fursado shaqo u abuuraan dadka uu saameeyay barakaca muddada dhow, iyo tan dhexe** | In la hirgeliyo Barnaamij Qaran ee Shaqo Carbin, iyada oo loo qoondeynayo qeyb gaar ah dhallinyarada jaamacadaha ka baxay ee ka midka ah dadka barakacu saameeyay (oo ay ma mid tahay tabo-barrada ardada ee farsamda gacanta loo yaqaan TVET). | | | ✓ |
| | In leys waafajiyo ajandaha guud horumarinta magalooyinka iyo ku darista dhaqaalaha ee dadka ku barakacsan magalooyinka iyo daafahooda, gaar ahaan kuwa la xiriira dumarka iyo dhallinyarada. | ✓ | | |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| | In la isticmaalo sahan dalka oo dhan ah oo ku saabsan cududda shaqaalaha si loo helo inta boqolkiiba dhallinyaro ah (qaxooti ama qaxootiga soo guri-laabanayo ama dadka gudaha dalka ku barakacay) iyada oo la xaqiijinayo suuq-shaqo oo tix gelinayo shahaadada TVET ka iyo dibloomaha iyo in ay ku jiraan kuwa helay shaqooyin fiican. | | ✓ | |
| | In la diyaariyo istiraatiijiyad qaran oo ku aadan sidii shaqo loogu heli lahaa dadka xirfadaha hoose leh ee ka tirsan bulshada uu saameeyay barakaca. | | ✓ | |
| | In laga ololeeyo gudaha dalka iyo qurba-joogta si ay u maalgeliyaan wadiiqooyinka hal-abuurka maalgashiga ah oo ay ka midka tahay in la helo hanaan deyn-qaadasho oo xoogga saareysa ganacsiyada yar-yar iyo kuwa dhex ee loo yaqaanno MSMEs, iskaashatada iyo tallabooyinka la xiriira ganacsiga heerka bulshada ah. | | ✓ | ✓ |
| | In la billaabo tirakoob qaran ee ku aadan xalka ay bixiyaan ganacsatada iyo fursadaha jira. | ✓ | | |
| | In loo qabto ganacsatada shirar muddeysan oo lagu horumarinayo jawi wada xaajood iyo Isfahan guud. | | ✓ | |
| | In la taageero falanqeynta waddamo-wadaag ah ee fursadaha suuqyada oo ay ku jiraan fursadaha suuqyada shaqada iyo nidaam waddamo-wadaag ah iskuna xirayo mashariicda. | | ✓ | |
| | In la taageero kooxaha dhisa hantida, xoolaha si wacan loo qeybiyo, lana taageero daweynta iyo tallaalka idaha/ari cadka la siiyo dadka xoolo-beero dhaqatada ah iyo xoolaleyda kale ee ka faa'iido (oo ay ka midka yihiin agabka dib-u-billaabashada). | | ✓ | ✓ |

| Natiijooyinka | Howlaha | Muddada | | |
|---|---|---|---|---|
| | | **Muddada Dhow** 1 sano | **Muddada Dhexe** 2-3 sano | **Muddada Fog** 4 sani iyo kabadan |
| | In la dhiirigeliyo ganacsatada in ay maalgashtaan ganacsiyada la xiriira kallumeysiga, xananeynta xoolaha, caanaha, khudarta cagaaran iyo soo saarka khudaarta kale, oo ay kamidka yihiin goobaha ka horreeya magalooyinka iyo warshadeynta kuwaas oo u abuurayo dadka uu saameeyay barakca shaqooyin badan. | | ✓ | |
| | In la abuuro nidaam dhiirigelin u sameynaya dhismaha ururada, iskaashatada, keydka iyo ururada bixyo deymaha, iyo ururada dhallinyarada iyo dumarka | | | ✓ |
| | In la billaabo tirakoob ballaaran oo lagu ogaanayo howlaha socda kuwaas oo looga gol leeyahay sidii loo hagaajin lahaa maareynta kheyraadka dabiiciga ah | | ✓ | |
| | In la dhiso nidaam isku xirayo barnaamijyada adkeysig ee soconayo dhowrka sano ee xoogga saaraya taxaha qybta dhaqalaha ee waxsoo saarka leh, kala duwista heer nololeedka iyo ilaalinta hantida, maareynta khataraha musiibooyinka | | | ✓ |
| | In la abuuro nidaamka maclumaadka suuqa shaqada ee qaranka | | | ✓ |
| | In la sameeyo qiimeyn guud oo muddo dheer soconeysa kuna aaddan suuqa shaqada iyo xirfadaha shaqo ee looga baahan yahay dadka uu saameeyay barakaca. | | | ✓ |
